

Ibnu Qayyim Al-Jawziyyah

# **DULQAADKA IYO MAHADNAQA**

TURJUMID SOO KOOBAYSA KITAABKA

(Uddat as-sabiriin Wa-Dhaakiraat Ash-Shakiriin )

**Waxa Turjumay: Farxaan Aadan Haybe**

Waxa aynu joognaa nolosha marxalad ay hafisay dhaqanka reer galbeedka, kaas oo Diirada saaraya laba fekradood oo baaxad leh. Mid ka mid ah fekradahaasi waa raadinta badhaadhe nololeed oo dhakhso ah, oo dad tiro yari aad moodo in ay isu diyaariyeen filashadiisa, ama ay aad ugu mashquulsan yihiin si ay u hantaan, halka qaarna ay hafisay ama ka cabanayaan duruufaha ka sokeeya oo adag.

Waxa aynu arkaynaa aduunyadan aynu dhex joogno oo ah mid hodantinimo (Wealth) iyo awoodeed (power) sida lagu soo bandhigo tilifiishanada (fogaal-aragyada) iyo filimaanta oo ah sida loo arko, waxaana loo wada tafa-xaydan yahay oo hubaal ah helista badhaadhe degdeg ah aduunyada guudkeeda. Hadaba intee in leeg ayay suurtagal noqon kartaa in dadku ugu fekeraan naftooda si ay isugu diyaariyaan lama huraanta “aakhiro”?

Arrinta kale ee baaxadeeda leh, taasoo dhaqanka reer galbeedku badhi taarayo waxay tahay, iyadoo dadka laga dhigay kooxo kala sarreeya oo kala mudan dhinaca qofnimada, malkada iyo maqaamka. Tan marka laga hadlayo waxa ay tilifiishanada iyo filimada ku soo bandhigaan wax ay in badan ugu talo galeen in ay ku gudbiyaan dareeno laga buuxinayo maskaxda dadka, fekrad ahaana ay sal u tahay in markaad awood iyo dhaqaale hesho ay la mid tahay in aad heshay xoriyada ah **MADAXAABANAAN** ahna in aad u xoriyad u heshay wax kasta oo aad jeceshahay in aad samayso ama ku kacdo ficil ahaan adiga oo aan haba yaraatee ka warwarayn natiijada ka dhalan karta ficiladaas.

Hadaba fekradahaas noocaas ah, waxa loo isticmaalay si loo xaqiijiyo burburinta kuwa itaalka daran iyo inay kuwa awooda sheegtaa baadidoonkooda dhinaca xoriyada u noqdaan kuwa ugu mudan nolosha, taas oo la mid noqayanaysa in aan Allaah Jirin oo aduunyadan khalkhal galisay, kana dhigtay una dhalan gadiyaysa nolol cadaabeed iyo in tartanka iyo khilaafku noqdaan kuwa guusha horseedka u ah.

Danbiyadii ayaa sii kordhaya dunida guudkeeda, halka niyada wanaagsan iyo diintuna yihiin kuwa la suulinayo, la dulaynayo loona hagaasinayo iyadoo loo arko in ku baraarugeedu keenayo khatarta nabadgalyo daro iyo cabsi baahsan. Waxa hubaal ah in korodhka xanuunada maskaxda iyo cadaadis maskaxeedka aduunyada ka jiraa ay calaamad u yihiin raadka xun ee uu sababay dhaqanka ilbaxaynta iyo casriyaynta ee reer galbeedku.

Habka islaamku wuxu si cad uga duwan yahay habka horumarka reer galbeedka . Ilaahay subxaanuhuye isaga ayaa u ogaal ah qaabka ugu fiican ee kasmada garaadka biniaadamka. Quraanka iyo sunahuna waa kuwa ugu haboon ee ka turjumaya dabeecada bini,aadamka. Sidaas awgeed, ayaa islaamku loogu yeedhay inuu tahay

diinta fidrada oo ah; isbadalka nololeed ee lagu dhisayo nolosha qofka bini'aadamka ah ee wadata khayrka. Rag badan oo Culimo iyo saynisyahano Muslim ah waxay si xeeldheer u darsen iyagoo soo saaray aqoon qoto dheer oo ku saabsan dabeecadaha dhaqan ee bini-aadamka iyo cilmi nafsiga, kuwaas oo ka soo maaxday ama farac ahaan ka soo iba-bixiyeen quraanka iyo sunuaha.

Qarniyo horteed, aqoonyahano ayaa soo saaray qaabab islaami ah oo qof kasta oo danaynaya in uu helo niyad xoogan iyo wax ku oolnimo uu raaci karo ama ku hagta sabo nabaadiino.

Hadaba, halka ay dadka qaar la tahay in kallinimo loogu halgamo sidii loo heli lahaa shaqsiyada badhaadhaha iyo farxada, islaamku wuu ka duwan yahay taas waxaanu horseed u yahay halgan ilaahay dartii lagu galo laguna helo garabgalkiisa iyo gargaarkiisa aduun iyo aakhiro, taasina waxaynu u haynaa in ay tahay fekrad islaami ah oo muhiim u ah nolosha “ Ubudiyah” oo ah; noqoshada adoon ilaahay oo dhab ah, gayaysiinaysana qofka maqaamka ah in uu yeesho awooda iyo karaamada ugu saraysa aduunka guudkiisa. Aaminida awooda ilaahay subxaanuhuye; tala saarasho ah ( qofku inuu talo saarto Allaah), taas oo la xidhiidha sida Nabi Muxamed N.N.K.A ku taliyay, *qof kasta oo jecel in uu noqdo kan ugu awooda iyo xooga badan dadka dhexdiisa, dhab ahaan ha u aamino ilaahay*; iyo sabirka oo ah (dulqaad lala yimaado, niyad samaan iyo adkaysi), kaas oo suurta galiya qof inuu waajaho duruufo adag si sharaf iyo isku kalsamaan leh iyo in uu aqbalo waqtiyada fudud isaga oo aan is waynaysiin ama madax taagin.

**Ibnu Qayyim Al-Jawziyyah (1292-1350)**, waxa uu ka mid ahaa aqoon yahanada islaamka u kacay xiligaas aan kor ku soo sheegnay, magaciisa dhamaystirani waxa uu ahaa Maxamed Ibnu Bakr Ibnu Ayuub Ibnu Sacad Assari, kunyadiisuna waxa ay ahayd Abu Abdulaah Shams Al-diin, waxase loogu yeedhi jiray inta badan Ibnu Qayim Al-Jawziyyah. Waxa uu ku dhashay magaalada Dimishiq ee dalka Suuriya, wuxuu ahaa wiilka uu dhalay caawiyihii Iskuulka Jawziyyah. Waxa uu noolaa xiliyadii ay jirtay jaahwareer wayn oo ku dhacay dunida muslimka. Taas oo ahayd weeraradii is-daba joogay ee kaga imanayay mangooliyanka. Dhinaca kalena isla xiligaasi waxa uu ahaa waqti ku suntan barashada aqoonta diinta islaamka, soona baxeen rag badan oo aqoonta diinta u tafo xaytay kana gaadhay heer la yaab leh. Waxa uu Ibnu Qayim wax ka bartay aqoonyahanka wayn ee Sheekha Ibnu Taymiyyah iyo sidoo kale isaga oo aqoon ahaan ka sii dab-qaatay Ibnu Katiir iyo qaar kale.

Hadaba qoraalka kitaabkan waxa laga soo dheegay lagana soo turjumay si kooban miida shaqadii qiimaha lahayd ee Ibnu Al-Qayim “ **UDDAT AS-SABIRIN WA DAAKIRAAT ASH-SHAAKIRIIN** ( oo macno ahaan noqonaysa; Sahay u qaadashada

dulqaadka iyo kuwa xusa ee mahadnaqa). Shaqadani waxa ay si balaadhan uga hadlaysaa dulqaadka iyo mahadnaqa. Inkasta oo kelmada dulqaad (Sabir) carabi ahaan ay leedahay macnayaal qoto dheer oo badan, Hadana waxa ay ku xidhan tahay hadba hadalka ay ku jirto waxase ay macno ahaan ku soo arooraysaa **adkaysi, dulqaad, baarinimo, hayinimo, deganaanshiiyo, is-celin, kalsamaan iyo wax la hal maala.**

Kelmada Shukri hadii aan ku aragno qoraalada kitaabkan waxa loola jeedaa mahadnaq ama mahadcelin. Hadaba mahadnaq iyo dulqaad waxa ay isu yihiin labada waji ee lacagta maarta ka samaysani leedahay oo kale, waxaanay muhiim u yihiin qof kasta oo muslim ahi in uu ka dhaqan dhigto noloshiisa/nolosheeda.

Xikmada ruuxiga ah ee kitaabkani xambaarsan yahay waa mid qof kasta oo muslimka maanta ahi uu si wayn ugu baahan yahay. Marka laga tago cilmaaniyada iyo farsamooyinka khasab ku irmaanaynta ah ee dunida maanta lagu lugooyey, islaamku waxa uu horseed u yahay nolol dhab ah; hadiise islaamka qaybo laga qaato iyadoo qaarna la iskaga tago ama laga indha qarsado waxa hubaal ah in natiijo aan dhadhamayn la helo. Qaybta ugu mudan islaamnimadu, waa marka la caadaysto ku camal falkiisa laguna ladho xuska allaah oo joogto ah iyo baryadiisa, taas oo joogtayisa xusuusta ilaahay si dhab ah iyo la jirkiisa xilli kasta. Hadaba in loo abuurto nafta dhaqan iyo dabeecad islaamnimo oo dhab ahi waxa ay tilmaam u tahay in aad ku sifowdo qof ilaahay ku xidhan sidaana ku hesho la jirkiisa iyo garabgalkiisa waqti kasta.

Inkasta oo kitaabkan la qoray in ka badan todoba qarni horteed, hadana Ibnu-al-Qayyim wax badan ayaad moodaa inuu u sii weeleeyay akhristayaasha maanta ee la gadgadamaya noloshan casriga ah. Noloshan oo ay hafisay dhaqanka reer galbeedka iyo madaxtaaga iyo kala saraynta la dhex dhigay dadka muslimka ah laf ahaantiisa. Hadaba qoraalkan sheekhu waxa uu dib ugu celin doonaa xusuusteena sida uu yahay muslimka dhabta ahi hadii ilaahay yidhaa. Waxaan aaminsanahay in islaamnimadu ay jawaab u hayso dhibaatooyin badan oo maskax ahaan naafeeyay dad badan oo aduunka maanta ku nool. Dhibaatooyinka maskaxeed oo ay ka mid yihiin; cadaadis maskaxeed, waali, diiqad, qabatinka daroogada, IWM. Aqoonta reer galbeedku waxa ay inta badan marka ay is yidhaahdaan arimahaas xal u raadiya ay ka baadi doonaan nafta qofka, halka islaamku uu si ka sii qoto dheer uga hadlo meel ka fog halkaas, ahna Ilaahay oo ah ka abuuray nafta lafteeda. In sidaas la yeelaana, waxay marag u tahay ogaalka ah in aynu oofino ujeedooyinka la inoo abuuray iyo in aan gaadhno nolol nabaadiino iyo deganaanshiiyo uu ilaahay inagu galadaysto kana dareeno nafteena marxalad kasta oo aan ku jiro.

Nasrudiin Al-khatab, December 1996

## **Waxa la daabacay kitaabkan @2010**

Iyada oo uu Kitaabkan asalkiisu ka yimi qoraalkan Ibnu Qayim Al-Jawziyyah AHUN, Hadaba waxa xuquuqda Kitaabkan iska leh Farxaan Aadan Haybe oo isagu luqada afka soomaaliga ku turjumay.

### **Ogolaanshiyo**

Xuquuqda Kitaabkani waa mid loo ogol yahay qof kasta oo jecel inuu ka faaiidaysto ama ugana faa,iideeyo dad xiisaynaya. Sida uu aqbalay turjumaha kitaabkan oo uga jeeday samafal; Qayb kasta oo ka mid ah kitaabkan dib waa loo daabici karaa, waana laga dhigi karaa mid qoran oo electronic ah, waa laga dheegi karaa nuqul kale (copy), balse waa in danta laga leeyahay ahaataa mid samafal oo ilaahay dartiis oo kalliya ah iyo si loo gaadhsiinayo kuwa baahi u qaba in ay ka faa, iidaystaan loogana jeedin dano aduunyo taas waa mida suurta galinaysa in wax ogolaanshiyo ah laga sugin qoraaga, cida daabacaadiisa maalgalisay ama kuwa daabacay.

### **Digniin**

Kitaabkan waxa lagu iibin karaa qiime yar oo u suurta galiya cid kastaa in ay awoodi karto iibsashadiisa mana aha mid loogu talo galay ganacsi balse waa samafal sidaas darteed, waxaan ilaahay dartiis idiinka digaynaa in aan sifo ganacsi loo isticmaalin iyadoo la iib gaynayo lagana eegayo faa,iido.

Farxaan A. Haybe

July 2010

## Ereyga Turjumaha kitaabkan

Mahad oo dhan Eebbaa leh, ka aynu adoomaha u nahay ee ina garansiiyay inoona fududeeyay in kitaabkan soo baxo, Nabadgalyo iyo naxariista ilaahayna korkiisa ha yeelo nabi Maxamed SCW.

Ugu horeyn, waxa kitaabkan asalkiisa qoray Ibn Qayyim Al-Jawziyah ilaahay raali ha ka ahaadee aniguna sidaas ayaan ugu turjumay luqadan afka soomaaliga iyadoo uu ku soo baxay ogolaanshaha iyo gargaarka ilaahay oo ah kan ina siisay awoodda, dulqaadka iyo waliba dadaalka suurta galiyay hawshan.

Waxa aynu ku noolahay aduunyo dhamaadkeedii soo dhow yahay, taasna waxa marag u ah duruufaha badan ee ku xeeran oo ah qaar intooda badani ka hor imanaya waxii loo abuuray. Nin sheekha ayaa yidhi, waxa la leeyahay aduunyadii way horumartay oo waxa ay heer ka gaadhay farsamada tiknoolajiyada casriga ah, waxase is waydiin leh neefka marka la gawraco wuxuu si xoogan isugu kala bixiyaa dhulka isagoo afarta adin iyo qoorta dhulka la dhacaya si xoog aaddan ah si uu u badbaado, taas miyaynu odhan karaa awood dheeraad ah ayuu neefkaasi la soo baxay oo u suurta galisa inuu ka kaco gawraca mise waa khiikhdii ugu danbaysay ee noloshiisa?!

Aduunyadan waxa ay la mid tahay taas oo waxay u egtahay mid shinkeedii buuxsamayo taas sababteedana, uma aha muhiim in aynu is waydiino halka aynu ka nimi waxa'se muhiim ah in aynu is waydiino halka aynu marayno dhinaca aynu uga sii dhaqaaqayno inaga oo maanka iyo maskaxda ku hayna halka ay aduunyadani ku danbaynayso ee loo diyaariyay sabab iyo wax badali karaana aanay haba yaraatee jirin, jiri doonina ilaa ay ka dhamaato.

Noloshan gaaban ee aduunyo waxa ay isu-tusan yihiin nolosha aakhiro sida ninka dhoofaa uu waxogaaga uu soo shaqaysto ugula soo noqdo si uu wax ugaga qabsado dalkiisa ayaa aduunyadanina uga dhigantay aakhiro oo waxii aduunyadan shar iyo khayr lagu sameeyo ayuunbaa aakhirana ina horyaala sida ilaahay boqolaal sanadood hortood inoogu sheegay. Sidaas darteed, waa in aan ka fekernaa taas dabadeedna eegnaa dariiqo aynu u marayno halka aynu u socono ee hadafkeenu yahay. Si hadaba aan u gaadho hadafkeena waa inaan ku mashquulaa kuna haminnaa aakhiradeena inkasta oo nafteena iyo hawadeedu dagaal inagula jiraan, hadana waxa muhiim ah sidii aynu u heli lahayd sabir suurta galiya guusha nolosheena aduun iyo aakhiraba. Waxa hubaal ah in aan sabir la, aantiis nafteena suurtagal u noqoteen in ay haleesho iswaydiin su,aal kaliya inta aan laba gaadhin wax kale, sabirkaas ayaa u ah udub dhexaadka talaabo kasta oo dhinaca nolosha aduunyo iyo aakhiraba loo qaadayo. Kitaabkanina kaliya Sabirkaas iyo mahadnaqa ilaahay subxaanuhuye ay nolosha u leeyihiin ayuu wax inooga iftiiminayaa.

Ibnu Qayim al-jawziyyah wuxuu uga tegay umada muslimiinta dhaxal qiime wayn leh oo kitaabka aan halkan ku turjunay qayb ka yahay, runtii waxa kaliya ee isku daynay in aan umada soomaaliyeed oo inta badan ay ku adag tahay luqadaha kale ay helaan aqoon diintooda

ah oo ku qoran afkooda, waxaan uga jeednay kaliya taas in dadka loo faa,iideeyo iyo in naftayada uga raadino ilaahay agtiisa korodhsiimo dhinaca miisaanka xasanaadka ah. Ilaahayna waxaan ka baryaynaa inuu inaga aqbalo, inta fursad u heshana nuxurka kitaabkan qalbigooda ku raariciyo, si ay xikmadiisa uga faaiidaystaan kaliya aan ahayn aduunyadan balse mahuraanta aakhiro oo ah halka hayaanka looga yahay marka laga tago aduunkan.

Waxaan halkan uga mahadcelinayaa cid kasta oo gacan ka gaystay soo saarista nuqulka soomaaliga ah ee kitaabkan, iyadoo horena loogu qoray luqadaha carabiga, ingiriisida iyo faransiiska. Waxaan halkan si niyad ah ugu xusayaa saaxiibkay iyo walaalkay Cabdikariim Aadan Saciid oo jooga dalka Djabouti magaalada Jabouti oo dibu eegis ku sameeyay qayb laxaad lehna ka qaatay inaan ku dhiirado hawshan. Run ahaan, niyada iyo tabaabushaha Cabdikariim ila garab taagnaa waa mid ilaahay aan uga rajaynayoo inuu ugu naxariisto uguna kordhiyo miisaanka xasanaadka. Waxa kale oo aan la ilaabi Karin qiime wayna lahayd shaqadii saxista iyo waliba talo bixinta lahayd ee culimo dhawr ah oo kitaabka gaar ahaan axaadiista iyo macnaha aayaadka quraanka ah sugay saxnimadooda. Waxa kale oo aan halkan si u cuntanta uga mahadcelinayaa madaxda iyo shaqaalaha hayada samafalka wadaniga ah ee GAVO xafiiskooda Hargeysa oo qorista dhinaca computerka iyo habayntiisaba gacan ka gaystay.

Ugu danbayn, abaal qiime wayn leh waxaan u haynaa cid kasta oo daabacaada kitaabkan wax ku darsatay taas oo run ahaan wax wayn u qabatay ummada soomaaliyeed ee islaamka ah ilaahayna samafalkooda ha ugu badalo liibaan aakhiro iyo mid aduunka labadaba.

*Ilaahay waxaaan ka baryaynaa inuu naga cafiyo waxii xad gudub ama qalad ah ee naga dhacay oo ah mid aanaan u kasin balse garashadayada koobani ay ka masuul tahay waxaan qof kasta oo la kulma meel u baahan dib u eegis ama sixis qoraalka kitaabka dhexdiisa si naxariis leh looga codsanayaa inuu emailkayaga hoos ku qoran ku soo gudbiyo runtii waananu ku farxaynaa arintaas khayrna wuu ka dhitaysanayaa ilaahay idamkii.*

Ugu danbayn, waxaan mar kale ilaahay inooga baryayaa inuu inaga cafiyo qaladaadkeena inoona sahlo garashada sabirka iyo ku dhaqankiisa.

Farxaan Aadan Haybe

July 2010 E.mail: [farhaibe@hotmail.com](mailto:farhaibe@hotmail.com)

Cellphone: 00 252 2 4444431

Hargeysa, Soomaaliland

## **TIRKA KOOWAAD**

### **QEEXIDA MACNAHA DULQAAD AMA SABIRKA**

Kelmada Sabir waa carabi dhinaca luqada, taas oo ka timi nuxur ahaan xejisasho ama adkaysi. Waxa jirtay halku-dheg carabi ah oo la odhan jiray waqtiyadii hore hebel iyo hebel waxa la dilay iyagoo dulqaatay, taas oo loola jeedo in la qabtay dabadeedna la garaacay lana hayay ilaa ay ka dhinteen.

Nuxurka macnaha Sabir ama dulqaadasho waxa loola jeedaa in aan nafteena ka joojino dhaqanka ah in ay quusato ama murugooto si fool xun oo qaawan, in aan carabkeena ka joojino cabashada aynu dadka u cabanayno iyo in gacamaheena aynaan ku garaacin wajiga ama jeexjeexin maryaheena xiliga dhibka ama ay masiibo inala kulanto oo nafteena halaagin sida ay caadada carbeed ahayd.

### **Maxay ka yidhaahdeen culimadu Sabirka ama Duqlaadashada ?**

Culimada qaar waxay ku qeexeen Sabirka ama dulqaadka inuu yahay dabecada ugu fiican ee qof bini-aadamka ahi yeelan karo ama marka loo eegayo aqoonta Cilmi nafsiga in ay sumad u tahay iimaan xoogan, oo ah mid ka celiya nafta inay samayso xumaanta. Waxa hubaal ah, bini-aadamku inaanay ku nagaan Karin nolol uu raali ku yahay ama dhadhan u leh oo caafimaad qabta hadii aanu dulqaad jirin.

Abu Osman waxa uu yidhi; qofka la siiyay dulqaad waa qof ku tababaray naftiisa inuu maareeyo xalna u helo duruufaha adag. Camr Ibnu Cusmaan Al-Makki waxa uu yidhi; Dulqaadashadu waa in aad tahay qof ilaahay u dhow iyo inaad aqbashay kuna raali tahay imtixaankiisa adiga oo aan cabanin, murugoon kana tiiraanyoonin. Al-khawaas wuxuu yidhi; Sabirka ama Dulqaadasho waa in aad adeecday kuna camal fashay quraanka iyo sunnaha. Culimo kale ayaa iyaguna ku sheegay in Sabirka ama dulqaadku yahay in aad iska dayso cabashada dadka loo cawdo. Cali Binu Abi Daalibna N.K.A wuxuu yidhi; Sabirka ama Dulqaadashadu waa filashada iyo inaad isku halayso gargaarka ilaahay.

### **Ma waxa Fiican in dulqaad la yeesho waqtiga ay adag tahay mise dulqaad la,aan?**

Abu Maxamed Al Xariiri waxa uu yidhi; Sabir ama Dulqaadasho waxa weeye in ay isugu kaa mid tahay waqtiga dhibka iyo waqtiga ay noloshu caadiga tahay,



markastana ahaato mid degen oo faraxsan. Ibnu Qayyim waxa uu yidhi taasi way adag tahay umana abuurin sidaas. Ilaahay waxa uu inoo abuuray qaab iyo hab aynu dareeno faraqa u dhexeeya waqtiga murugada dhibka iyo waqtiga ay farxadi jirto, waxa kaliya ee la samayn karaa waxa weeye in aan is celino kuna hayno nafta degenaansho xiliga ay adag tahay ama ay murugo jirto. Markaa Sabirka ama dulqaadashadu maaha in aad xili kasta isku si tahay, taasi waa mid awoodeena ka baxsan kumana jirto, sida ay dabeecada biniaadamku u abuuran tahay. In aan ku jiro waqti farxadeed way ka fiican tahay in lagu jiro marxalad qalafsan oo tiiraanyo leh, sida uu nabigeenu N.N.K.A ku yidhi ducadiisii caanka ahayd; *Hadii aanad Allahayow ii cadhoonayn , waxba ma aha dhibka i soo gaadhaa, waxaanse wadayaa ducadadaada iyo u hilowgaaga.* Taasina kama hor imanayso xadiiska odhanaya; *Qofna ma jirto wax la siiyay oo ka wayn Sabir ama dulqaad waxaana la helaa xilli uu qofku la kulmay imtixaan nolosha ah oo lagu tijaabiyay.*

### **Dulqaadka iyo Cabashada**

Cabashadu waxa ay noqotaa laba nooc: mida hore waxa weeye in aad u cabato ilaahay subxaanuhuye taasina maaha mid ka hor imanaysa dulqaadka waxaana sameeyay nabiyo badan. Tusaale ahaan, markii uu Nabi yacquub lahaa;

*Waxaan kaliya uga cabanayaa Murugadayda iyo walbahaarkayga Allaah.* (Suuratul Yuusuf 12:86)

Mar kalena Nabi Yacquub ayaa lahaa; *Sabrun Jamiil* oo macnaheedu yahay, *Dulqaadka ayaa u wanaagsan adkaysi*

Sidoo kale quraanka ayaa wax inooga sheegay Nabi Ayuub

*Xusuuso Ayuub markii isaga uu u ooyay rabigiisa. Hubaashii waxa i taabtay xanuun dushayda ahaaday* Suurat al- Anbiya 21:83

Nuxurka sabirka, Nabi Muxamed N.N.K.A wuxuu u sujuuday rabigiisa isaga oo leh, Allahayow waxaan kaaga cabanayaa tamar daridayda iyo gargaar la,aantayda. Nabi Muuse N.K.A ayaa isaguna u sujuuday rabigiisa isaga oo leh, allaahayow mahadnaq iyo sharafi adiga ayay kuu sugnaatay, adiga oo kaliya ayay tahay in loo cawdo, waxaanad tahay ka kaliya ee aanu ka helo gargaar adiga ayaanu ku talo saaranay mana jiro awoodi, garab galkaaga iyo gargaarkaaga la,aantiis.

Nooca kale ee sabirku ama dulqaadashadu, waa marka aad duruufahaaga uga cabato ama la wadaagto dadka kale, ha noqoto si toos oo hadal ku gudbino ama si dadban oo daymo ama dareen jidhkeena ah ku gudbino. Taasina waxa ay baal marsan tahay nuxurka sabirka ama dulqaadka.

## **Awoodaha Is-celiya**

Cilmi nafsi ahaan, qof kastaa waxa uu leeyahay laba awoodood oo u shaqeeya naf ahaantiisa. Midi waa awooda qofka dabada ka riixda taas oo u horseeda samaynta ficilo, ta kalena waa awooda qofka ka celisa ama ka hor joogsata ficilo kale. Markaa sabirku si tayo leh, waxa uu isku xidhaa awooda qofka u horseeda samaynta ficilo keena wanaag iyo awooda qofka ka hor joogsata ama u diida samaynta ficilo laga yaabo in ay khatar ku yihiin naftiisa iyo nafaha dadyowga kale.

Dadka qaar ayaa leh sabir ama dulqaad adag marka ay qabanayaan wax u wanaagsan naftooda, laakiin sabir ama dulqaad u lahayn sidii ay uga dheeraan lahaayeen ficilo khatar ku ah naftooda. Sidaas darteed, waxaa la arkaa qof sabir ama dulqaad u leh gudashada salaada, soonka iyo xajka balse aan sabir iyo dulqaad u lahayn inuu naftiisa ka xakameeyo kana joojiyo falalka aan wanaagsanayn iyo doonista xumaanta ay horseedo hawada naftu, taasina waxa ay ku ridaa danbiyo iyo wax xaaraan ka ah naftiisa.

Dhinaca kalena, dadka qaar ayaa sabir iyo dulqaad xoogan u leh ka fogaanta xumaanta iyo macsida ama xaaraanta balse marka ay noqoto cibaadada iyo samaynta camalka wanaagsan waa mid liidata, umana leh sabir ama dulqaad ay ku gutaan. Dadka qaarna haba yaraatee dhinacnaba uma leh awooda sabirka ama dulqaadasho. Uma baahnin in aan nidhaano, sida ugu fiicani waa qofka dhinac kasta dulqaad iyo adkaysi u leh iyo inuu sabir u leeyahay, fulinta salaada, samafalka iyo inuu sabir iyo dulqaad u leeyahay ka fogaanta naftu waxa ay jeceshahay iyo hawadeeda oo horseeda xumaanta iyo danbiga.

Si kale hadii aan u sheegno, waxa laga yaabaa in qof sabir xoogan ama dulqaad u leeyahay inuu salaada waqtigeeda ilaaliyo, sidoo kalena cibaado u taagnaado habeenkii isaga oo u adkaysanaya kulaylka ama qabowga xiligaas, balse sabir ama dulqaad u waayo uu kaga adkaysto eegista dumarka. Qaar kale ayaanay dhibaato ka haysan eegista dumarka oo ka adkaaday naftooda una helay sabir ama dulqaad ay kaga gooyaan is laab raacintooda, balse ay u suurta gali wayday in ay u helaan naftooda sabir ay ugu adkaysato joogtaynta gudashada salaada iyo samo falida.

Dadka badankiisu way iska waayi karaan sabirka ama dulqaadashada nooc ka mid ah mararka qaarkood, laakiin dad yar ayaa inta badan tebaya oo iska waaya sifooyinka oo dhan.

## **Sharaxaad dheeraadka ah ee Sabirka ama dulqaadashada**

Mid ka mid ah culimada ayaa yidhi, in la helo sabir ama dulqaad waxa weeye in qof dareenkiisa guud iyo ahmiyada uu siiyo diintu ay ka awood iyo xoog wayn tahay marka loo eego hawada xun ee naftiisa ay jeceshahay, laakiin dareenka guud iyo ahmiyada diinta ayaa hadii ku sabirkeedu xoog yahay yareeya ama xakameeya ku dhicista hawada xun ee naftu ay jeceshahay. Labadaa awoodood ayaa dagaal ku jira; mararka qaarkood waxa guushu raacdaa diinta iyo ujeedada abuurta, marar kalena hawada iyo doonista (xiisaha ama waxa ay jeceshay) nafta ayaa adkaada. Goobta dagaalkaasi ka dhacayaana waa qalbiga qofka.

Sabirku ama dulqaadashadu waxa ay leedahay macnayaal badan marka loo eego marxalada. Hadii sabirku ama dulqaadashadu ku taxaluqdo in laga dheeraado xiise u haynta sinada, waxa la yidhaa sharaf, waxaana ka soo horjeeda ku dhicista sinada oo ah dhilaysi ama dhilaynimo. Hadii ay tahay inuu qof calooshiisa ilaaliyo waxa galaya, waxa ay noqonaysaa qof is maamuli kara, waxaana ka soo horjeeda cirwaynaan horseed u noqon karta raacista hawada xun ee naftu jeceshay. Hadii ay tahay in aad iskaga aamusto waxa xun ama aad laasimto hadal yaraanta, waxa la yidhaa dhowrsoonaan ama run sheeg, waxaana ka soo horjeeda beenaale ama qof aan sir lahayn. Marka ay tahay qof inuu xakameeyo cadhadiisa, waxa la yidhaa dul, waxaana ka soo horjeeda caadifi ama kacsanaan/fudayd. Marka ay tahay iska ilaalinta degdega, waxa la yidhaa degenaanshiyo ama hayinimo, waxaana ka soo horjeeda madax adayg. Hadii ay tahay iska ilaalinta in aad cararto marxalad adag, waxa weeye geesinimo waxaana ka soo horjeeda fulaynimo. hadii ay tahay iska ilaalinta in aad aargoosato, waxa la odhanayaa iska-cafin waxaana ka soo horjeeda aargoosi. Hadii ay tahay ka fogaanta in aad noqoto caajis, waxa weeye hawl karnimo. Marka ay tahay iska ilaalinta cabashada iyo dhaleecaynta dadka kale waxa weeye raganimo.

Weedho badan ayaa loogu magac bixiyaa sabirka ama dulqaadashada marxalado kala duwan, laakiin dhamaan waxa ay ku sal leeyihiin ama nuxur ahaan ay tahay waa sabir ama dulqaad loogu adkaysto in wax la iskaga fogaayo laguna ilaashado wax kale.

## **Miyay suurta gal tahay in la koobsado calaamadaha sabirka ama dulqaadka ?**

Hadii aanu qofku markiisa hore lahayn tilmaamayaasha dhaqan ee lagu garto dulqaadka, waa in qofkaasi isku dayaa sidii uu u bari lahaa nafiisa dulqaadka, waxaana

ugu horeeya ee uu isku qancinayaa inuu sabir badan yahay, isaga oo ficiladiisa u samaynaya sidii oo uu yahay qof dul badan sidaas ayaanu ku jaraynayaa naftiisa ilaa dulqaadku noqonayo dhaqankiisa labaad sida uu nabigeenu N.N.K.A inoogu sheegay xadiiskan; *qof kasta oo isku daya inuu dulqaad badnaado, ilaahay ayaa ku kaalmeeya inuu noqdo qof dulqaad leh.* Sidoo kale qofku wuu la halgami karaa si uu naftiisa uga celiyo dhilaysiga isaga oo ka xakamaynaya naftiisa eegista dumarka ilaa ay ka noqoto dabeecadiisa labaad.sidaas ayaana loogu dabakhi karaa habkan dabeecadaha kale oo dhan sida deeqsinimada, degenaashaha, geesinimada IWM.

## **TIIRKA LABAAD**

### **ARAGTIYAHA KALA DUWAN EE SABIRKA AMA DULQAADASHADA**

Sabirka ama dulqaadku waxa kale loo qaybin karaa laba, markaasi kale u eegno. Labadaas nooc oo kala ah mid muuqda (physical) iyo mid nafsaawi ah (Psychological) labaduba doorasho iyo doorasho la, aanteed waxa ay noqon karaan sidan;

- 1. Sabirka muuqda ee doorashada ku yimaada waxa ka mid ah shaqo aad qabanayso adigoo jecel*
- 2. Sabirka muuqda ee aan doorashada lahayn waxa ka mid ah xanuun kugu dhaca oo kale ama kulayl ama qabow xoog leh oo ku saaq*
- 3. Sabirka nafsaawiga ah ee doorashada qofka ku yimaada waxa ka mid ah ka fogaanshiiyaha macsida ama waxa xun ee dhaqan ama diin ahaan aan banaanayn*
- 4. Sabirka nafsaawiga ah ee aan doorasho lahayn waxa ka mid ah burburka ku dhaca qoys is jecel sida furiinka nin iyo xaaskiisa oo is jeclaa si khasab ah ku kala tageen.*

### **Darajooyinka kala duwan ee Sabirka ama dulqaadka**

Sida kor ku sheegan, sabirku waa laba, mid doorashadaada ku yimaada iyo mid aan doorasho ku iman. Sabirka ku yimaada doorashadu wuu ka sareeya miisaan ahaan midka aan doorashada ku iman, iyadoo kan danbe uu si guud ula kulmo dadka oo dhan, balse ka hore ma aha mid dadka oo dhami gaadhaan. Sidaas darteed, sabirkii nabi yuusuf N.K.A uu ku diiday dalabkii xumaa ee gabadhii Casiis iyo sabirkiisii u adkaysiga ciqaabtii sababtaas loo mariyay ee ahayd inuu maxbuus jeel ku ahaado mudo, waxay labaduba aad uga miisaan sareeyeen sabirkiisa uu kaga jawaabay ficilkii walaaladii markay ceelka ku rideen , isaga iyo aabihii kala fogeeyeen iyo in loo iibsado nabi yuusuf adoon ahaan. Maqaamka sidan oo kale ah ee naf hurista ahi waxa weeye sabirka nabiyada sida Ibraahiim N.K.A, Muusa N.K.A, Nuuh N.K.A, Ciise N.K.A iyo nabigii u danbeeyay ee Muxamed N.N.K.A. sabirkoodu wuxu ahaa kaliya si ay ugu yeedhaan dadka jidka ilaahay iyo in ay ka hor yimaadaan cadowga ilaahay.

## **Sabirka Dadka iyo Sabirka Xayawaanka**

Afarta nooc ee sabirka ee kor aynu kaga soo hadalay waxa kaliya ay u gaar yihiin bini-aadamka. Xayawaaanku waxa ay wadaagaan kaliya labada nooc ee sabirka een doorashada lahayn, halka dadku ay ku kala duwan yihiin sabirka ku yimaada doorashadooda. Si kastaba ha ahaatee, dad badan ayaa leh sabirka xayawaanka oo kale oo ah sabirka aan doorashada lahayn.

### **Sabirka Jinka**

Jinku waxa uu la wadaagaa tayo ahaan sabirka bini-aadamka oo kale, maxaa yeelay Jinku waxuu masuul ka yahay oo lagu xisaabinayaa ficilkiisa sida dadkuba uga masuul yahay. Sidoo kale, Jinku waxa ay u baahan yihiin Sabir ama Dulqaad ay ugu adkaystaan masuuliyada gudashada waajibaadka ilaahay uu u abuuray ee laga rabo sida inagaba la inooga rabo. Midbaase iswaydiin leh: Ma waxay masuul uga yihiin si la mida sida la inooga rabo mise si ka duwan? Jawaabtu waxa weeye iyadoo lagu xidhayo dareenkooda nafeed waxa ay uga masuul yihiin si inala mida. Waayo, waxa aynu wadaagnaa waajibnimada ah in aynu ilaahay dartiis wax u jeclaano waxna u nacno, in aan aamino kuna toosnaano, in aan dadka aynu isku aaminka nahay ka yeelano walaal, kuwa aynu iimaanka ku kala tagnayna ay inoo yihiin cadow. Laakiin, waxyaalo si muuqda ah oo aynu samayno way inagaga duwan yihiin sida maydhashada marka aad godka ka soo baxno, gudniinka. Sida ay masuuliyadooda u gutaana waxa ay xidhiidh la leedahay sida abuurtoodu tahay ama loo abuuray.

### **Sabirka Malaa,iigta**

Su,aasha kale ee iswaydiinta leh ayaa ah, malaa,iigtu ma leedahay Sabir ama Dulqaadasho? Jawaabtu waxa weeye in aan malaa,iigta lagu tijaabin lahaanshiyaha hawada nafta iyo doonisteeda kuwaas oo iska hor imanayaan Ujeedadooda iyo ogaalkooda sida bini-aadamka. Hadaba malaa,iigta, waxa loo abuuray kaliya in ay ilaahay adeecaan una hogaansamaan amaradiisa, taas ayaa u ah sida neefsigu inoo yahay marka loo eego nolol ahaan. Sidaas darteed, mala,iigtu uma baahna Sabir ama dulqaad. Sababtuna waxay tahay, sabirka ama dulqaadka waxa loogu baahan yahay qof duruufo kala duwan oo iska hor imanaya ku dhex jira sida hawada ay naftu ku tabayso doonisteeda iyo ku

dhaqanka diinta oo sabab u ah ka fogaanta dhaqan xumada sida macsida, beenta, khiyaamada, eegista dumarka, IWM.

Si kastaba ha ahaatee, waxa laga yaabaa in malaa,iigtu yeelan karto nooc sabir ama dulqaad oo u cuntamaya qabashada shaqada iyo ujeedada loo abuuray.

### **Sabirka Ninka**

Hadii sabirka ama dulqaadku qofku yahay mid ka xoog badan kana adkaaday dhamaan hawada nafta qofkaas iyo doonisteeda, qofkaasi waa malag oo kale. Hadiise hawada naftiisa iyo doonisteedu ka xoog badan yihiin sabirkiisa, qofkaasi waa shaydaan oo kale. Hadii doonista naftiisa ee cuntada, cabista iyo galmadu ay ka xoog badan yihiin sabirka uu u leeyahay ka fogaantooda, qofkaasi waxba ma dhaamo xoolaha.

Abu Qataada ayaa yidhi, ilaahay waxu u abuuray malaa,iigta ujeedo ama sabab iyaga oo aan lahayn wax doonis ah.xoolahana waxa lagu abuuray rabitaan balse aan sabab lahayn halka dadka lagu abuuray labadaba rabitaan iyo sababta rabitaankaas.sidaas darteed, hadii qofka ay ujeedadiisu ka xoog badan tahay rabitaankiisa (inuu ku toosnaado ujeedada loo abuuray kana tago hawada rabitaan ee naftiisa), qofkaasi waa malag oo kale, hadii rabitaankiisa naf ahaaneed ka xoog badan yahay ujeedadii loo abuurayna markaa waa sida xayawaanka oo kale. Ilmaha yar ee dhashay waxa uu leeyahay kaliya rabitaan cuno marka uu baahan yahay, markaa sabirkiisu ama dulqaadkiisu waa sida xayawanka oo kale mana laha doorasho ilaa uu ka gaadho xilli da, ahaan uu sheegi karo maxay ayaa sidee ah. Marka uu yara koro ee yeesho rabitaanka ciyaarta, waxa isna la kora sabirkiisa doorashada. Markaas ayuu ogaadaa waxa uu sabirka ama dulqaadku yahay marka ay u abuuranto rabitaankiisa dhinaca galmada. Dhinaca kalena waxa si isla jaanqaad leh u koraya awoodiisa sababaynta, laakiin inta u dhaxaysa xiliga uu gaadho da,da uu kala saari karo waxa xun ama qalad ah iyo waxa wanaagsan ama sax ah iyo xiliga uu ku jiro dhalinyarnimo, labadaba waxa uu arkaa waa rabitaankiisa aduunyada oo kaliya iyo waxa nolosha xumayn kara ama wanaajin kara. Aragtidaas kooban wuu ku sii jiraa qofku ilaa uu helo gargaarka ilaahay, markaas oo uu helo sawir dhamaytiran waxaanu bilaabaa inuu ka fekerro rabitaankiisa oo raad ku leh aduunyada iyo aakhiro labadaba. Waxaana uu ogaadaa halka ay ficilada uu samaynayaa u hogaaminayaan, taas ayaana uu naftiisa ugu diyaariyaa halgan dheer oo uu la galo rabitaankiisa iyo hawada dooniseed ee naftiisa ee dhinaca dabeecada.

## **Darajooyinka kala duwan ee Sabirka ama dulqaadka**

Nooca sabir ama dulqaad ee keena in laga adkaysto hawada nafta iyo doonisteedu waxa uu ku xidhan yahay oo lagu kala saari karaa hadba sida uu u xoogan yahay ama tayo iimaan loo leeyahay iyadoo laga eegayo:

1. Jacaylka diinta oo sal ay u tahay iimaan xoogan ayaa ah midka ugu mudan uguna adag ee suurta galiya ka fogaanta xumaanta ay hawada nafta iyo doonisteedu kugu sabaaleeyaan. Jacaylka diinta oo dhab ah waxa lagu guulaysan karaa marka la helo sabir ama dulqaad xoogan, qofka halkaa gaadhaana waa qof liibaanay aduunyadan iyo lamahuraanta “aakhiro”. Waa kuwa yidhaahda Rabigayo waa Allaah (*Surat Fusilaat 41:31*) kuwaasi waa kuwa marka ay naftu ka baxayso malaaiigtu tidhaahdo, ha muragoonina hana cabsoonina ee hanta mowjadaha janada ee hore la idiinku yaboohay, anaga ayaa ah gargaarihiina aduunyadan iyo aakhiraba (*Surat fusilaat 41:30-31*). Waa kuwa ku faraxsan talo saarashada ilaahay iyo isu dhiibidiisa ee u bixiya naftooda iyo maalkoodaba jidka ilaahay. waa kuwa ilaahay ka xafiday shar oo dhan una ilaaliyo si ka duwan dadka kale.
2. Marka ay hawada nafta iyo doonisteedu ay awood badan yihiin diinta jacaylkeedu hoos ayuu u dhacaa, qofkana xiligaas waxa hareereeya shaydaanka iyo xoogagiisa u adeega. Waxaanay u jiheeyaan una isticmaalaan qofkaas sida iyo meesha ay doonaan. Markaa xidhiidhka uu qofkaasi shaydaanka la leeyahay waxay ka dhigtaa in qofkaasi noqdo, mid shaydaanku hogaamiye u yahay iyo mid ka mid ah ciidamadiisa uu ku ugaadhsado, taas oo lagu garto qofka oo ka hagaasa nolosha. Waxaana qofkaasi shaydaanka u noqdaa hub uu ku dagaal galo iyo mid ka mid ah askartiisa. Waxaanu noqdaa qof u dagaalama una hiiliya xumaanta iyo sharka kana hor yimaada waxa wanaagsan iyo khayrka. Kuwaasi waa kuwa nasiib daradoodu ay madax martay ee raacay beentooda, iyaga oo aduunyo jacayl ku laxaadsaday wax dan ahna ka lahayn aakhiro. Guuldarada ugu wayn ee ku dhacday dadka noocaas ah waxa weeye sabirka ama dulqaadka oo ka suulay, kaas oo ay ku fahmi lahaayeen wanaaga una suurta galin lahaa in ay ka sabraan xumaanta kuna sabraan wanaaga iyo ku camal falkiisa. Hadaba tilmaamaha dadka noocaas ah lagu garto waxa ka mid ah in ay been xoogan sheegan waxna khiyaameeyaan, waxa ay neceb yihiin ama ka xumaadaan fekerka wanaaga ku saabsan iyo dhaqanka suuban, waxa ay dib u dhigaan samafalka ama samaynta ficil khayr leh waxaanay si xoogan uga door bidaan macaashka aduunka oo kaga



mashquulsan yihiin u sahay qaadashada macaashka aan gudhayn ee aakhiro. Kuwaasi waa dadka Nabigeenu N.N.K.A uu ku tilmaamayay; ruuxa taag daran ee tabaryari waa qofka raaca hawada naftiisa iyo doonisteeda, waxaanu neceb yahay ama dhibsadaa fekerka rajada u fiican. Hadaba dadka noocaasi waxay u qaybsamaan dhawr nooc: qaar waxay cadaaystaan dagaal ay kula jiraan ilaahay iyo rasuulkiisa, iyaga oo ku dadaalaya geed gaaban iyo mid dheerba u fuulaya hadimaynta waxii uu keenay nebigu dunida oo ah diinta. Waxaanay dadka ka leexiyaan dariiqa ilaahay iyaga oo aduunyada la dul jooga kharaabin iyo xumaan (fisqi). Qaar waxa ay kaliya jecel yihiin dhaldhalaalka aduunyadan oo ay u ilaashadaan sidii wax aan dhamaanayn oo ah ahmiyada ama ujeedada ugu saraysa ee ay u jiraan, halka qaar kalena ay yihiin kuwo laba wajiilayaal is jeclaysiiya qof kasta cid walbana la socda xaalad kasta oo ay ka qayb qaataan kaliya u gala danahooda gaarka ah. Qaar kale waxa ay yihiin kuwo isku taxalujinaya ama ku dadaalaya is qurxinta iyo ka sheekaynta ashyaada quruxda badan kaliya, kuwana hadii loo digo waxa ay si layaable u muujiyaan in ay jeclaan lahaayeen in ay ka qoomamoodaan kana dhex baxaan xumaanta balse ay ku adag tahay una helayn waqti ay kaga go,aan qaataan, kuwo kalena waxa ay odhanayaan ilaahay waxba ugama baahna salaaada iyo soonka mana aha cibaadaysigu mid aanu ku helayno jano, balse naxariista ilaahay ayaanu hoos joognaa oo aanu isku halaynaynaa, Qaar kale ayaa odhanaya ka tagista xumaantu waxa ay meesha ka saaraysaa in ilaahay yahay dambi dhaafe, Kuwo kale ayaa odhanaya, in aan wanaag samaynaa ama cibaadaysanaa maxay ka taraysaa xumaanta badan ee aan samaynay? Gargaar intee le, eg ayuu heli karaa qofka badwayn liqday ee farihiisa oo kaliyi muuqdaan? Qaar kale ayaa odhanaya, marka ay geeridayadu soo dhowaato ayaanu toobad keenaynaa ilaahayna u soo noqonaynaa.

Badanaa been isugu sheekayn iyo nafta oo lagu raali galiyo xumaanteedu, waxaanay sidaas u yeelayaan waa hawada naftooda iyo doonisteeda xun ayaa ka xoog badan oo faruur xidhay ujeedadii jiritaankiisa oo ah toosnaan iyo cabsida ilaahay kuna qasbay in ay raali ku ahaato naftoodu xumaanteedu. Garashadoodii iyo jiritaankoodii qofnimana waxa xabisay shaydaan si ay uga shaqeeyaan xumaanta iyo ujeedooyinka shaydaanka. Tusaale ahaan waxay la mid tahay, sida muslimiin ay maxaabiis ahaan u qabsadeen kufaartu, dabadeedna ay ku khasbeen in ay cabaan khamri, raacista doofaarada iyo qaadista calaamada kiristaanka ee saliibka ama Krosska. Hadaba ruuxa ilaaba ujeedada loo abuuray ee raaca hawada naftiisa iyo rabitaankeeda xun kana dhiga naftiisa mid ku jirta maamulka shaydaanku waxa uu la mid yahay qof

qabtay qof muslim ah una gacan galiyay gaalada, waayo sidaas oo kale ayuu naftiisa ugu dhiibay shaydaanka isaga oo raali ka ah.

3. Waxa socda mar kasta dagaal ka dhaxeeya (diinta iyo ujeedada qofka loo abuuray) iyo (hawada naftiisa iyo rabitaankeeda). Marba mid ayaana guulaysta oo gacanta sare yeesha. Waanay kala duwan yihiin noocyada guusha ee labada dhinacba. Waana xaalada inta badan ay ku dhacaan muslimiinta kuwaas oo ay iskaga qaldanto ficilada wanaagsan iyo kuwa xumi, iyaga oo is hilmaansan ama is-ilowsan marka ay u kala gudbayaan labadaas marxaladood.

Dadkuna fursadaha ugu danbeeya ee aakhiro waxay xidhiidh la leeyihiin saddexda marxaladood ee aan kor ku soo sheegnay. Dad ayaa galaya janada oo aan cadaab waligood arkayn ama galayn, Qaar ayaa Cadaabta Galaya oo janada waligood urinayn, halka qaar kalena ay cadaabta galayaan balse, janada ku danbaynayaan.

### **Marxaladaha tayo ee Sabirka ama dulqaadka**

Dadka qaar ayaan u abuuri Karin naftooda sabir ama dulqaad ilaa ay u maraan halgan dheer iyo duruufo adag, halka qaarna si fudud u helaan sabirka. Nooca hore, waxa ay ka dhigan tahay sida nin la feedhtamaya nin ka xoog wayn oo iska celintiisu uga baahan tahay inuu isu geeyo waxa uu awood leeyahay oo dhan. Nooca danbe, waxa uu ka dhigan yahay sida nin la feedhtamaya nin ka awood yar, taasina ay ka dhigto inuu si fudud uga adkaado. Sidaas waxa ka dhigan dagaalka ka dhaxeeya askarta raxmaanka iyo askarta shaydaanka. Cid kasta oo ka adkaata askarta shaydaankuna waxa hubaal ah in ay shaydaanka laftiisa ka adag tahay. Cabdulaahi Ibnu Mascuud *Ilaahay raali ha ka ahaadee* waxa uu wariyay; Nin ayaa la lagdamay jinn, oo garaacay debadeedna waydiiyay maxaad sidan ugu tabar daran tahay uguna yar tahay? Jinnkii ayaa ku jawaabay, aad ayaan u xoog waynahay una awood badanay marka loo eego Jinnka kale. Qofbaa waydiiyay Cabdulaahi Ibnu Mascuud, Kaasi ma Cumar Ibnu Khadaab ayuu ahaa? Waxaanu ugu jawaabay yaa kale uu noqon lahaa!

Nin Saxaabadii ka mid ahaa ayaa yidhi; qofka iimaanka lihi waxa uu u garaacaa ama u dhangadeeyaa shaydaanka sida uu awrkiisa u jeedalo ama u dhangadeeyo marka uu safrayo.

*Ibnu abiDunyaa Ilaahay raali ha ka ahaadee ayaa waxuu ka wariyay mid ka mid ah dadkii hore ee wanaagsanaa in shaydaan la kulmay shaydaan kale waydiiyayna sababta uu sida xun ugu dhuubtay. Shaydaankii waxa uu ugu jawaabay waxaan la noolahay nin inta badan xusa magaca ilaahay marka uu cuntada cunayo, sababtaas ayaanan waxba ula cunin. Marka uu wax cabayana waxa uu xusaa magaca ilaahay taasina waxay ii diiday in aan wax la cabo. Marka uu gurigiisa soo galayana waxa uu xusaa magaca ilaahay, taasina waxa ay igu khasabtaa in aan duleedka ka joogo guriga. Markaas ayuu shaydaankii hore yidhi; anigu waxaan la joogaa nin marka uu wax cunayo aan soo qaadin magaca ilaahay, markaa waan iskala cunaa. Marka uu cabayana ma xuso magaca ilaahay oo waan iskala cabaa. Marka uu gurigiisa soo galayana ma xuso magaca ilaahay sidaas darted, waan la hoydaa.*

Sidaas ayaa qof kasta oo caadaysta sabirka ama dulqaadka waxa ka baqa cadowgiisa, qof kasta oo ka dhigta sabirku inuu adag yahayna uu khatar ugu sugan yahay cadowgiisa uguna fududahay cadawgiisu in ay soo weeraraan ama dhib u gaystaan.

### **Maxaa looga Baahan Yahay Sabirka?**

Sabirka waxa looga baahan yahay qaybaha soo socda ee nololsha;

1. Cibaadada iyo u hogaansamida amarada ilaahay
2. Ka fogaanta xumaanta iyo ficilada ku xun ee ka dhanka ah dhaqanka suuban iyo diinta
3. Aqbalaada Xukunada ilaahay ee kala duwan (qada-wa-qadar) tanina waa waanadii uu Luqmaan siiyay wiilkiisa kuna yidhi:

*Inankaygiyow! Salaada oog, wanaaga far xumaantana jooji kuna sabir waxa ku soo gaadha taasina waa cidhibta arimaha oo dhan. (Suurat Al-luqmaan)*

In la faro qof wax u wanaagsan naftiisa, lagana hor joogsado wax u xun naftiisa waxa ay koobsanaysaa ka fogayn aad ka joojisay qof naftiisa ficil xun.

### **Sabirka in Allaah loo hogaansamo**

Sabirka ama u adkaysiga ah in aad ilaahay caabudo una hogaansamaato awaamiirtiisa waxa loola jeedaa in aad dhamaan shaqada cibaado ee qofka ku waajibka ah u fuliso si joogto ah, kuna fuliso si hufan oo leh asluubteeda iyo aqoonteeda. Cibaado aan la

joogtayni ma laha miisaan. Haba noqoto mid joogto ah, waxase jira laba khatarood. Mida hore, waxa aynu khatar ku galaa luminta daacadnimada iyo asluubta salaada hadii aanu jirin rabitaanka ah in ilaahay subxaanuhuye lagu raali galiyo, looguna dhowaado. Hadaba si aan cibaadadeena u ilaalino, waa in aan hubinaa sida aan uga daacadnahay. Mida labaad, waa in aan xaqiijinaa in aynaan ka tegin raacista habkii nabigeena N.N.K.A taas oo ah, in aan hubino in cibaadadeenu waafaqsan tahay sunnaha.

### **Sabirka aad kaga fogaanayso ficilada xun**

Sabirka noocan ah waxa lagu guulaysan karaa iyadoo laga cabsanayo ciqaabta ilaahay *subxaanuhuye* ee jawaabta u ah ficilada xun ama xishood laga xishoodo denbi dhacay in lala tago ilaahay hortiiisa, taasna looga faaiidaysto baryada ilaahay adigoo ogsoon waxaad samaysay danbi dhaafna waydiisanaya.

Hadaba, dareenka ah xayya ama xishoodka in laga baqo ilaahay *subxaanuhuye* inuu ku arkayo iyo la kulankiisa waxa lagu heli karaa ama lagu xoojin karaa barashada ilaahay *subxaanuhuye* iyo korodhsiga aqoonta ah in wax badan laga ogaado lagana fahmo awoodahiisa, magacyadiisa iyo kalinimadiisa aan cidi ku lamaanayn abuurista. Xayya ama xishoodku waa sumad tilmaameed lagu garto dadka qaaliga ah ee leh tayada sare ee qofnimo. Hadaba qofka iska daaya ficilada xun, kana fogeeya naftiisa isaga oo ka xishoonaya ilaahay wuu ka sareeyaa dhinaca iimaanka qofka isaga fogeeya cabsida ilaahay *subxaanuhuye* darteed. Xishoodku waxa uu cadayn u yahay in qofkaasi caqli badan iyo garasho sare u leeyahay ilaahay *subxaanuhuye* iyo baaxada awoodihiisa. Qofka dabarka ay u tahay cabsida ilaahay *subxaanuhuye* waxa ay maskaxdiisu ku foogan tahay ciqaabta maalinta aakhiro. Si kale hadii aan u dhigno, qofka dabarka naftiisu yahay xishood fekerkiisu waxa uu ku foogan yahay ilaahay naf-ahaantiisa *subxaanuhuye*, halka qofka cabsanaya ay ujeedada ugu weyn ee ka danbaysa cabsidiisu tahay naftiisa siduu uga badbaadin lahaa cadaab. Waxase cad in labaduba gaadheen darajada iimaanka laakiin kan xishoonayaa waxa uu gaadhay ixsaan oo ah halka ugu saraysa ee iimaanka, taas oo ka dhigan in uu ula dhaqmayo naftiisa sidii ay arki karto ilaahay dabadeedna ay qalbigiisa ka buuxsamayso xishood (Xayya).

Sababta ay qofka rumeeyaha ah ugu muhiim tahay in uu ka dheeraado ficilada xun waxa weeye si uu u ilaaliyo iimaankiisa maadaama ay ficilada xumi laciifiyaan iimaanka ama keenaan iimaan daro. *Nabigu N.N.K.A waxa uu yidhi, marka qofka saaniga ahi uu sinaysanayo ma aha rumeeye, marka qofka khamriga cabaa cabayana ma aha rumeeye, marka tuugu wax xadayana ma aha rumeeye. Qofka rumeeyaha ahi waa inuu ka fogaado ficilo badan oo la ogolyahay si aanay ugu horseedin inuu ku dhaco ficil xun oo xaaraan ah.*

## **Sabirka xiliyada imtixaanka iyo duruufaha adag**

Sabirka xiliyada duruufaha adag waxa lagu gaadhi karaa:

1. Ka fekerada wax wanaagsan oo khayr leh oo aad samaysay oo xusuustaada ku jira. markasta oo aad ogtahay sidoo kalena aaminsan tahay rajada abaal ee ku sugaysa, way kuu fududaanaysaa in aad sabirto una adkaysato marxalada adag. Hadii aanay jirin filashada iyo rajada abaalmarintu, waxa hubaal ah in aanay suurta gasheen in qofna uu gaadho himiladiisa ama uu ka jibo keeno ujeedooyinkiisa noloshan iyo mida aakhiraba. Bini-aadamku waxa uu jecel yahay gaadhista guusha farxada oo degdeg ah, laakiin ujeedada iyo qaan-gaadhnimada qof ahaaneed ayaa inoo suurta galisa ka fekerka natiijada himilooyinka fog, taas oo inagu kaalmaysa inuu xoogaysto sabirkeenu inagoo duruufo qalafsan ku dhexjira haba ahaato in aanay kala doorasho jirin ama hadii ay tahay;
2. Filashada waqti farxadeed ama mid ka fursado badan. Rajadaas lafteeda ayaa iftiimisa qiyaas ka soo rayneed oo dhakhso ah;
3. Ka fekerka galladaha (nimcooyinka) ilaahay ee aan tirada lahayn. Marka aynu garawsano in aynaan tiro ku koobi karayn, waxa ay inoo fududaysaa in aynu helo sabir inagoo ku jira duruufo adag. sababtuna waxa weeye, masiibooyinka iyo duruufaha qalafsani waxa ay ka dhigan yihiin sida dhibcaha roobka marka loo eego nimcada iyo naxariitsa ilaahay inagu galadaystay ee ka dhigan sida biyaha badaha waaweyn.
4. Ka fekerka deeqaha iyo nimcada ilaahay kuugu galadaystay hore. Tanina waxa ay ku xusuusinaysaa sida ilaahay uu nafteena u daryeelo inooga lexejeelo badan yahay, taasina waxa ay kor u qaadaa filashada iyo rajada ah in ay sida ay tahay ka fududaan doonto waqti wanaagsanina iman doono.

## TIIRKA SADDEXAAD

### SHAN NOOC OO SABIR AMA DULQAADASHO

Sabirka waxa kale oo loo qaybin karaa shan qaybood inagoo ka eegayna shanta nooc ee dhaqanka ama ficil loo sameeyo kuwaas oo kala ah;

Waajib (Obligatory), Ku dhiirasho (encouraged), Mamnuuc (forbidden), La kohdo ama la dhibsado (Disliked), La ogol yahay (Permissible)

#### Waajib

1. Sabirka ah in laga fogaado ama la iska daayo waxyaalaha iyo ficilada xaaraanta ah ama dembiga ah
2. Sabirka ama u adkaysiga ah fulinta amarada waajibka ah
3. Sabirka ama u adkaysiga maraxalad ku soo waajahday oo ka baxsan awoodeena qof ahaaneed sida xanuunka, faqriga, IWM.

#### Ku dhiirasho

1. Sabirka lagaga fogaanayo waxyaalaha la dhibsado
2. Sabirka ama u adkaysiga in la sameeyo camalo wanaagsan iyo cibaadaysi la jeclaysto
3. Sabirka ah in la qaadin talaabooyin aargoosasho ah

#### Mamnuuc

1. Sabirka lagaga fogaanayo cuntada , cabista ilaa xilliga geerida
2. Sabirka lagaga fogaanayo cunista hilibka xaaraanta ah, bakhtiga, dhiiga marka aanay jirin wax kale oo la cuno tahayna in gaajo loo dhinto. Tawis iyo Axmed Binu Xambal AHUN ayaa yidhi; *qof kasta oo aan doorasho kale lahayn helayana cunto ahaan bakhti, hilib xaaraan ah ama dhiig, laakiin diida inuu cuno dabadeed sidaas ku dhinta waxa uu galayaa cadaabta*
3. Sabirka lagaga fogaanayo in la tuugsado ama la baryo dadka xishood la,aan (il-xayiiignimo ah).waxa jirta muran ku saabsan baryida dadka in la ogol yahay iyo in aan la ogolayn. Imaam Axmed AHUN wuxu yidhi; *Sabirka iyo adkaysiga noocan ah waa la ogol yahay.* Waxaa la waydiiyay, ka waran hadii qofku ka cabsi qabo inuu dhimanayo hadii aanu tuugsi samayn? Imam

Axmed AHUN Waxa uu ku jawaabay, *Maya, Uma dhimanayo. Ilaahay ayaa u soo diraya risqiisa*. Imam Axmed AHUN muu ogolaan tuugsiga marka ilaahay ogyahay duruufka iyo baahida qofka iyo niyadiisa fiican ee ah iska daynta tuugsiga ama baryada, sidaas ayaa ilaahay risqiisa ugu soo dirayaa. Culimo kale oo ay ka mid yihiin Imam Axmed ragii la jiray xiligaas oo uu ka mid ahaa Imamu shaafici AHUN ayaa yidhi, *waa waajib in qofkaasi uu baryootamo ama tuugsado, hadii uu tuugsan waayo waxa uu noqonayaa xumefale ama dambiile sababta oo ah tuugsiga ama baryada dadka ayuu kaga ilaalin karaa geeri ay naftiisa u horseedo gaajadu.*

4. Sabirka ah in loo adkaysto dhib kaa soo gaadha waxyaalaha keena dhimashada sida dhagarta, qaniinyada maska, dabka iyo biyaha.
5. Sabirka lagaga fogaanayo xiliyada imtixaanka (fitnada) ee dagaal ka dhaxeeya dad muslim ah oo is dilaya si aanad uga qayb qaadan dhiiga muslimka isku daadanaya in sidaas la yeelaana waa si la jeclaysto, sida nabigeenu N.N. K. A mar la waydiiyay uu yidhi; *waxaad jeclaataa in aad la mid noqoto ka fiicnaa labadii wiil ee nabi aadam*. Xadiis la mid ah kan waxa uu ku yidhi; *waxaad doorataa in aad noqoto adoonkii ilaahay ee la dilay hana noqonin kii wax dilay*. Markaas ka wax dilay waxu uu isku qaadayaa oo garbaha u ridanayaa denbigiisii iyo kuu dilay danbigiisii labadaba. Xadiis kale waxa uu yidhi; *hadii seeftu ay aad u dhalaalayso una afaysan tahay gacmahaaga wajigaaga saar*. Ilaahay ayaana inoo sheegay labadii wiil ee Ilma aadam sida ay kala ahaayeen iyo midka fiicnaa iyo siduu isu difaacay ee aanu ula dagaalamin walaalkiisii dilay iyo sida ilaahay u amray sidaas. Tani way ka duwan tahay marka islaamku la dagaalamayo gaalada; marxaladaas waxa muslimiinta la gudboon in ay is difaacaan, sababta oo ah jihaad wax kale maaha ee waa in aad naftaada difaacdo iyo diintaada.

### **La dhibsado**

1. Sabirka lagaga fogaanayo dhadhamada muuqda sida cuntada, cabista iyo galmada kuwaas oo caafimaadka qofkana Qatar galiya.
2. Sabirka lagaga fogaanayo samaynta xumaanta iyo ficilada xun

### **La ogol yahay**

Sabirka lagaga fogaanayo waxyaalaha la ogol yahay ee mubaaxa ah

## **TIRKA AFRAAD**

### **SABIRKA WANAAGSAN IYO SABIRKA XUN**

Sabirka xumi waa marka laga fogaado ilaahay jacaylkiisa iyo doonistiisa, sababna u noqota iyadoo qofka ka horjoogsata gaadhista iimaanka iyo fulinta masuuliyada loo abuuray. Tani waa nooca ugu liita sabirka iyo midka ugu adag, sababta oo ah ma jiro wax lagu sabro loona adkaysto oo ka xoog badan marka ay tahay nafta oo iska ilowda kagana fogaata Ilaaheedii abuuray xumaan ay samaynayso. Marka si kale loo eegana, waxay ka dhigan tahay qofka oo ku jira nolol aan jirin ama nolol la,aan. Qofna kama liito kama qiime hooseeyo jiritaan ahaan qof aan danba ka lahayn ama u jeedin waxa ilaahay u diyaariyay uguna yaboohay saaxiibadiisa (awliyada) nolosha danbe ee aakhiro, taas oo ah in waxaan ishu hore u arag, dhegina hore u maqal, qofna hore u sii saadaalin ama uga fekerin. Xilli ayaa Nin saahid ahi la yaabay saahid kale oo ka haajiray jacaylka aduunyada, waxaanu ku yidhi, ma arag nin kaa saahidnimo badan. Ninkii Saahidka ahaa waxa uu ku yidhi saahidkii kale, saahidnimadaada ayaa ka xoog badan tayda sababtuna waxa weeye saahidnimadaydu waxa ay la xidhiidhaa aduunyada, noloshuna waa mid gaaban oo aan sal lahayn, laakiin saahidnimadaadu waxa ay la xidhiidhaa aakhiro taas oo ah mid aan dhamaanayn.

Nin ayaa isaguna waydiiyay Shibli, sabirka midkeebaa ugu adag? Waxa uu Shibli yidhi, sabirka lagu baadi doonayo helista raalinimada ilaahay iyo gargaarkiisa. Ninkii ayaa yidhi maaha. Shibli ayaa yidhi, Sabirka loo sameeyo ilaahay dartiis. Ninkii ayaa yidhi maaha dabadeed ayuu Shibli yidhi, waa sidee markaa? Ninkii waxa uu ugu jawaabay, “Sabirka kaa fogeeya ilaahay” Shibli ayaa u qayliyay qaylo uu ku dhiman gaadhay.

Sabirka wanaagsani wuxuu u kala kacaa laba wado – 1) Sabirka ilaahay dartiis iyo 2) sabirka raalinimada iyo gargaarka ilaahay. Ilaahay ayaa subxaanuhuye yidhi,

*Hadda ku sug sabir amarka rabigaaga ; si xaq ah waxaad ku sugan tahay indhahayaga (Suurat al Dur 52: 48)*

Suurta gal maaha in la yeesho dulqaad ilaahay dartiis ah, iyadoo aan lagu helin dulqaad gargaarka ilaahay.

*Sabir, mana aha sabirkaagu dar Eebe mooyee,(Suurada Al-Naxal 16:127)*



Suuradani waxa ay inoo sheegaysaa inaan gargaarka Ilaahay la,aantiis Sabirka ama dulqaadka la helayn, taas oo macnaheedu yahay marka lagu daro gargaarka ilaahay waxa kale oo aynu u baahan nahay garabgalka ilaahay. Sida xadiisku sheegay:

**Waxan ahay maqalkiisa uu igu maqlayo, aragiisa uu igu arkayo, hadii aanu dhaqaaqin ama aanu waxba samayn ilaahay ayaa mar kasta la jira oo la jooga. Qof kasta oo martabadaas gaadha, waxa uu yeelan karaa sabirka ilaahay dartiis, waxaana la mariyaa marxalado adag si ay u farxad galiso. Qofka aan gaadhin martabadaas, ma helo sabirka ilaahay dartiis; darajada sabirkiisu waxa ay tahay mid la xidhiidha sida ay tahay la socodka iyo isu dhiibidiisa ilaahay subxaanuhuye. Qofka rumeeyaha ah ee isu dhiiba ilaahay jecelna la jirkiisa waxa hubaal ah inuu gaadhi doono darajada sabirka noocan ah, kaas oo aan sinaba iyo marnaba u suurta galin dadka kale. Kuwa la siiyay ama helay sabirka noocan ahina waa kuwo guulaystayaasha aduunyada iyo aakhiraba sababtuna waxa weeye ilaahay ayaa la jira.**

*Ilaahay waxa uu la jiraa kuwa sabirka badan,(Suurada Al baqarah 2:153)*

## **Raacista tayada kelinimo ee Allaah**

Hadii qof jecel yahay awoodaha ilaahay, taasi waxa ay ka caawisaa inuu gaadho. Ilaahay waa dulqaad badane (As-sabuur) mana jiro cid ka sabir badan isaga. Waxa la wariyay in ilaahay ku soo dejiyay nebi Daa,uud N.K.A, Hayso sifooyinka awoodahayga, waxaana ka mid ah sifooyinka in aan ahay dulqaad badane (as-sabur). Ilaahay subxaanuhuye wuu jecel yahay sifooyinka kelinimadiisa, waxaanu jecel yahay saamaynta ay ku leedahay adoomahiisa. Sida uu u qurux badan yahay ayuu ilaahay subxaanuhuye u jecel yahay quruxda;sida uu cafis badan yahay, ayuu u jecel yahay cafiska; sida uu deeq badanaha u yahay, ayuu u jecel yahay kuwa deeqsiyiinta ah; sida uu ogaal badanaha u yahay, ayuu u jecel yahay dadka aqoonta leh; sida uu u xoog iyo awood badan yahay, ayuu qofka iimaanka xoogan leh uga jecel yahay kan iimaanka liita; sida uu u dulqaadka badan yahay, ayuu u jecel yahay kuwa dulqaata; sida ay mahad oo dhami ugu sugnaatay, ayuu u jecel yahay kuwa mahad celiya. Sidaas maadaama uu u jecel yahay kuwa leh sifooyinka kelinimadiisa ee dhinaca dhaqanka ayuu ilaahay subxaanuhuye ula jiraa cida ku sifowda taasina waa la-jir mucjiso oo gaar ah.

## **Wax khilaaf ahi kama dhaxeeyo Sabirka iyo in ilaahay loo cawdo.**

In la barooro ama la ooyo iyada oo ilaahay loo cabanayo ma,aha macnaheedu in qofkaasi aanu lahayn sabir ama dulqaad.Quraanka, waxaan ka helaynaa nebi Yacquub N.K.A oo leh, *sabirkaa fiican* (Yuusuf 12:83), laakiin waayista uu tebay iyo jacaylka uu u qabay inankiisii yuusuf ayaa keliftay inuu yidhaa, *siday u wayntahay murugadayda yuusuf dartiis* (Suurada Yuusuf 12:83). Sabirka oo la magansado waxa loola jeedaa in aanad qof bini-aadam cabashadaada u gudbin. Ilaahay oo loo gudbiyo cabashaduna maaha mid sabirkii aanu jirin, Sida Nebi Yacquub yidhi, *waxaan uga cabanayaa walbahaarkayga iyo murugadayda ilaahay* (Suurada Yuusuf 12:86).

Ilaahay subxaanuhuye, waxa uu u tusmeeyay nebiga N.N.K.A sahayashada sabirka waanu aqbalay nabigu markii uu sujuuday isaga oo leh, Allahayoow, waxaan kaaga cabanayaa tamar daraantayda iyo awood daraantayda.

## **TIRKA SHANAAD**

### **SABIRKA DADKA CAQLIGA FIICAN IYO SABIRKA DADKA MAAN GAABKA AH**

Qof kastaa waa inuu ku dirqiyaa naftiisa kuna dadaalaa sabirka isaga oo wajiga u dhigaya duruufo adag ha jeclaysto ama yaanu jeclaysan. qofka qiimaha lihi waxa uu ku dadaalaa sabirka isaga oo jecel, sababtuna waxa uu ogyahay faa,iidada sabirka, waxaanu ogyahay in lagu abaal marinayo sabirkiisa hadii uu niyad jabana in lagu dhaleecaynayo. Waxa uu ogaalkeeda hantay in aan niyad jab ama sabir daraani waxba ka tarayn gaadhista guusha. Waxa kale oo uu ogyahay in wax kasta oo la qadaray (Qadaa wa qadar) aanay wax is hortaagayaa jirin dhicistooda. Wax kasta oo la qadaray in aanay dhacaynina aanay sinaba u suurta gal ahayn dhicistoodu. Sidoo kalena, in la niyad jabaa ama la murugoodaa ay tahay mid khatar caafimaad daro keeni karta.

Nin caqli badan ayaa yidhi, talaabo ninka caqliga lihi uu qaado isla marka ay soo muuqato marxalad adagi ama ku dhacdo ayuu kaslaawe ama nacasku bil ka dib qaadaa.

Ruuxa caqliga leh waxa uu sabraa ama dulqaata marka aan doorasho kale oo u banaani jirin aan ahayn, ka dib markuu isku qanciyo in waqti iyo tamar badan oo uu dayacay,halgan iyo niyad jab ay u keento sabir la,aantiisu waxba ka tarayn duruufiisa. Markaas ayuu go,aansadaa in uu naftiisa ku tababaro sabir, sida qof loo xidhay laguna garaacayo/jeedalayo barashada sabirka.

Qofka qaaliga ah ama caqliga leh waxa uu sabirka ku tababartaa isaga oo ula jeeda adeecida amarka ilaahay, halka qofka maan gaabkuna waxa uu dhinaciisa sabirka ku tababartaa isaga oo raacay amarka shaydaanka. Sidaas ayaanay dadka maanka gaabani u leeyihiin sabirka ama dulqaadka ugu wayn iyaga oo raacaya hawada naftooda iyo doonisteeda, lagana yaabo in ay sabirka ugu yar ku adeecaan amarada Ilaahay. Waxaanay sabirka iyo dulqaadashada ugu xoogan uguna saraysa u leeyihiin u hurista ama ku bixinta (maal, mood, muruq iyo maskax, IWM), waxkasta dariiqa shaydaanka iyo raacista amaradiisa umana helaan sabir iyo dulqaad haba yaraatee ay ganbooyin lacag ah ku bixiyaan ilaahay dartiis. Waxaanay u adkaystaan duruufo iyagoo joogteeya xumaan iyo shar si ay ugu raali galiyaan naftooda, iyagoo raacaya hawadeeda iyo doonisteeda, umana adkaysan karaan duruufo fudud si ay u raali galiyaan ilaahay subxaanuhuye. Dadkaas maanka gaabani, waxa ay u adkaystaan cayda iyo dhaleecaynta xumaanta iyo ficilada sharka ah ee ay samaynaayan darteed, umana adkaystaan dhaleecaynta iyo aflagaadada ka soo gaadha wanaaga iyo khayrka ay u

sameeyaan Ilaahay dartiis. Dadka noocaasi, waxa ay uga fogaadaan ficilada wanaagsan ee khayrka leh iyaga oo ka cabsi qaba waxa ay dadku odhan doonaan. Si kasta oo ay tahay, waxay u haystaan sharaf in lagu dhaleeceeyo ku sabirkooda xumaanta ay ku dhex jiraan, iyaga oo ula jeeda in ay naftooda kaliya ku raali galiyaan hawadeeda iyo doonisteeda. Sidoo kale, kuwaasi ma,aha qaar u soo jeediyay una diyaariyay naftooda in ay tijaabiso sabirka ku hagaya naftooda rabigii abuuray, balse marka ay timaado ku hagista naftooda shaydaanka iyo raacista hawadeeda iyo doonisteeda, waxa ay si la yaab leh u abuurtaan sabir ama dulqaad xoogan. Dadkaasi waligood iyo waaqood ma noqdaan dad caqli wanaagsan marka ay tahay ogaalka ilaahay, maalinta qiyaamana lalama soo saarayo dadka wanaagsan.

## **TIRKA LIXAAD**

### **HABABKA LOO XOOJIYO SABIRKA QOF AHAANEED AMA DULQAADASHADA**

Sida uu sabirku u yahay waajib, ayaa ilaahay subxaanuhuye uu inoo siiyay habab iyo siyaabo aynu ku heli karo kuna xoojin karo tayada sabirkeena ama dulqaadkeena, mana jiraan wax ilaahay inoo sheegay in aan samayno oonu ina siinin habab iyo dariiqooyin aan ku fulino ama aynu samayn karo ogaalkiisa iyo taageeradiisa la,aanteed. Ilaahay ma abuurin xanuun aanu soo dejinin dawadiisa, waxaanu damaanad qaaday caafimaadka iyadoo ay awoodiisa ku suurta gashay in dawada lagu dawoobo marka la isticmaalo. Sidaas oo ay tahay, hadana sabirku waa wax adag, balse gaadhistiisu maaha waxaan suurta galayn.

Sabirku waxa uu ka kooban yahay laba, aqoon iyo ficil, labadaas ayaanay ka imanaysaa dawada ama xalka dhibaato kasta oo mid ruuxi ah oo gudaha qofka ah iyo mid banaanka ah oo durufaha dibada la xidhiidha. aqoonta iyo ficilka oo la isku dhaabadeeyaana waa lagama maarmaan.

#### **Aqoonta**

Aasaaska ama seeska aqoontu waxa ay lagama maarmaan u tahay aqoonsiga iyo in la fahmo faa,iidada ay leedahay raacista amarada ilaahay iyo helista dareenka farxada iyo helista waxii qof ku gaadhi lahaa raacisteeda; in la fahmo waxa aan la ogolayn ama loo diiday qofka dhibaato ay keenayaan awgood, dhaqan xumo iyo shar. Markuu qofku taas aqoonsado, ee uu la yimaado niyad adag, jacaylka ah inuu hagaajiyo naftiisa iyo doonista ah inuu u noolaado sidii qof bini-aadam ah ( taas oo ka soo horjeeda in lagu noolaado nolosha xayawaanka), markaas ayay qofka suurta gal u tahay gaadhista sabirka tayada leh xoogan. Dhibka sabirkuna waxa markaas uu noqdaa macaan xanuunkiisuna waa farxad.

#### **Ficilka**

Sida aynu hore u aragnay, sabirku waa dagaal si jooqta ah uga dhaxeeya ujeedada iyo diinta oo dhinac ah iyo hawada nafta iyo doonsiteeda oo dhinaca kale ah. hadii qofku doono inuu raaco ujeedadii loo abuuray iyo diinta si uu uga guulaysto hawada nafta iyo doonsiteeda, waa inuu xoojiyaa mida hore laciifiyaana ta danbe, sida marka la doonayo caafimaadka qofka waxa uu ku jiraa iyadoo la laciifiyo khatarta xanuunka. Tusaale ahaan, qof aad u xiisaynaya inuu sameeyo sino ama dhilaysto wuxuu qaadi karaa talaabooyin uu kula dagaalamo. Waxa la yaabaa inuu leeyahay muran naftiisa dhexdeeda ka socda oo ah in aanu joojin Karin samaynta sinnada; ama in aanu samayn

sinno ama dhilaysi, balse aanu awood u lahayn uu ku joojiyo eegista dumarka; ama laga yaabo inuu iska joojin karo eegista dumarka balse aanu ka joojin Karin maskaxdiisa fekerka ah galmo. Markaa ilaa xad ayuu gaadhay fekerkiisa oo dhami uu ku foogan tahay arintan, manuu siin naftiisa fursad ay kaga fekerto waxyaalo faa,iido u leh aduunyadan ama aakhiro. Hadii uu baahi wayn u qabo inuu dawo ama xal u helo xanuunkaas waxa u banaan inuu raaco talaabooyinkan:

1. Waxa uu baadi dooni karaa noocyada cuntada ah ee kordhiya xiisaha nafta ee galmada, markaas wuu yaraynayaa cuntooyinkaas ama wuu iska daynayaa cunistooda. Hadii taasi shaqayn waydo, wuu soomayaa sababta oo ah soonku wuu gudhiyaa doonista galmada, gaar ahaan marka cuntada lagu afurayaa ay iska tahay mid dhexdhexaad ah.
2. Waxa uu hoos u dhigayaa jaleecadiisa iyo inuu iska joojiyo eegista dumarka, maadaama eegista dumarku ay dardar galiso xiisaha nafta ee galmo. Nabigeena N.N.K.A ayaa inooga digay, eegista dumarku waxa ay ka mid tahay leebabka shaydaanka, leebabkaas oo shaydaanku ku gano qalbiga ninka, mana jirto si kale oo looga celin karo leebabkaas qalbiga kaliya waa iyadoo la yareeyo jaleecada (eegista dumarka). Hadiise qofku caadaysto eegista dumarka, wuxuu qalbigiisa u baneeyay leebabkaas, midkasta oo kuwaas ka mid ahina waa khatar.
3. Waa inuu qofku daneeyaa ahmiyadna siiyaa galmada xalaasha ah oo ku imanaysa guurka, sababta oo ah doonis kasta oo dabiici ah, taas oo ilaahay ku abuuray nafteenu waxa ay leedahay xal lagaga baxsado oo la ogol yahay, taasi ayaana dawo u ah sida rasuulkeenu N.N.K.A sheegay.
4. Waa inuu ka fekeraa khatarta iyo dhaawaca ku iman kara naftiisa aduunyada dhexdeeda taas oo ay sabab u tahay samaynta galmo sifo aan banaanayn. Hadiiba aanay jiri lahayn jano iyo cadaabi, khatarta uu ku keenayo ficilkaasi aduunyada guudkiisa ayaa ugu filan inuu iska joojiyo samayntiisa. Dhaawaca qof ahaaneed uu keenayo ficilkaasi wuu ka wayn yahay wax tiro lagu soo koobi karo, laakiin xiisaha galmada ayaa dadka qaar indho tira.
5. Waa inuu ka fekeraa foolxumada qofka doonaya inuu u galmoodo, si gaarana hadii ay tahay gabadh la qabo ama doonan ama mehersan waana in ay ka hanwaynaato in ay aydu iyo yeydu ka cabto ama inuu halkii ayda iyo yaydu ka cabtay ka cabo.

## **Xoojinta ujeedada Abuurta iyo diinta**

Dagaalka ka dhaxeeya ujeedada iyo diinta oo dhinac ah iyo hawada nafta iyo doonisteeda oo dhinaca kale ah waxaynu u haynaa hubkan soo socda si aan isaga riixno:

1. Waa in aan xusuusnaano ahmiyada ama qiimaha wayn ee awoodaha iyo qudrada ilaahay, iyada oo maanka lagu hayo siday u wayn tahay in lagu dhaco danbi xadgudub ah, isaga oo ilaahay yahay ka waxkasta arka waxkastana maqlaya. Qofkasta oo ka fekera waynida ilaahay subxaanuhuye uma sahlana inuu sameeyo ficil xun oo denbi ah.
2. Hadii aynu leenahay ilaahay waan jecelnahay, markaas waa in aynaan caasiyin kana hor imanin amaradiisa jacaylka aan u hayno awgiis. Qofkuna waa in uu daacad u ahaado cid kasta oo uu jecel yahay. Kuwa ka fogaada denbiyada iyo ficilada xun iyagoo ula jeeda jacaylka ilaahay subxaanuhuye dartiis, waxay agtiisa ka yihiin qaar leh darajada ugu saraysa sida ay ka yihiin kuwa caabuda sameeyana ficilo fiican iyagoo ula jeeda jacaylka ilaahay dartiis. Faraq wayn ayaana u dhaxeeya qofka ilaahay subxaanuhuye adeeca amaradiisa, kana fogaada denbiyada iyo ficilada xun jacayl uu ilaahay subxaanuhuye u qabo awgiis iyo qof adeecay amaradiisa kana fogaaday denbiyada iyo ficilada xun cabsi uu ka baqayo ciqaabtiisa.
3. Waa in aan ka fekeraa raali galinta iyo xushmaynta ilaahay subxaanuhuye sidii qof caqli leh oo daacad ahi aanu u samayn ficilo xadgudub ku ah cidii daryeeshay si naxariis leh, waxaana ku dhiiran kara oo kaliya dadka aan caqli gaabka ah naftoodana daacad u ahayn. Hadaba, hadii aynu maanka ku hayno raali galinta iyo xushmaynta ilaahay subxaanuhuye, waa in garawnaa in aynaan samaynin ficilo xun ama denbi ah kuwaas oo lidi ku ah ama ka hor imanaya amaradiisa.
4. Waa in aan maanka ku haynaa cadhada iyo ciqaabta ilaahay subxaanuhuye, sida uu uga cadhoodo qofka caadaysta xumaanta. Wax u dhigmaana ma jirto waxa ka dhalan kara cadhadiisa, ee waliba mida ugu yari tahay in aad tahay adoonkiisii oo tamar daran.

5. Waa in aan maanka ku haynaa waxa qofka dembaabay uu ku waayayo ficilkiisa xun aduunyada iyo aakhiro labadaba. Waxaana ku filan inuu ka fekeru inuu waayayo iimaankiisa oo ah wax qiime wayn leh, ugana qaalisan waxa aduunka dulyaal oo dhan. Hadaba waa maxay danta qofku ka leeyahay inuu lumiyo ama waayo iimaankiisa isaga oo ku badeshay waqti yar oo xiiso kaliya ah. nabigu N.N.K.A waxa uu xadiis ku yidhi, *Rumeeye ma aha saanigu ama dhilaygu marka uu sinaysanayo ama galmo xaaraan ah samaynayo*, isaga oo xadiiskan sharaxaya mid ka mid asxaabtii rasuulku waxa uu yidhi, qofka iimaankiisa ayaa laga saaraa ilaa uu tago madaxa dushiisa sida daruurta, hadii uu ka qoomamoodo ficilka uu sameeyay waxa loo soo celiyaa iimaankiisa.
6. Waa inaan danaynaa fekrada ah in shaydaanka laga adkaado, noqonana qaar ka guulaysta, sababtuna waxa weeye guusha aan ka guulaysano shaydaanka iyo hawada nafteena iyo doonisteeda ayaa ah wax la jeclaysto qiime waynina inoogu sugan yahay. Waana sida dawo loola jeedo in lagu soo celinayo caafimaad qab.
7. Waa inaan maanka ku haynaa abalgudka iyo yabooha ilaahay ugu balan qaaday kuwa naftooda ka xakameeya hawadeeda iyo doonisteeda kana celiya waxa ay farayso ee xumaanta ah.
8. Waa inaan ka fekeraa garabgalka iyo la jirka ilaahay, sida uu inoo sheegay “ Ilaahay waxa uu la jiraa kuwa sabra” (*Suurada Al Baqarah 2:153*) ; “ilaahay waxa uu la jiraa kuwa naftooda xakameeya iyo kuwa wanaaga sameeya” (*Suurada An Naxal 16:128*); “si dhab ah ilaahay waxa uu ula jiraa kuwa wax fiican sameeya” (*Suurad Al-cankabut 29:69*).
9. Waa inaan maanka iyo maskaxdaba ku haynaa in aan dhimanayno, taas oo waqti kasta inoogu iman karta si kedis ah ama digniin la,aan ah.
10. Waa inaan iska joojinaa ka fekerka iyo laab ku haynta dhalanteedka beenta ah iyo fekradaha xumaanta. Hadii ay fekrada xumaantu ay qalbigeena galaan, waa in aynaan ogolaan in ay degaan, hadii kale waxa ay noqon karaan rajadeena iyo jacaylkeena aan ku hawl galo, kaas oo dhib u gaysanaya nafteena iyo nafaha kale ee dariiqa ku soo jira.
11. Waa in aan si tartiib tartiib ah u xoojinaa aaminka diinteena inaga oo kula dagaalamayna hawada nafteena iyo doonisteeda. marka aynu dhadhamino wanaaga ka dhasha laciifinta hawada nafta iyo



doonisteeda xun, waxa kor u kaca oo xoogaysta go,aan qaadashadaada iyo awoodaada dhinaca kalsoonida iyo daacadnimada.

12. Waa in aan fekerkeena oo dhan ku jihatno ama u jeedino tixgalinta mucjisooyinka ilaahay subxaanuhuye inagu dhiiri galiyay in aan ka fekerro, ha ahaadeen kuwo quraanka la inoogu sheegay ama qaar aynu aduunyada dusheeda ku aragno. Hadii dareenkaasi si jooqta ah u raadeeyo qalbiga iyo maskaxdeena, taasi waxa ay inoo sahlaysaa in aan ka dheeraano faqa (xanshahaqa) shaydaanka. Cid ka khasaare wayni ma jirto qofkaas shaydaanka la faqa halkii uu fekerkiisa siin lahaa ilaahay, kutubtiisa, nabigiisa iyo asxaabta, si uu ugu fogaado shaydaanka iyo fekradiisa xun.
13. Waa inaan xusuus u leenahay sida ay aduunyadan joogisteedu u tahay mid waqti gaaban ah. Qofna ma doonayo waxa uu aduunyada dusheeda ku sameeyay in ay noqdaan kuwa ugu xun dhaxal ahaan, marka laga reebo qof aan rajo aakhiro naftiisa ku jirin kaas oo qalbigiisu dhintay wax dan ahna ka lahayn nolosha aduun iyo mid aakhiro. Qofka noocaas ahi waxa hubaal ah inuu ka qoommoon, kana murugoon doono ficiladiisa marka ay hor yimaadaan iyaga oo aanay wax faaiido ahi ugu sugnayn, waxaanay u hogaamiyaan ciqaab xanuun badan. Qofka wanaag badan sameeyay naf ahaantiisa ayaa dareema qoomamo maalintaas marka uu isku qanciyo inuu wax ka sii badan samayn karayay intii uu aduunyada joogay.
14. Waa in aan ogaano in ilaahay inoo abuuray nolol jiraysa waligeed oo aan dhamaad lahayn, nolol qiime leh oo turxaan la,aan ah, nolol nabaadiino oo cabsi lahayn, nolol hodantinimo oo faqri lahayn, nolol farxadeed oo xanuun lahayn, nolol sugan oo qalooc lahayn. Ilaahay wuu inagu intixamayaa aduunyadan nolosheedu ku danbaynayso geerida, aduunyadan qiimaheeda ay la socoto turxaanta iyo dhibku, aduunyadan ay cabsidu hafisay, iyadoo farxadeeda iyo furfuraanteeda lagu ladhay murugo iyo xanuun. Iyadoo sidaas ah, ayaa dadka qaar si qaldan ku raadinayaan helista nolol sahlan oo awood iyo farxad leh. Waxase hubaal ah in badankoodu aanay u maamulin si ay u gaadhaan, kuwa gaadhayna waqti yar ayuunbay farxad galisaa intaanay waayin horteed. Nabigu N.N.K.A waxa uu dadka ugu yaboohay nolol baaxad leh oo waligeed dhamaanayn, cid kasta oo aqbashay yaboohaasi waxa ay helayaan nolosha ugu fiican aduunyada, ka saraysa mida boqorada iyo

kuwa raacsan, taas oo ah in laga saahido aduunyadan ayaa ah hodantanimada iyo qiimaha ugu sareeya nolosha. Tanina waa waxuu shaydaanku si wayn uga xaasido dadka ilaahay rumeeyay.

Si sahlan markaan u rumaysano xaqiiqada ah in dariiqa kor la inoogu jeexay yahay midaan inagu filayn. Waa inaan la halgano nafteena sida ugu fiicana u hawl galo, si aan uga jibo keeno ujeedooyinkeena, si aan u gaadhno nolol sugan oo dhadhan leh. Sida ugu fiican ee taas lagu gaadhi karaa waa joojinta dabeecadaha nafteena hogaaminaya, maadaama kuwaasi yihiin kuwa inaga lumiya guusha. Waa in aan ka fogaano meelaha fidnada (fitnah) iyo macsida sida uu nabigu N.N.K.A inoo sheegay, *“qof kasta oo maqla dijaal waa in uu ka cararaa”* sida ugu fiican ee nafteena aan uga celin karo xumaanta, waa iyada oo laga fogaado waxkasta oo inagu hagaamin kara. Tabaha ama farsamooyinka la yaabka leh ee shaydaanku wax ku lu,gooyo dadka intiisa badan marka laga reebo kuwa waxgaradka ah iska garta waxa ka mida, isaga oo qofka wanaag ka dhex tusa wax xun, dabadeedna ku dhiiri galiya inuu gaadho wanaaga, markuu qofku ku dhowaadana, waxuu ku dhacaa dabinkii loo dhigay ee xumaanta.

## **TIRKA TODOBAAD**

### **Wax ma qaban karo inta sabirku maqan yahay**

Waqti kasta oo la siiyay, qofku waxa uu ku dhex jiraa xaalad, taas oo looga baahan yahay inuu adeeco amarada ilaahay, ama ka dheeraado wax kasta oo ilaahay inoo diiday, ama ay tahay inuu aqbalo xukunka ilaahay, ama ka mahad celiyaa (shukri-naq) nimcooyinka uu ilaahay ku galadaystay. Dhamaan xaaladahaasi waxa ay u baahan yihiin Sabir ama dulqaad, sidaas ayaanay isu daba socdaan ilaa maalinta dhimashada, qofna wax ma qaban karo dulqaad la,aan. Wax kasta oo inagu dhaca inta aynu noolahay aan jeclaano ama yaynaan jeclaanine dulqaadku waa wax loo baahan yahay.

Hadii qofku xiiseeyo caafimaad fiican, nabadgalyo, madaxtinimo, maal iyo helista doonistiisa qofeed ee quruxda jidh ahaan, yaanu u qaadan in marxaladaasi ladnaantu ay waligeed jirayso ama sidaas ahaanayso, yaanu nasiibkiisaa fiicani ka dhigin qof kibir badan oo ka madaxtaaga ama masuuliyaddaro muujiya aanu ilaahay jeclayn. Waa in aanu u qorshayn waqtigiisa oo dhan inuu ku isticmaalo lacag iyo tamar uu ku raadiyo raaxo iyo madadaalo. Waayo farxada iyo madadaalada badani waxa ay keentaa xanuun. Waa inuu tixgaliyaa bixinta waxii ilaahay ku waajibiyay ee dariiqa sakada iyo sadaqada, hadii kale ilaahay waxba kuma aha inuu kala noqdo nimcada uu ku galadaystay. Sidoo kale, waa inuu ka fogaado u isticmaalka maalkiisa wax aan wanaagsanayn ama xaaraan ah, waana inuu ka taxadiraa inuu ku isticmaalo qaab dhibsasho leh (makruuh). Waxaasi waxa ay lumiyaan sabirka ama dulqaadka oo ay qofka ka qaadaan, qofna ma tijaabin karo mana helo sabirka ama dulqaadka xilliga ladnaanta ama noloshu u wanaagsan tahay marka laga reebo dadka iimaanka xoogan leh.

### **Ma sabirka xilliga ay adag tahay ayaa ka fudud sabirka xilliga ay ladnaantu jirto?**

Mid ka mid ah dadkii hore ee wanaagsanaa ayaa yidhi, kuwa ilaahay rumeeyay iyo kuwa aan rumayn waxay labaduba u dhowdahay in ay sabir yeelan karaan xilliga ay adag tahay, laakiin dadka iimaanka xoogan leh oo kaliya ayaa sabir leh xilliga ay ladnaantu jirto. Sidaas darteed, ilaahay waxa uu ka digay fitnada xilliga ladnaanta, xaasaska iyo caruurta:

*Kuwa ilaahay rumeeyoow, yay idinka leexinin maalkiina iyo caruurtiinu xuska ilaahay, kuwa sidaas sameeyaana, waa kuwo khasaare u sugnaaday. (Suurada Al-Munaafiquun 63:9)*

*Kuwa ilaahay rumeeyoow, run ahaantii xaasaskiina iyo caruurtiina (Qaar ka mid ah) idinka ayay cadaw idiin yihiin ee ka digtoonaada. (Suurada Taqaabun 64:14)*

Dareenka digtoonaanta leh ee aayadahani xambaarsan yihiin ma,aha qaar ku soo degay sababta khilaaf dhacay ama cadaawad balse waxa weeye mid jecaylka iyo xiisaha aan u qabno caruurteenu inaga hor joogsan karo shaqada diinta looga baahan yahay sida Hijro, Jihaad, aqoon raadis, bixinta sadaqada IWM.

Al -Tarmadi ayaa waxa uu ka wariyay Ibn cabaas in nin uu waydiiyay Ibn cabaas aayada kor ku qoran ( Suurada Taqaabun 64:14). Ibn Cabaas ayaa u sheegay ninkii, in aayadani ku soo degtay rag reer makka ahaa oo islaam dhaba ahaa, balse markii hijradu timi ay noqotay in Makka laga tago oo Madina loo hijroodo, waxa ragaas dabar ku noqday xaasaskoodii iyo caruurtoodii oo u diiday in ay nebiga (SCW) u raacaan hijrada Madina. Markii danbe, ee ay nabiga (SCW) u yimaadeen ee ay arkeen in rag badani barteen aqoon balaadhan oo diinta islaamka ah, waxay dooneen in ay xaasaskooda iyo caruurtooda ciqaabaan. Markaas ayaa ilaahay aayadan soo dejiyay: *Kuwa ilaahay rumeeyoow, run ahaantii xaasaskiina iyo caruurtiina (Qaar ka mid ah) idinka ayay cadaw idiin yihiin ee ka digtoonaada.*(Suurat Taqaabun 64:14)

Tarmadi waxa uu yidhi xadiiskani waa xadiis xasan saxiix ah.

Xadiiskan oo ah in caruurta ay sabab u noqon karaan fulaynimada iyo guul darada, waxa uu ka turjumayaa sida raggu ay uga gaabin karaan daacaadka iyo u halganka jidka ilaahay, iyadoo ay sabab u tahay xaasaskooda iyo caruurtoodu. Mar uu nabigu khudbad akhriyay, waxuu arkay Xasan iyo Xuseen oo xagiisa ku soo socda, markaas ayuu khudbadii joojiyay una degay si uu u soo qaado. Markaas ayuu yidhi: Hubaashii, ilaahay run ayuu ku hadlay markuu lahaa, xaasaskiina iyo caruurtiina (qaar ka mid ahi) cadow ayay ku yihiin naftiina. Waxaan arkay labada wiil ee yaryar ee soo ordaya, markaas ayaan sabir ama adkaysi u waayay aan khudbadayda ku sii wado, sidaas ayaan ku joojiyay korna ugu qaaday (labada wiil). Nabiguna sidaas waxuu u yeelay jacaylka caruurta dartiis. Sidaas ayaanu tusaale fiican uga tegay umadiisa ah in ay naxariis iyo jacayl u muujiyaan caruurta.

Sababta ay u adag yahay sabirku xiliga ladnaanta waxa weeye inaga oo leh doorasho marka loo eego sida aynu u dhaqmayno. Qofka gaajaysani marka aanu cunto haysan ayuu sabir wanaagsan yahay ama adkaysan ogyahay, markase cuntada uu arko waxa

yaraada sabirkiisii. Waxa taas la mid ah, way fududahay in qof xakameeyo xiisihiisa galmada marka aanay gabadhi ama qof dumari u dhowayn.

### **Sabirka Cibaadada**

Hadii aan nahay Aadamaha, waxa aynu leenahay dhaqan dabiici ah oo ah in aynu sahashano cibaadada sida salaada, sababtuna waa nacasnimadeena aynu hidde u leenahay bini-aadam ahaan. Hadii nin yahay mid qalbi engegan oo galay danbiyo waawayn, isaga oo inta badana ka fekera raaxaysi iyo raali galinta nafta iyo inuu raaco dad badan oo kala duwan kuwaas oo marnaba xusuusan ilaahay, dabadeedna uu salaadiisii si dirqi ah ku tukado, hadii ay u suurto gashaba wuxuu ku tukadaa isaga oo maqane jooge ah ama aan maskaxdiisu joogin degdega ku jiro.

Talaabo kasta oo la qaado, qofna kama maarmo waanu u baahan yahay sabirka ama dulqaadashada si ay u fuliyaan amarada ilaahay (cibaadada). Intaanu bilaabin salaadana, waa inuu hubiyaa in uu si niyad ah u saxan yahay una joogo jidh iyo maskax. Waa inuu hubiyaa daacadnimadiisa isaga oo iska ilaalinaya is-tusnimada ama iska yeelyeelka ficilka kasta oo cibaado loola jeedo ilaahay dartiis. Waana inuu saxaa habkeeda isaga oo soo jeedinaya niyadiisa iyo jidhkiisaba kuna jihaynaya ujeedada ah in la fulinayo cibaado loola jeedo raali galinta ilaahay. Marka uu dhameeyo cibaadada, waa inuu ka fogaado waxkasta oo xumaynaya cibaadadiisa. Ilaahay ayaana inoo sheegay:

kuwa rumeeyay qaybka (Ilaahay), salaadana oogaya waxaanu ku arsaaqnay ee wanaagsana wax ka bixinaya (*suurada Al Baqra 2:264*)

Waa inuu ku sabraa cibaadada isaga oo iska ilaalinaya isla waynaan iyo hanwaynaan labadaba inta uu cibaadada ku jiro, maadaama ay tahay mid ah dhaawac badan in la galo denbi muuqda. Si lamid ah, waa inuu is dejiyaa isaga oo iska ilaalinaya inuu uga sheekeeyo dadka kale habka cibaadaysigiisa.

### **Sabirka in laga fogaado ficilada xun ama dembiga**

Sida ugu fiican ee qof looga caawiyo qof ficiladiisa xun waxa weeye, adiga oo naf ahaantaadu gooya caadooyinka xun iyo qof kasta oo dadka ku dhiiri galiya xumaanta. Caadooyinku waxa ay ku leeyihiin kaalin xoogan dabeecadaha qofka, hadii caadooyinkaas ay raacdo jacayl, waxa ay la mid tahay in laba shaydaan dagaal kula jiraan sababtii abuurta qofka ka danbaysay iyo diinta, markaasna ay adkaato in laga gudbo.

## **Ku sabirka ama u adkaysiga duruufo adag ama xaalad ka baxsan awooda maamul ee qofka**

Dhacdooyinka sida geerida qof aad jeceshahay, xanuun, luminta hanta ama dhaqaale ama qaniimad kale, IWM waxay u dhacaan laba nooc: duruufo ka baxsan awooda maamul ee qofka ama duruufo ay sababtay ficilo qof kale sameeyay sida fadeexadaynta, garaacista IWM.

Aqbalaada xaaladaha ka baxsan awooda maamul ee qofka, dadku waxay kaga jawaabaan ficil ahaan mid ka mid ah sidan hoos ku sheegan:

1. In ay dareemaan itaal daro, warwar, quus iyo cabasho
2. In ay ugu sabraan ilaahay dartiis ama calaamad ay tahay dhinaca bini-aadamnimada oo xoogan ama fiican
3. Aqbalaad ay tilmaan u tahay in la ahaado mid faraxsan taasi waa mid run ahaan ka saraysa sabirka ama dulqaadka
4. In la aqbalo xaalada adag iyadoo lagaga jawaabay mahadnaq iyo mahadcelin. Taasi waa mid iyaduna run ahaan ka saraysa aqbalaad waayo waxa ay la mid tahay in qofku xaalada qalafsan ee la soo deristay ula mid tahay badhaadhe iyo farxad ilaahay ugu badalay

Duruufaha adag ama dhibaatooyinka ku dhaca qof iyaga oo sabab u yahay qof kale waxa inta badan lagaga jawaabaa ficiladan:

1. Inuu doorto inuu iska cafiyo ama ilaabo
2. Inuu go,aansado inaanu ka aargoosan
3. Inuu aqbalo qadarka iyo qadaha ilaahay subxaanuhuye, isaga oo isku qanciyay inuu qofka dhibka u gaystay uu ahaa xumaan fale. Dhibka ay sababaan dadku iyaga oo u gaysanaya qof kale waxa ay ka dhigan tahay sida Kulayka iyo qabowgu isku yihiin: ma jirto dariiq ama sifo loo joojin karo markaa qofka ka cawda kulayka ama qabow dhacaya wuxuu isku sifeeyay qof aan caqli badan lahayn. Waxkasta oo dhacaa waxa ay ku dhacaan qadarka iyo qadaha ilaahay

subxaanuhuye, inkasta oo ay jirayaan qaabab iyo habab badan oo kala duwan oo ay wax u dhacaan.

4. Inuu wanaajiyo qofka xumaanta ama dhibka u gaystay. Dhaqanka noocaasi waxa uu leeyahay faaiidooyin iyo qiime wayn, kuwaas oo qofku aanu dareemin guud ahaan balse ilaahay og yahay.

### **Sabirka ama u adkaysiga xaalad ku timi doorasho balse natiijo xun oo wayn keentay**

Tusaale ahaan, jacaylka, bilowgiisa qofka ayaa doorta laakiin hadii uu fido waxa uu keeni karaa in taladu faraha ka baxdo oo qofku aanu is xakamayn Karin. Sidoo kale, qof waxa laga yaabaa in xanuun halis ah ay ku keento cabista sigaarka ama qaadashada maandooriye kale, balse ay ku adag tahay inuu joojiyo. Dadka waxa la gudboon in ay marka ugu horaysaba iska caabiyaan duruufahaasi inta aanay noqonin qaar awoodooda ama faraha ka baxay.

## TIIRKA SIDEEDAAD

### **Waa Sidee nooca sabir ee ugu adagi?**

Nooca sabirka ugu adag ee ah in la iska joojiyo dabeecado ama caadooyin, waxa ay ku xidhan tahay hadba halka uu qofku ka xoogan yahay marka loo eego doonista nafta iyo raacista hawadeeda iyo awooda qof ee uu ficil ku sameeyo oo su'aali ka taagan tahay.

Qofkasta oo aanay naftiisu doonayn in ay wax disho, xado ama cabto khamri iyo wax kale oo la mid ah oo aanu hore u samayn way u fududahay in uu sabir u helo uu kaga adkaado naftiisa in ay ka fogaato waxyaalahaas. Qofkasta oo hawada naftiisu ku xoog badan tahay samayntoodana una hiloobayso samayntooda iyadoo sabab u haysata way ku adag tahay inuu iska daayo caadooyinkaas. Sidaas darteed, aad ayay ugu adag tahay qof xaakim ahi inuu ka fogaado cadaalad daro iyo dulmi, waanay ku adag tahay nin dhalinyaro ahi inuu iska ilaaliyo xumaan sidaad si la mid way ku adag tahay ninka maal qabeenka ahi inuu ka fogaado doonista waxyaalaha quruxda badan iyo xiisaynta muuqaalada wanaagsan ee farxada leh.

Nabiga N.N.K.A waxa laga wariyay inuu yidhi, ilaahay ayaa xusa qof dhalinyaro ah oo aan waligii samayn xumaan *waxa wariyay Axmed*. Xadiis kale, waxa uu sheegayaa in qofkaasi ka mid yahay kuwa hadhsanaya hadhka ilaahay maalinta aan hadhkale jirin sababtuna waa sabirkooda fiican dartiis- sidaas ayaa sabirka ama dulqaadashadu u tahay cidhibta xukun ee xaalad kasta, iyada oon la raacayn qofna dareenkiisa tusaale ahaan; sabirka nin dhalinyaro ah oo ilaahay si wayn u caabuda una qaatay amaradiisa isaga oo ka sabray(ka tagay) xumaanta oo dhan ay farayso hawada naftiisu iyo doonsiteedu, sabirka nin qalbigiisa ku xidhay masaajidka oo inta badan u adkaystay joogista masaajidka waqti kasta, sabirka qofka sadaqada bixiya si qarsoon isaga oo ka sabray hawada naftiisa iyo doonisteeda ah inuu dadka tuso wax bixintiisa, iyo sabirka nin ka adkaystay u hilowga iyo is-laab raacinta gabadh aad u qurux badan oo qiime sarena leh, iyo sabirka laba qof oo u kulma ilaahay dartiis isuna jecel ilaahay dartiis iyagoo ku sabray u adkaysiga wanaajinta xidhiidhkooda ilaahay dartiis, iyo sabirka qof u ooyay cabsida ilaahay isaga oo ku sabray una adkaystay inuu qarsado oohintiisa isaga oo aan cid kale u sheegin. Dhamaan waxyaalahaas waxa ay ka mid yihiin noocyada ugu adage ee sabirka. Sidaas darteed, xukumida qof wayn oo qirtay inuu sinaystay, nin boqor ah oo beenaale ah iyo ruux faqiir ah oo aan aqoonsanayn kibir awgiis ayaa ah iyaguna dhinaca kale kuwa ugu xun, sababto oo ah iyaga way u



fududahay in ay iska daayaan xumaanta ay naftoodu galisay, iska dayntooduna ugama baahna sabir badan waayo waa dad waxa ku kalifi karaa ay yar tahay marka loo eego xaalada da'dooda iyo masuuliyadooda. Markaa waxa uu dhaqankoodu tilmaamayaa in ay yihiin in ay ka hor yimaadeen ilaahay iyo amarkiisa.

### **Sabirka in laga fogaado ku hadalka waxa xun iyo samaynta sinnada**

Sabirka noocyadiisa ugu adag waxa ka mid ah sabirka ah in laga fogeeyo nafta ama laga xakameeyo in ay samayso hadal danbiya ama xun iyo samaynta galmo xaaraan ah. hadalada danbiga ah waxa ka mid ah xanta, cayda, ceebaynta, been in la sheego iyada oo looga jeedo in laba qof dhibaato laga dhex abuurto ama la isku diro, in qof la amaano ama la wayneeyo si cad oo ka badbadin leh, iyo cayda qof aanad jeclayn adiga oo qof kalena waynaynaya- dhamaan waa wax lagu sheekaysto lana xiiseeyo ka hadalkeedu. Waanay u sahlan tahay qofka in carabkiisu ku kaco si fudud dhexgalka ama ka hadalka arimahaas, Sababtuna waa nafta oo u leh doonis dheeraad ah markaa sidaas ayay u adag tahay in nafta lagu laylyo ka sabirkooda oo ah in ay iska dayso kana fogaato.

Sidaas darteed, nabigu N.N.K.A waxa uu ku yidhi Mucaad bin jabal *“Carabkaaga xakamee ama ka adkow”* Mucaad ayaa Nabiga waydiiyay rasuulkii ilaahayow miyaa naloo qabanayaa waxa aanu ku hadlayno? Waxa uu ugu jawaabay; *ma wax kale ayaa jira oo aan ahayn carabka oo dadka sabab ugu noqda in lagu tuuro wajiyadooda naar!*

Marka ay qofka caado u noqoto hadal ama sheeko danbi ahi, dulqaadka qofku wuu yaraadaa waxaana ku adkaata inuu iska jaro hadalka noocaas ah, sidaas ayay u dhacdaa in la arko qof habeen oo dhan cibaado u taagan, maalin oo dhana sooman kana fogeeyay naftiisa in ay taabato barkimo xariir laga sameeyay iskaba dhaaf inuu ku seexdee balse isaga taag waayay xanta iyo ceebaynta dadka kale iyo isku dirkooda.

## TIRKA SAGAALAD

### Sabirka iyo sida Quraanku uga hadlay

Imaam Axmed waxa uu yidhi, Ilaahay Subxaanuhuye waxa uu kaga hadlay sibirka quraanka sagaashan (90) meelood ama sagaashan jeer;

#### 1. Tilmaan ayaa laga bixiyay in sabirku uu cadayn u yahay kuwa ilaahay aaminsan sida ku cad aayadahan:

*Sabir, mana aha sabirkaagu dar Eebe mooyee, hana ka murugoon, hana ka cidhiidhyamin waxay Dhagri. (An-Nahl 16:127)*

*Ku samir xukunka eebahaa (nabiyow) anagaa ku ilaalinaynee, kuna; tasbiixso oo ku mahadi eebahaa markaad kici. (Al-Duur 52:48)*

#### 2. In waxii sabirka ka horimanayaa aanay banaanayn sida ku cad ayaadahan:

*U sabir siday u samreen kuwii sugnaanta iyo niyada u saaxiibka ahaa ee rasuulada ahaa, hana ku degdegin in la cadibo, waxay lamid noqon markay arkaan waxa loogu goodiyay inaanay ku nagaanin Adduunka Saacad maalin ah waxaan ahayn, Quraankuna waa gaadhsiin, kuwa faasiqiinta ah ayaa la halaagaa. (Al-Axqaf 46:35)*

*Ha tabar yaraanina hana murugoonina idinkaa Sareyn haddaad Tihiiin mu'miniine. (Al-Imran 3:139)*

*Ku sabir Xukunka Eebe hana noqonin sidii saaxiibkii Xuudka (Nabi yoonis) markuu naadiyey Eebihis isaga oo walbahaarsan. (Al-Qalam 68:48)*

#### 3. Sabirku inuu yahay sees iyo aasaaska guusha iyo sumcada:

*Kuwa xaqa rumeeyayow Sabra oo sabir dhamays ah ku nagaada dhawrida (xudduuda islaaxa) kana dhawrsada Eebe waxaad mudantihiin inaad liibaantaan (Al-Imran 3:200)*

#### 4. Abaalka dadka sabirka leh waa mid labanlaaban:

*Kuwaas waxaa lasiiyey Ajrigooda labo mar Sabirkoodii Dartiis, waxayna raaciyaan Xumaaanta wanaag waxaan ku arzuqnayna waxbay ka bixiyaan. (Al-Qisas 28:54)*

*Waxaad tidhaa Nabiyow addoomadeyda xaqa rumeeyow ka dhawrsada Eebihiiin, ciddii wanaag u sugnaadey wanaag, dhulka Eebena loo oofiyaa (dhameyaa) kuwa sabra ajrigooda xisaab la'aan). (As-Sumar 39:10)*

Sulayman Ibn Qasim waxa uu yidhi; Abaalgudka waxkasta oo la qabto ama ficil kasta waa la yaqaan marka la reebo abaalgudka kuwa sabra ama sabirka leh oo noqon kara sida roob xoog wayn oo kale.

**5. Sabirka iyo Dulqaadku waa shuruudaha ugu horeeya ee looga baahan yahay hogaaminta iyo diinta:**

*Waxaan ka yeelnay qaar ka mid ah imaamyo ku hanuuniya amarkayaga markay sabreen, waxayna ahaayeen kuwo ayaadkayga rumeeya (As-sajdah 32:24)*

**6. Sabirku waa dariiqa lagu helo gargaarka ilaahay iyo Garabgalkiisa:**

*Adeecana Eebe iyo rasuulkiisa hana murmina ood Fashilantaan uu tagana Xoogiinnu, Sabra Eebe wuxuu la jiraa kuwa Samree adkaysta (Al-Anfaal 8:46)*

Cali al-Daqaq waxa uu yidhi; Dadka leh dulqaadku waa kuwa si run ah u guulaysta aduunyadan guudkeeda iyo aakhiraba, sababtuna waa iyaga oo la kulma ilaahay gargaarkiisa iyo garabgalkiisa

**7. Ilaahay waxa uu ku abaal mariyaa kuwa sabra ama dulqaadka badan abaalkooda oo saddex isugu jira naxariis, barako iyo gargaar:**

*Waxaan idinku imtixaamaynaa Wax cabsi ah iyo gaajo, iyo Nusqaamin xoolaha iyo nafta iyo midhaha, ee u Bishaaree kuwa Sabra (Al-Baqarah 2:155 -7)*

Marka asxaabtii iyo dadkii horee wanaagsanaa looga tacsiyadeeyo arin ku dhacday waxa ay odhan jireen; Maxaan sabir iyo adkaysi dulqaad u yeelan waayay, marka ilaahay subxaanuhuye ugu balanqaaday kuwa sabra inay leeyihiin saddex abaal, midkasta oo abaalgudkaa ka midina uu ka fiican yahay aduunyadan ama waxkasta oo dusheeda ah.

**8. Sabirka macne ahaan waxa weeye doonista ilaahay gargaarkiisa:**

*Kaalmaysta sabirka iyo salaadda wayna ku wayntahay salaaddu ama ku culustahay kuwa khushuuca mooyee (Al-Baqarah 2:45)*

Taas macnaheedu waxa weeye cid kasta oo aan dulqaad lahayn waxa ay la mid tahay sida qof taageero la,aan ah.

**9. Sabirka ama Dulqaadku wuxu shuruud u yahay helista taageerada iyo gargaarka ilaahay:**

*Haba joogtee, haddaad Sabirtaan ama adkaysataan ood dhawrsataan (waydinku filan tahay) waxayna idiinku imaan deg degooda, kaasna waa Xoojin Eebihiin shan kun oo malaa'ig ah oo calaamaysan (Al-Imran 3:125)*

**10. Sabirka iyo cabsida ilaahay waa gaashaanka ugu wayn ee lagaga adkaado xirfada cadow kasta:**

*Hadday idin taabato wanaag way ka xumadaan, hadday idinku dhacdo xumaana way ku farxaan, haddaad sabirtaan ood dhawrsataan waxba idinkama dhibayso Dhagartoodu, Eebana waxay camal fali wuu koobay (Al-Imran 3:120)*

**11. Malaa,iigta ayaa Jannada Gudaheeda ku salaanta dadka sabirka ama dusha u leh duruufaha iyo wax kasta:**

*Nabadgalyo korkiina ha ahaato sabirkiinna dartiis, waxaa wanaag badan cidhibta daarta janno (Al-Ra,ad 13:24)*

**12. Ilaahay Subxaanuhuye waxa uu inoo ogalaaday in aan cadowgeena ula dhaqano si aan ka duwanayn ama ka xumayn sida ay inoola dhaqmaan, balse waxuu cadeeyay in loo sabro ama dulqaadashadu tahay sida ugu fiican oo ah in loo adkaysto dhibka ay kuu gaysteen adiga oo aan jawaab ficil iyo hadal midna ka bixin:**

*Haddaad wax ciqaabaysaan u ciqaaba inta la idin ciqaabay, haddaad sabirtaan isagaa u khayr roon kuwa sabra (Al-Naxal 16:126)*

**13. Ilaahay Subxaanuhuye waxa uu ka yeelay sabirka iyo samaynta ficilada wanaagsan shuruud ay leedahay in qofku wax iska cafiyo iyo abaal marin wayn in ilaahay laga helo:**

*Kuwa sabra ee camal fiican fala mooyee, kuwaasna waxaa u sugnaaday danbi dhaaf iyo ajri wayn (Huud 11:11)*

**14. Ilaahay waxa uu ka yeelay Sabirka qiyaasta lagu garto dhiiranaanta iyo ka go,aan qaadashada xaalad:**

*Wuxuu ku yidhi Nabi Muuse Tuura waxaad tuuraysaan (Ash-shura 42:43)*

*Wiilkayoow oog salaadda, oo far wanaagga oo reeb wax la naco (Xumaanta) kuna sabir waxa ku gaadha, arrintaasu waxay ka mid tahay arimaha cidhibta leh (Luqmaan 31:17)*

**15. Ilaahay waxa uu ugu balanqaaday kuwa aamina ee rumaysan in ay helayaan guushiisa iyo taageeradiisa taasna loo yeelay iyaga oo muujiyay sabir iyo adkaysi u dulqaadasho:**

*Waxaan dhaxalsiinnay Qoomkii ahaa kuwa lagu Dullaysto Bariga Dhulka iyo Galbeedkiisa (Masar iyo Shaam) een barakaynay Dhexdiisa, wayna u Dhamaatay kalimada ama yaboohii Eebahaa ee wanaagsanaa Binu Israa'iil sabirkoodii Dartiis, waxaana Baabi'inay wuxuu samaynayay Fircoon iyo Qoomkiisii iyo waxay dhiseen (Al-Acraaf 7:137)*

**16. Ilaahay waxuu shuruud uga dhigay sabirka in la helo jacaylkiisa:**

*Imisaa Nabi la Dilay oo ay la jireen culimo Dagaalami oo Badan, ayna ka cabsanin wax ku Dhacay jidka Eebe Dartiis, tabarna yaraynin, Dulloobina Eebena waa jecelyahay kuwa sabra (Al-Imran 3:146)*

**17. Ilaahay waxuu ka yeelay Sabirka shuruud ku xidhan helista barakooyin iyo deeqo badan:**

*Waxayna dheheen kuwii la siiyey Cilmiga Magaciinba'ee Abaal marinta Eebaa u khayr roon Ciddii Rumaysa oo fasha Camal fiican lamana Waafajiyo hadalkaas kuwa sabra Mooyee (Al-Qassas 28:80)*

*Lamana kulmiyo arrintaas kuwii samray mooyee, la lamana kulmiyo mid nasiib weyn leh mooyee (Fussilat 41:35)*

**18. Ilaahay waxuu tilmaamay in kaliya kuwa sabirka laasima ama caadaysta iyo mahadnaqa ay ku liibanayaan mucjisooyinka iyo awoodahiisa:**

*Miyaydaan ogayn in Doontu dhex socoto Badda Nicmada Eebe Darteed si uu idiin tusiyo aayaadkiisa, arrintaasna aayaadbaa ugu sugan sabirbadane shugri badan oo dhan (Luqmaan 31:31)*

*Hadii uu doono (Allaah) wuxuu xasiliyaa (joojiyaa) Dabaysha markaasay fadhiistaan Biyaha korkooda, taasina waxa ugu sugan calaamo ruux kasta oo sabir iyo mahad badan (Al-Shuura 42:32:33)*

**19. Ilaahay waxa uu si wayn oo xikmadi ku jirto ugu sharfay Nabi ayuub C.S sabirkiisa awgiis:**

*kuna qabo gacantaada xidhmo laamo ah, kuna garaac hana jabinin dhaarta waxaana ku ognahay inuu yahay sabre addoon fiican ah toobadkeenna badan (Zaad 23:44)*

Ilaahay waxa uu ku majiirtay ama ku sifeeyay Ayyub wanaag iyo sharaf badan sababtuna waa sabirkiisa dartiis. Sidaas awgeed, qofkasta oo ka taga sabirka ama dulqaadka marka duruufi la soo daristo ee ay lagama maarmaanka tahay waxa uu ka dhigan yahay qof guul daraystay ama denbiile oo kale ah.

**20. Ilaahay waa xukmay si guud ah in qofkasta oo aan diin lahayn kana mid ahayn kuwa runta sheega ama sabra uu yahay mid ku jira baadi oo lunsan. Taas oo noqonaysa ama la micno ah in kuwa run ahaan u guulaystaa kaliya ay yihiin kuwa dulqaadka leh:**

*Faricii kuwaan la xambaarnay Nabi Nuux, wuxuuna ahaa Addoon (Eebe) ee Shugri badan (Al-Israa 103:1-3)*

Isaga oo sharaxaya suradan sare waxa uu yidhi Imaamu Shaafici; Haddii dadku si qota-dheer uga fekeraan Suuradan, waxa ay siinaysaa damaanad buuxda, iyo in aan dadku gaadhin toosnaan iyo dhowrsoonaan ilaa ay saxaan ama hagaajiyaan laba arin. Aqoontiisa iyo ficiladiisa tusaale ahaan; diintiisa iyo samaynta ficilo wanaagsan. Sida looga baahan yahay wanaajinta naftiisa ayaa looga baahan yahay wanaajinta nafaha kale ama dadka kale. Taasoo isugu xidhan barashada runta. Seeska waxaas oo dhamina waa sabirka ama dulqaadka

**21. Ilaahay waxa uu sheegay in sumada kaliya ee lagu garto kuwa gaadhay badhaadhaha aduunyo iyo aakhiraba ay tahay sabirka iyo naxariista:**

*Markaa la noqdo kuwa Rumeeyay xaqa, isuna dardaarma Sabirka, isuna dardaarma naxariista (Al-Balad 30:17-18)*

**22. Ilaahay sabirka waxa kale oo quraanka dhexdiisa kaga hadlay.....**

a) Sida uu u barbardhigay tiirarka iimaanka iyo islaamka oo kale ayuu ugu lamaaneeyay salaada

*Kaalmaysta sabirka iyo salaadda wayna ku wayntahay salaaddu ama ku culustahay kuwa khushuuca mooyee (Al-Baqarah 2:45)*

b) Sida uu u barbardhigay ama ugu lamaaneeyay ficilada Fiican

*Kuwa sabra ee camal fiican fala mooyee, kuwaasna waxaa u sugnaaday danbi dhaaf iyo ajri wayn (Huur 11)*

c) Siduu u barbardhigay ama ugu lamaaneeyay mahadnaqa (Shukr)

*Haduu doono Eebe wuxuu xasiliyaa dabaysha markaasay fadhiisataa biyaha korkooda taasina waxay calaamo u tahay ruuxkasta oo samir iyo mahad badan (Ashuura 11)*

d) Siduu ugu lamaaneeyay Runta

*Faricii kuwaan la xambaarnay Nabi Nuux, wuxuuna ahaa Addoon (Eebe) ee Shugri badan (Al-Israa 103:1-3)*

*Raga muslimiinta ah iyo Dumarka muslimiinta, Raga muuminiinta ah iyo Haweenka Muumindka ah, Raga Eebe adeeca iyo Haweenka Eebe Adeeca, Raga Runlawga ah iyo Haweenka Runlawga ah, Raga sabra iyo Haweenka sabra, Raga u qushuuca Eebe iyo Haweenka u qushuuca Eebe, Raga sadaqaysta iyo Haweenka sadaqaysta, Rag sooma iyo Dumarka sooma, Raga is dhawra iyo Haweenka is dhawra, Raga in badan Eebe xusa iyo Haweenka in badan Eebe xusa waxa eebe u doonay danbi dhaaf iyo ajri wayn (Al-axsaab 35)*

e) Siduu ugu lamaaneeyay naxariista

*Samirka, isuna dardaarma naxariista (Balad 17)*

f) Sida uu ugu lifaaqay ama ugu ladhay diinta iyo iimaanka

*Waxaan ka yeelnay qaar ka mid ah imaamyo ku hanuuniya amarkayaga markay sabreen, waxayna ahaayeen kuwo ayaadkayga rumeeya (Zajda 24)*

Ilaahay waxa uu ka dhigay Sabirka mid lagu helo jacaylkiisa, gargaarkiisa, garabgalkiisa, taageeradiisa iyo abaalmarintiisa fiican. Tanina waa mid inoogu filan sharaf iyo abaamarinba.

## **TIIIRKA TOBNAAD**

### **Xadiisyo ku Saabsan Sabirka**

Umu Salama (A.K.R.): waxa ay maqashay Nabiga N.N.K.A isaga oo leh, ma jiro qof muslim ah oo dhib wayni soo gaadhay isaga leh, ' ilaahay ayaa na leh na abuuray isaga ayaana loo noqonayaa; Alahayoow igu abaal mari sababta dhibaatan adiga oo ii dooraya mida ii fiican, Ilaahayna waxa uu ku abaal mariyaa waxa u fiican. Waxa ay tidhi Umu Salama, markii Abu-Salama uu dhintay, waxaan idhi, kumaa ama ayo kale ayaa ka fiicnaa Abu-Salama muslimiinta dhexdooda? Gurigiisu waxuu ahaa kii ugu horeeyay ee nabiga soo dhoweeya hijrada! Si kasta ha ahaatee, waxaan idhi tallow muxuu na odhanayaa nabigii ilaahay, ilaahayna waxuu igu abaal mariyay nabiga ilaahay. Nabigu wuxuu ii soo diray Xaatib Ibn Balta'ah si uu ii waydiiyo gacantayda dhinaca meherka guurka (aniga iyo nabiga) isaga oo ka wakiil ah nabiga N.N.K.A, waxaanse u sheegay in aan gabadh (gashaanti) leeyahay iyo in aan ahay gabadh masayr badan. Nabigu N.N.K.A waxuu ku jawaabay, maadaama ay ka fekerayso ama danaynayso gabadheeda, waxaan ilaahay u waydiinayaa inuu ka yeelo inanta mid madax banaan ( oo qaadata xoriyadeeda dhinaca guurka) sidoo kalena waxaan ilaahay uga baryayaa inuu dul ka qaado masayrka. Sidaas ayaan ku guursaday nabiga N.N.K.A (Muslim)

Abu Musa Al-Ashcari (A.K.R.) waxuu yidhi: nabiga N.N.K.A ayaa yidhi, marka wiil nin uu dhalay dhinto, ilaahay wuxuu waydiiyaa malaa,iigta, miyaad ka qaadeen naftii adoonkayga wiilkiisii? Waxa ay ku jawaabaan, haa wuxuu ilaahay waydiiyaa, Miyaad ka qaadeen midkay ishiisu ku doogsanaysay? Waxay malaa,iigtu ku jawaabtaa, Haa. Dabadeed waxa uu ilaahay subxaanuhuye waydiiyaa, maxuu adoonkaygii kaga jawaabay? Waxay u sheegaan adiga ayuu ku talo saartay waxaanu yidhi; ilaahay ayaa na leh na abuuray isaga ayaana loo noqonayaa. Ilaahay waxuu yidhaa, guri uga dhisa janada adoonkayga uguna yeedha guriga mahadnaqa (waxa weriyay Tarmadi, Imam Axmed iyo Ibnu Xiban)

Anis binu Maalik wuxuu ka wariyay nabiga N.N.K.A inuu yidhi, ilaahay ayaa yidhi, hadii aan imtixaamo adoonkayga aniga oo ka qaada mid ka mid ah labadiisa ugu qaalisan oo indhihiisa iyo aragtida isha, dabadeedna uu u dulqaato iyo una adkaysto. Waxaan ku abaal mariyaa janadayda (Bukhaari).

Waxa laga wariyay Caasha oo ay ka wariyeen Curwah iyo Suhri, in nabiga N.N.K.A uu yidhi, dhibaato kuma dhacdo qofka muslimka hadiise ay ku dhacdo ilaahay ayaa kaga



dhaafa dambiyadiisa uu galay sababta oo ah dhibka soo gaadhay xataa hadii aanay ka badnayn irbad caaradeed (Bukhaari iyo Muslim).

Sacad Binu Abi Waqas (A.K.R.) waxuu yidhi, waxaan waydiiyay nabiga N.N.K.A yaa dadka ka mid ah oo sida ugu xun loo imtixaamaa? Waxa uu nabigu N.N.K.A yidhi, nabiyada, dabadeedna dadka ugu soo dhow, sidaas ayaanay isugu xigxigaan marka loo eego iimaankooda. Dadka waxa lagu imtixaamaa hadba sida uu yahay tayada iimaankiisu. Marka ay xoogan yahay iimaankiisu waa qofka ugu imtixaan badan, marka iimaankiisu daciif yahayna waa ka ugu imtixaan yar. Dadka ilaahay rumaysan si joogta ah ayaa loo imtixaamaa ilaa uu dhulka ka tago oo uu dhinto iyada oo danbigiisa oo dhan la dhaafay (Bukhaari).

Anas ibn Maalik (A.K.R.) wuxuu yiri: Abuu Dalxa wuxuu lahaa wiil xanuunsan. Abuu Dalxa ayaa dan ka yeeshay debedda oo safray wiilkiina wuxuu dhintay intuu maqnaa. Markuu soo noqday Abuu Dalxa ayuu xaaskiisii weydiiyey: Ka warran wiilkii? Um Sulaym, xaaskiisii, oo wiilkana hooyadiis aheyd, waxay ku jawaabtay: 'Ka xasilloon sidii hore.' Dabadeed waxay u keentay cashadii oo hor dhigtay. Markii uu casheeyey buu la seexday oo u tagay. Markii waagii dilaacay ee uu maydhay isuna diyaariyay inuu debeda u baxo ayay geerida wiilka shaaca uga qaadday oo ku tiri: U hawl gal aasida wiilkaagii. Abu Dalxa wuu ka cadhooday, wuxuuna u tagay oo la tukaday Nebigii (S.C.W.) una sheegay xaalkii. Wuxuu weydiiyey nabigu N.N.K.A: Xalay ma isu tagteen? Abuu Dalxa wuxuu yiri: Haa, markaasuu nabigu N.N.K.A yiri: 'Allahayow labadaba barakee ka dib waxay dhashey wiil. Abuu dalxaa wuxuu ka codsadey Anas Binu Maalik inuu u qaado wiilkaa dhashay Nebiga N.N.K.A wuxuuna sidoo kale horay u sii qaatay dhowr xabo oo timir ah. Nabigii buu u geeyey oo weydiiyey: 'Ma wax baa weheliya? Wuxuu yiri: Haah, xabbado timir ah. Nebigu N.N.K.A inta xabad timir ah qaatay oo calaaliyey ayuu wiilkii afka u geliyey inta uu barakeyneyeyna wuxuu u bixiyey Cabdullaah. (Bukhaari iyo Muslim)

Abu Said al-Khudri Ilaahay raali ha ka noqdee ayaa wariyay in nabigu (S.C.W) yidhi: "qofkiina lama siin hadyad ka fiican ama hadyad ka qiime badan Sabirka" ( al-Bukhaari iyo Muslim)

### **Sabirka Xilliga Xanuunka**

Abu Sa'id al-Khudri Ilaahay raali ha ka ahaadee waxuu yidhi: Waxaan u soo galay rasuulka N.N.K.A isaga oo xanuunsanaya oo xiligaas ay hayso qandho xoog badan. Waxaan gacanta saaray maradii ku dadnayd/saarayd waxaanan dareemay kulaylka xumadii haysay. Waxaan ku idhi siday xumadaadu tahay, nabigii ilaahayow? Waxuu yidhi, hadaanu nabiyada nahay sidaas oo kale ayaanu nahay: xanuunkayaga waa la laban laabaa sidoo kale abaal marintayada ayaa labanlaaban.

Jabir ibn Abdullah ilaahay raali ha ka noqdee ayaa sheegay in nabiga ilaahay (S.C.W) u soo galay gabadh kuna yidhi; Maxaad sidaas ula tiiraanyaysan tahay? Waxay tidhi, waxa I haysa qandho ama xumad oo I dhibtay. Nabigu wuxuu ku yidhi, ha dhibsanin xumada, sababtoo ah waxay kaa kaxaysaa danbiga sida ninka dahabka shiilaa u dhalaaliyo si uu uga sifeeyo khashinka una soo baxo dahab.

Siyad ibnu Saayid, adoonkii uu xoreeyay Ibn Cabaas ilaahay raali ha ka noqdee, waxuu ka wariyay mid ka mid ah saxaabadii oo yidhi, waxaan u soo galay nabiga (N.N.K.A) markuu bukay. Waxaanu tusnay dareenkayaga sidaanu uga xunahay xunuunkiisa waxaanu nidhi hooyooyinkayo iyo aabayaashayo ha lagugu furtee nabigii ilaahayow siday u daran yahay xanuunka ku hayaa. Waxuu ku jawaabay N.N.K.A nabiyada waa la dhibaa waqtiyo badan si xoogan. Waxaanu nidhi subxaan alaaah, waxuu na waydiiyay miyaa la yaabteen taas? Waxa jiray nabiyu u dhintay gooryaan wareegsan. Waxaanu nidhi subxaan alaaah waxuu yidhi miyaad la yaabteen? Kuwa loogu imtixaan badan yahay dadka waa nabiyada, dabadeedna dadka wanaaga badan sameeya, dabadeedna kuwa wanaaga yar sameeya. Waxaanu nidhi subxaan alaaah waxuu yidhi, miyaad la yaabteen waxay ahaayeen qaar ku farxa waqtiyada imtixaanka iyo dhibka sidaad ugu faraxdaan waqtiga fudaydka.

Masruq ayaa ka wariyay Caasha ilaahay raali ha ka noqdee inay tidhi maan arag cid ka xumad badnayd nabiga (N.N.K.A) markuu xanuunsaday taas oo ka kaxaysay hurdadii 19 habeen.

Caasha Ilaahay raali ha ka noqdee waxay tidhi, xumada runta ahi waxay kaxaysaa ama tirtaa danbiga qof galay sida dhirtaba caleentu uga daadato. Waxa warin kale ay leedahay in nabigu (N.N.K.A) yidhi waxa lagu gartaa muuminka marka uu ku dhibtoodo xanuun waxay ka dhigan tahay sida xadiid la galiyay dab; khashinka ayaa ka dhaca waxaana soo baxa intiisa birta ah oo nadiif ah.

Waxa laga wariyay inuu Abu Ayuub al-ansaari yidhi, nabiga (S.C.W) ayaa booqday nin xanuunsanaya oo ka mid ah Ansaar, markii uu nabigu waydiiyay siduu yahay waxuu ugu jawaabay nabigii ilaahayow indhahayga maan xidhin todoba cisho. Nabiga (N.N.K.A) ayaa u sheegay “ Sabir yeelo” walaalkayow hadaad ku sabirto waxa lagaa maydhayaa danbigaaga sida ugu fudud.

Sidoo kale waxa nabigu (N.N.K.A) yidhi xilliga xanuunku waxa uu tirtiraa xiligii ficilada xun/denbiga.

Anis ilaahay raali ha ka noqdee waxuu sheegay in nabigy (N.N.K.A) yidhi: marka adoon ilaahay uu xanuunsado sadex cisho, waxa lagaga masaxaa danbiyadiisii

waxaanu noqdaa sidii maalintii hooyadii dhashay oo kale. Waxa kale oo nabigu (N.N.K.A) yidhi, salaada qofka xanuunsanaya lama soo celiyo, ilaa uu ka caafimaado.

Waxa kale oo laga wariyay nabiga (N.N.K.A) inuu yidhi, ilaaha naftaydu gacantiisa ku jirto ayaan ku dhaartee ma jiro qadar ama “Qada” uu ilaahay ku xukumo adoon rumeeyay balse waxa ku jirta dantiisa ama way u wanaagsan tahay. Hadii ilaahay ku xukumi lahaa inuu waqtiyo fiican jiro adoonkiisu wuu farxi lahaa waanay u fiicantay, hadii ilaahay subxaanuhuye ku xukumo inuu la kulmayo waqtiyo dhibaato, wuu dulqaadan lahaa, taasina way u fiican tahay. Tanina kaliya waxa leh dadka ilaahay rumeeyay si saxa. ‘Waxa wariyay Axmed’

## **TIIIRKA Kow iyo TOBNAAD**

### **Saxaabadii Nabiga iyo Sabirkoodii**

As-Safar ayaa yidhi: Abu-Bakar ayaa ilaahay raali ha ka noqdee xanuunsaday, markaas ayay dad soo booqdeen, waxaanay waydiiyeen si ay dhakhtar ugu yeedhaan. Wuxu ugu jawaabay, “dhakhtarkii wuu i soo booqday” waxay waydiiyeen, maxuu ku yidhi? Abu-bakar ayaa yidhi, wuxuu dhakhtarku i yidhi waxaan doono ayaan karaa (oo la macno ah in ilaahay suxaanuhuye dhakhtarkiisa yahay awoodana inuu caafimaadiyo iyo inuu xanuunka u daayo sida uu isagu doono) waxa wariyay Axmed.

Cumar Binu Khadaab ilaahay raali ha ka noqdee waxa uu yidhi; maalmaha ugu fiicnaa intii aan noloshayda jiray waxay ahaayeen qaar tayada sabirkayagu saraysay, hadii sabirka laga soo qaado inuu yahay qaabka qof oo kale , waxuu noqon lahaa qof qiime wayn oo deeqsi gacan furan ah.

Cali Binu Abu-Daalib ayaa yidhi, xidhiidhka ka dhaxeeya sabirka iyo iimaanku waa sida jidhka iyo madaxa oo kale. Hadii madax laga jaro jidhku malaha faa,iido. Dabadeed ayuu codka kor u qaaday isaga oo leh, Hubaashii qofka aan sabir lahayni ma laha iimaan, sabirkuna waa sida rakuubka la fuulo oo aan daalin.

Cumar Binu Cabdi casiis ilaahay raali ha ka noqdee waxuu yidhi, ilaahay Subxaanuhuye adoonkiisa haduu siiyo wanaag kama qaado haduu ka qaadana waxuu ugu badalaa sabir, waxuu ugu badalay ayaana ka fiican waxa uu kala noqday ama ka qaaday.

### **Sheeko ka hadlaysa Curwa Binu-Subayr**

Curwa Binu-Subayr ayaa u yimi si uu u soo booqdo amiirkii Waalid Binu-CabdiMaalik, waxaana la socday inankiisii Maxamed oo ahaa mid ilaahay qurux siiyay. Curwa waxuu xidhnaa xiligaas dhar aad u qurux badan isagoo timihiisana laba u kala jeexay. Markuu xaakimkii arkay Curwa ayuu yidhi; sidani waa habka ay dhalinyarada qurayshi u eegtay, isagoo sidaas leh ayaa shaydaan il shar u raaciyay wiilkii. Intaanay kaba tagin balse safar u diyaar ah ayuu Curwa dhacay, ka dibna fardihii ay wateen ayaa ku tuntay markaas ayaa Curwa lugtu naafowday, dhakhtarkii loo keenayna waxuu soo jeediyay in lugta laga jaro hadii kale xanuunka lugta ayaa ku fidaya jidhka oo sababi kara geeri. Curwa wuu aqbalay, dhakhtaradiina sidaas ayay kaga jareen lugtii iyagoo isticmaalaya miishaar. Markii miishaartii gaadhay lafta, Curwa ayaa miyir doorsoomey. Miyirkiisii markuu soo noqday, ayuu arkay dhidid dhamaan wajigiisa qooyay waxuu

markaa ku celcelinayay Laa ilaaha Ilalaahu Ilaahu Akbar. Markuu qaliinkii dhamaaday lugtii laga jaray ayuu kor u qaaday waanu dhunkaday waxaanu yidhi, waxaan ku dhaaranayaa ilaahay igu kaa rakibaye, kugumaan tagin meel aan danbi ka soo samaynayo ama meel aanu ilaahay subxaanuhuye raali ka ahayn inaan tago, dabadeedna waxuu bixiyay tilmaan ah in lugta la maydho, la cadriyo, marana lagu daboolo dabadeedna lagu aaso xabaalaha muslimiinta.

Markii Curwa ka tagay Waliid ee uu tagay Madiina, ehelkiisii iyo saaxiibadii ayaa ugu tagay duleedka magaalada si ay u soo dhoweeyaan ugana tacsiiyeeyaan waxa ku dhacay. Jawaabta kaliya ee uu siiyay waxay ahayd suurad uu quraanka ka soo qaatay “Xaqiiqadii waxaanu safarkayagii kala kulanay daal” (Kahf 18:62) wax kalena kuma darin. Dabadeedna waxuu yidhi, ma galayo Madiina ilaa dadku niyad fiican ku badalaan xumaanta ay isu hayaan. Dabadeed waxuu iska joogay guri ku yaala Al-Aqiiq. Ciise ibnu tahlal ayaa ku soo booqday meeshaas kuna yidhi cadowgaa ka jabo waydiiyayna, I tus cabashadaada oo ah mida aan ugu imi si aan wax uga qabto. Curwa waxuu daboolka ka qaaday nabarkii ku dhacay. Markaas ayuu Ciise yidhi, kuumaanaan diyaarin si aad u dagaalanto! Ilaahay ayaana kuu badbaadiyay inta badan ee jidhkaaga: Carabkaaga, Aragtida ishaada, Labadaada gacmood iyo mid ka mid ah labadaada lugood. Curwa ayaa u sheegay, qofnaba iiguma caqli celin sidaas adigu wax uga qabatay arinkayga oo kale.

Markii ay dhakhtaradii u yimaadeen si ay lugta uga gooyaan Curwa, waxay waydiiyeen hadii uu rabo inuu cabo khamri iyo dawooyin suuxiya si uu dareenka xanuunka u fududeeyo. Waxuu yidhi, Ilaahay ayaa imtixaamaya naftayda si uu u eego dulqaadkayga. Sidee ayaan uga hor imanayaa amaradiisa.

### **Sabirka Fiican (Sabir-Jamiil –Suratul Yuusuf 12:83) iyo Cabsida**

Mujaaahid ayaa yidhi, Sabirka fiicani waa midka aanay wax cabsi ama murugo ahi la socon. Camir Binu Qays ayaa isna yidhi, Sabirka fiicani waxuu la mid yahay in marka ay duruufo adagi ku asiibaan la kaalmaysto ama la isu dhiibo doonista ilaahay.

Yoonis Ibnu Yasiid waxa uu yidhi; Waxaan waydiiyay Rabiica Ibnu Cabdiraxmaan waxa uu yahay sabirka ugu tayada sareeya ee qof sabro. Rabiica waxuu yidhi waa in qofku xilliga dhibta iyo murugada ahaado ama la mid yahay sidii uu ahaa intaan dhibku gaadhin ( tani ma,aha loogamana jeedo in aanu qofku dareemin xanuun ama damqanin dhibaataada awgeed; Sabirka xaaladani waxuu la macno yahay in qofku iska ilaaliyo kana celiyo naftiisa cabashada iyo qalbi jabka.

## **TIIIRKA Laba iyo TOBNAAD**

### **Sabirka xilliga murugada**

Marka geeri ku timaado ama dhinto qof la jecel yahay, waa marka qofku uu ku hafto tiiraanyada iyo murugada. Dabeecado badan ayaana ku xeeran xilliga murugada ay saababto geeridu. Baroorta, dhul isla dhaca iyo jeexjeexista maryaha ayaa ka mid ahaa caadooyinka lagu yaqaanay waqtigii jaahiliyada ilaa imikana waa u dhaqan muslimiinta qaar ka mid ah. dhaqanka noocaas ah lagama ogola islaamka dhexdiisa maadaama aan qofka ilaahay rumeeyay looga baahan yahay inuu aqbalo marxalada murugada iyo tiiraanyada sida imtixaanaadka kale ee nolosha isaga oo kaga gudbaya kana dhiganaya sabirka gaashaan.

Waa la ogol yahay ama waxba kuma jabna inuu qofku u ilmeeyo si debecsan geerida horteed, xilliga geeri jirto ama waqti ka danbeeya. Sida Shaafici qabo, waa wax la dhibsado(Makruuh) in la ooyo marka qofka naftu ka baxdo balse waa la ogol yahay intaanay naftu ka bixin.

Aragtida sax ahi waxay tahay in la ogol yahay oohinta ka hor iyo ka dib geerida. Waxaana marag u ah xadiiska uu wariyay Jabir Ibnu Cabdulaahi Ilaahay raali ha ka noqdee uu yidhi; Aabahay ayaa ku dhintay dagaalkii Uxud markaas ayaan bilaabay oohin, dadkii ayaa sheegay inaan iska aamuso laakiin nabigii ilaahay N.N.K.A ima waydiisan in aan oohinta joojiyo. Sidoo kale waxa iyaduna oohin bilowday edaday Faadumo, markaas ayaa nabigu N.N.K.A yidhi; waa isku mid hadii la ooyo iyo hadii kale, malaa,iig ayaa hadhaysay isaga ( qofka dhimanaya) ilaa ay ka qaadaan nafta. Waa la isku raacsan yahay xadiiskan.

Ibnu Cabaas ilaahay raali ha ka noqdee, waxuu ka wariyay markii Ruqiya ilaahay raali ha ka noqdee oo ahayd Nabiga N.N.K.A inantiisii ay naftu ka baxday ayay dumarkii oohin bilaabeen, markaas ayaa Cumar Binu Khadaab isku dayay inuu aamusiiyo. Nabiga N.N.K.A ayaa yidhi, Cumarow iska dhaaf ha ooyaane. Dumarkiina waxuu ku yidhi iska ooya balse ka fogaada baroorta shaydaanka, waxkasta oo ka yimaada ishaada iyo qalbigaagu ilaahay Subxaanuhuye ayay ka yimaadeen waxaanay tilmaam u yihiin naxariis, waxkasta oo ka yimaada gacantaada iyo carabkaaguna waxay ka yimaadeen shaydaan.waxa weriyay Axmed.

Axaadiis badan ayaa ku soo aroortay Nabiga N.N.K.A oo ilmaynaya marxalado kala duwan marka qof uu jeclaa dhintay. Nabigu N.N.K.A mar uu booqday qabrigii hooyadii wuu ilmeeyay taas oo asxaabtii la socotayna ku dareen ilmada. Markuu aasayay Cusmaan Ibu Maduun ilaahay raali ha ka noqdee dagaalkii Uxud ka dib, wuu

dhunkaday markaas ayuu ooyay ilmadiisiina waxay ku dhacday wajigii Cusmaan. Markii Nabiga N.N.K.A loo soo sheegay geeridii Jacfar Ilaahay raali ha ka noqdee iyo asxaabtii kale ee ku geeriyootay dagaalkii Roomaanka ee Mu,atax, Nabigu N.N.K.A waxuu hadlayay isaga oo ilmaynaya. Warin kale ayaa sugaysa sida Abu-bakar Ilaahay raali ha ka noqdee uu isaga masaxayay ilmada markuu dhunkaday maydkii Nabiga N.N.K.A markuu geeriyooday. Xadiiska reebaya oohinta waxaynu u qaadanaynaa macno ahaan in ay reeban yahay Baroorta ay la socoto qayladu.

### **Baroorta iyo Qaylada**

In maydka laga dul qayliyo iyo baroorta xabaasha dusheeda labadaba lama ogola (Xaraam) sida Axmed, Shaafici iyo qaar kale qabaan. Xadiis uu wariyay Cabdulaahi Ibnu Mascuud ilaahay raali ha ka noqdee waxuu sheegay in nabigu N.N.K.A yidhi, inaga mid maaha qofka wajigiisa la dhaca gacmihiisa, jeexjeexa maryihiisa una dhaqma sida dadkii jaahiliyada (Bukhaari iyo Muslim).

Ummu Cadiyah ilaahay raali ha ka noqdee waxay tidhi, markaanu kalsoonidayada siinay nabiga N.N.K.A waxuu naga codsaday in aanaan ooyin (xilliga dhibka iyo murugada)

*Abu maalik al-Ashcari ilaahay raali ha ka noqdee waxuu yidhi, nabiga N.N.K.A ayaa yidhi, waxa jira afar dabeecadood oo umadaydu leedahay kuwaas oo ay ka soo qaateen xilligii jaahiliyada waligoodna iskama daynayaan. Waxaanay yihiin, ku baadidoonka sharaf wanaaga la samaynayo; cayda iyo ceebaynta dhexdooda taas oo hurisa shaki iyo colaad; ku raadinta roobka iyadoo la isticmaalayo cilmiga xidigiska iyo Baroorta. Xadiis kale ayaa Nabigu N.N.K.A ku yidhi, hadii gabadhi ay qabatinto ama caadaysto Baroorta oo aanay ka toobad keenin intaanay dhiman ka hor, maalinta qiyaamaha waxay soo baxaysaa iyadoo xidhan dhar naxaas ah iyo gaashaan ---- (Muslim)*

Abu Muusa ilaahay raali ha ka noqdee ayaa yidhi, nabigu N.N.K.A waxuu yidhi, qofka geeriyooday waxa dhibta in loogu baroorto noloshiisa. Marka gabadha barooranaysaa leedahay, waa maxay guuldaradan wayni, garabkaygu banaanaa waxaan waayay gacantaydii midig, kii hoyga iyo huga ii ahaa. Qofka geeriyooday markaas waa la jiidaa si xoogan, waxaana la waydiiyaa Ma waxaad ahayd gacanteedii midig?Ma waxaad ahayd garabkeedii iyo gargaaraheedii?Ma waxaad ahayd kii huga iyo hoyga u ahaa?.

Shaki kuma jiro in baroortu tahay xaaraan. Sidee ayay hadii kale noqon karaysaa marka ay muujinayaan murugo iyo farxad darro qof ilaahisii abuurta qaatay iyagoo ka hor imanaya dulqaadka ama sabirka? In sidaas loo dhaqmaa waxay sidoo kale dhaawac

gaadhsiisaa qofka barooranaya naftiisa. Marka qofku wajigiisa garaaco, timihiisa jiidayo, ilaahay ka baryayo inuu qof nafta ka qaado, isku jeexjeexayo maryihiisa, kaga cabanaya ilaahay cadaalad darro isagoo ku sheegaya qofka dhintay inuu lahaa qiime wayn iyo karaamo aanu isagu lahayn. Qof kasta oo sidaas yeelaa waxuu cadaaystay waxii laga reebay oo ah Baroorta iyo murugada xun ee quusta leh.

### **In la yidhaaho kelmado kooban**

Waa la ogol yahay in la yidhaahdo kalmado kooban marka loo ooyayo qof geeriyooday kol hadii kelmada la odhanayaa yihiin qaar run ah ayna ka reeban tahay baroor, qaylo iyo murugo quuseed iyo in laga xun yahay qadarka ilaahay. Kelmadaha noocaas ahi kama hor imanayaan sabirka, mana aha xaaraan. Anas ilaahay raali ha ka noqdee waxuu sheegay in abubakar ilaahay raali ha ka noqdee u soo galay nabiga N.N.K.A markii uu geeriyooday, wuxuu saaray gacmihiisa halkuu ku tukanayay waxaanu ka dhunkaday indhaha isagoo leh, Nabigaygiyow, saaxiibkaygii qaaliga ahaayow, kii aan ugu jeclaayow (Axmed).

Anas Ilaahay raali ha ka noqdee, waxa uu wariyay markii nabiga xanuunku ku siyaaday, wuu miyir doorsoomay. Faadumo ilaahay raali ha ka noqdee ayaa tidhi, alla aabahay xanuunka hayaa waynaa! Waxuu yidhi, dhib iyo xanuun danbe aabaha korkiisa ma ahaanayo maanta ka dib. Markii nabigu N.N.K.A uu geeriyooday, waxay tidhi, aabahayow kii ka jawaabay yeedhmadii rabigiyyow, aabahayow kii hoyaadkiisu janada yahayow, aabahayow Jabriil ayaa sheegi doona geeridaada. Markii nabiga la aasay, waxay tidhi, anisoow, side ayay kuugu suurta gashay inaad nabigii ilaahay dushiisa ku shubto camuud iyo boodh? (Bukhaari)

### **Qofka geeri ku timaado waxa dhiba sababta dadka u barooranaya**

Xadiis saxiix ah oo laga wariyay Cumar Binu Khadaab Ilaahay raali ha ka noqdee iyo wiilkiisii iyo Maqiirah Ibnu Shucba ayaa cadaaynaya in qofka geeriyooday lagu dhibo sababta dadka u barooranaya. Dhibaatana ma aha in la fahmo xadiiskan, mana aha xadiiskani in loo arko mid ka hor imanaya quraanka ama xeerarka guud ee sharciga islaamka. Ma aha macnaha xadiisku in qofka dhintay loo ciqaabo sababta dadka u barooranaya. Nabiguna N.N.K.A ma odhan qofka dhinta waxa lagu ciqaabaa sababta ehelkiisa u barooranaya. Waxuu yidhi waxa weeye, qof geeriyooday oo ku dhinac aasan ayaa laga yaaba inay dhibto marka qofka xabaasha ku dhow ku jira la ciqaabayow.



Sidaas ayaa marka qofka dhintay qaraabadiisu u baroortaan una murugoodaan sidii dadkii jaahliyadu ay samayn jireen, qofka dhintay waxuu ku damqadaa xabaashiisa sababta baroortooda. Tanina waa damqashada loo qaadanayo xadiiska.

## **TIRKA SADDEX iyo TOBNAAD**

### **Sabirku waa iimanka badhkii**

**Iimaanku waa laba gobol (qaybood):** Gobol waxa weeye dulqaadka (Sabirka) halka gobolka kalena ka yahay Mahadnaqa. Sidaas daraadeed, ilaahay subxaanuhuye wuxuu uga hadlay sabirka iyo mahadnaqa midkoodba midka kale:

*“Hubaashii kuwaasi waxay tilmaam u yihiin kuwa kasta oo sabra oo mahad naq badan (Ibrahim 14:5; Saba 34:19; Ash-shura 42:33)*

Sababta qayb ka mid ah iimaanku u tahay dulqaadashada (Sabirka) halka qaybta kalena ka tahay Mahadnaqa waa sida soo socota:

1. Iimaan waa odhaah taas oo tilmaamaysa ereyo, ficilo iyo ujeedooyin kuwaas oo dhamaan ku salaysan laba arin midkood, ficil iyo xakamayn. Ficil waxa loola jeedaa samaynta hawlo iyo shaqooyin la qabtay iyadoo la raacayo amarada ilaahay subxaanuhuye. Xakamayn, sida nafta oo laga fogeeyo ficilada danbiga ah waxay u baahan tahay sabir. Diintana dhamaanteed waxay ku soo ururaysaa labadan arin: fulinta waxii ilaahay ku faray iyo ka tagista (xakamaynta nafta) waxii ilaahay kuu diiday.
2. Iimaanka waxa sees u ah laba shay: Yaqiin iyo Sabir kuwaas oo aynu ka tixraacayno aayadan hoos ku qoran;

*Waxaanu dhexdooda ka magacownay hogaamiyayaal kuwaas oo bixinaya tilmaamo/hagayaal iyagoo raacaya amaradayada, sahayanaya sabirka iyo joogtaynta diinta iyo mucjisooyinkayaga (As-Sajdah 32:24)*

Waa ku toosnaanta diinta halka aynu ka ogaano xaqiiqada amarada ilaahay iyo waxuu inaga reebay, oo abalgud iyo ciqaab leh, sidoo kale sabirka ayaa ah midka suurta galiya in la fuliyo amarada ilaahay iyo in laga fogaado wax kasta oo uu inaga reebay. Qofna waligii kuma soo dhowaado inuu rumaysto amarada ilaahay iyo ka tagista waxuu inaga reebay oo jawaab ay u tahay helista abaal marintiisa iyo la kulanka ciqaabtiisa ilaa uu ku tooso diinta ilaahay run ahaan uga timi. Suurta galna ma noqon karto in aynu fulino amarada ilaahay sidoo kalena ka fogaano wax kasta oo la inaga reebay ilaa aynu la nimaadno sabir ama dulqaadasho. Sidaas ayaa Sabirku u yahay qayb iimaanka ah halka qaybta kalena tahay Mahadnaqa.

3. Dadku laba awoodood ayuu leeyahay, awooda ficil samaynta/wax qabadka iyo awooda ka fogaanta ama ka reebanaanta, taas ayaana maamusha dhaqankiisa. Sidaas ayaa qofku u sameeyaa waxuu jecel yahay ugana fogaadaa waxuu neceb yahay. Diinta dhamaanteedna waa samayn ficilo iyo iska dayn ficilo kale. Fulinta amarada ilaahay ama ka fogaanta wax lagaa reebay, sabirku hadii aanu jirin labadaba way adag tahay in la fuliyo.
4. Diinta dhamaanteed waa rajo iyo cabsi, rumeeyaha dhabta ahina qofka rajo qaba cabsina leh. Ilaahay ayaa subxaanuhuye yidhi;

*Waana ajiibnay, waxaana siinay Yaxye una hagaajinay haweenaydiisii, waxayna ahaayeen kuwo u dagdaga khayrraadka oo na barya iyagoo rajaynaya oo cabsanaya waxayna ahayeen kuwo noo khushuuca (Al-anbiyaa: 90)*

Nabiguna waxuu ku ducaysan jiray: Ilaahayow, adigaan naftayda kuu dhiibay, wajigaygana adigaan xagiisa u jeediyay. Arimahaygana adigaan kuu wakiishay waxaanan rajaynayaa ilaalintaada anigoo qaba rajadaada iyo cabsidaada ( Al-Bukhaari)

Sidaas ayaa qof rumeeyaha ahi u yahay mid rajo qaba sidoo kalena cabsi ay ku jirto, laakiin rajada iyo cabsidu waxa kaliya lagu aasaasi karaa marka sabirku sees u yahay: Cabsidu qofka rumeeyaha ah u keentaa sabira ama dulqaadasho halka in ilaahay la rajeeyaana ay keento mahadnaqa.

5. Ficil kasta oo qof sameeyay waa laba midkood; inuu yahay mid faaiido leh iyo inuu yahay mid khatar ama dhib u leh aduunyadiisa iyo aakhiraba ama waa mid faaiido u leh labadiisa daarood ( aduunyo iyo aakhiro) midkood, dhibna u leh mid kale. Waxaana u fiican qofku inuu sameeyo ficilka faaiido u leh aakhiradiisa. Taasina waa xaqiiqada **Iimaanka**: samaynta wax naftaada u fiican oo ah mahadnaqa iyo in laga dheeraado ama laga fogaado ficilka naftaada dhib ku ah kaas oo noqonaya Sabirka.
6. Dadku inta badan waxay ku sugan yihiin xaalad ay tahay in ay amarada ilaahay subxaanuhuye qaataan ama ay ka fogaadaan wax ilaahay ka reebay naftooda ama in ay aqbalaan qadarka alle. Xaaladahaas oo dhan, waxa ay tahay in lagu waajaho ama lagaga gudbo sabir iyo mahadnaq. Raacista amarada ilaahay waa mahadnaq, in laga tago ama laga dhowrsoonaado waxii ilaahay inaga reebay iyo lagu qanco qadarka ilaahay waxay koobsanaysaa Sabirka.
7. Qofka waxa uu yahay mid ay si joogta ah dabada uga riixayaan/jiidayaan labo jiho oo iska hor imanaya : inuu yahay mid u riyaaqay oo ay jiidatay

dhalanteedka aduunka ee ah mid farxadeed iyo jacayl, ama inuu yahay mid ka jawaabay yabooaha ama yeedhmada ilaahay subxaanuhuye iyo maalinta aakhiro oo ah jano aan dhamaad lahayn oo ilaahay u diyaariyay. In laga hor yimaado xiisaha dooniseed ee nafta waxay jeceshahay waa Sabirka sidoo kale in la aqballo ilaahay subxaanuhuye yaboohiisa iyo maalinta aakhirana waa mahadnaq.

8. Diintu waxay ku salaysan tahay laba arimood: Go, aan qaadasho iyo joogtayn, kuwaas oo ku sugan ducadii nabigeena N.N.K.A uu yidhi, ilaahayow waxaan ku waydiistay inaad ii siiso sugnaanshiyo arimahayga oo dhan, waxaan ku waydiistay go,aan qaadasho ku joogo marka laga gudbayo jidka siraad.

9. Diintu waxa u sees ah runta (xaqqa) iyo Sabirka, sida ku sugnaatay aayadan;

*Faracii kuwaan la xanbaarnay nabi Nuux, wuxuuna ahaa adoon Eebe oo shugri badan. (Al-isra: 3)*

Dadka waxa looga baahan yahay in ay si run ah u shaqaysto naftiisa iyo dadka kaleba, taas ayaana ah cadaynta dhabta ah ee Mahadnaqa, laakiin qofna ma samayn karo taas sabirka la,aantiis. Sidaas awgeed, sabirku waa Iimaanka badhkii. Ilaahay ayaana ugu garasho badan sida ugu fiican.

## **TIIIRKA AFAR iyo TOBNAAD**

Sabirka wuxuu ka mid yahay tayooyinka ugu muhiimsan ee laga rabo qof kasta oo danaynaya ilaahay subxaanuhuye jacaylkiisa, sidaas ayaana Sabirku yahay midka kala saara kuwa ka run sheegaya balantooda iyo kuwa been ka sheegaya. Heerka sabirka loo baahan yahay si loogu adkaysto duruufaha iyo dhibaatooyinka lala kulmo si loo raali galiyo midka la jecel yahay waxay cadaysaa daacadnimada qof jecaylkiisa. Dad badan ayaa ku dooda in ay ilaahay jecel yihiin, hase yeeshee marka la dhadhansiiyo dhibaato iyadoo lagu eegayo waxay ilaabaan ama lumiyaan dereenkii jacayl ee runta ahaa . qofna ma dhamaystiro jecaylka ilaahay marka laga reebo kuwa degen ee Sabirka badan. Hadii aanay jiri lahayn imtixaanka waqtiga adag iyo daacadnimadu, lama cadayn kareen qofna sida uu uga run sheegayo daacadnimada jacaylka ilaahay. Qofkasta oo ilaahay jacaylkiisu ku wayn yahay wuxuu leeyahay heerka sabirka ugu sareeya.

Sidaas darteed, Ilaahay wuxuu siiyay awliyadiisa sabirka tayo ahaan ugu sareeya iyo in ay noqdaan kuwa loogu jecel yahay. Waxaanu ilaahay Subxaanuhuye ku yidhi adoonkiisii Ayuub N.K.A dhab ahaan ayaan ugu helay Sabir iyo hayinimo. Siduu ugu fiican yahay shaqadayada waxkastuu sameeyaana xagayaga ayay u soo noqonayaan (Suuratul Saad 38:44).

Ilaahay subxaanuhuye wuxu ku ilhaamiyay kuwa ugu jacaylka badan wax kasta oo uu abuuray in ay yeeshaan Sabir si ay u qabalaan qadarkiisa waxaanu u sheegay in sabirku ku yimaado ama lagu helo kaliya gargaarka ilaahay iyo garabgalkiisa. Wuu sharfay kuwa leh sabirka waxaanu ugu balan qaaday abaalgudka ugu fiican; kuwa kale abaalgudkooda waa la sheegay waana wax kooban balse kuwa sabirka badan abaalgudkoodu waa bilaa qiyaas. Sabirka ama dulqaadku waa wax ahmiyad wayn u leh islaamnimada, Iimaanka iyo ixsaanka sidoo kalena waa qayb wayn oo ka mid ah iimaanka iyo talo saarashada allaaah( qof inuu isu dhiibo ilaahay subxaanuhuye).

### **Sabirka ilaahay dartiis, Gargaarka ilaahay iyo aqbalaada qadarkiisa**

1. **Sabirka ilaahay dartiis:** waxe weeye iyadoo la rajaynayo ama la filanayo abaalgudkiisa iyo cabsi laga qabo ciqaabtiisa
2. **Sabirka Gargaarka ilaahay:** marka qofku rumaysan yahay in aanu dulqaad ama sabir lahayn iyo awood uu ugu abuuru sabir naftiisa halkii uu ka aqoonsan lahaa in aanay awood iyo xoog jirin una sugnaanin cid kale oo aan ilaahay subxaanuhuye ahayn.

- 3. Sabirka in la aqbalo qadarka ilaahay:** marka qofku aaminsan yahay in ilaahay subxaanuhuye yahay midka kaliya ee maamula arimaha aduunka, waxay u sahlayaa inuu si sabir leh u aqbalo xukunka iyo qadarka ilaahay subxaanuhuye iyadoon loo eegayo waxa ujeedadu tahay marka loo eego xaalad fudud iyo mid dhibaato.

*Sabirka ilaahay dartiis loo sameeyo wuu ka sareeyaa sabirka loo sameeyo helista gargaarkiisa, sababtuna waa Sabirka ilaahay dartiis waa qiritaan ah ilaahay inuu yahay allaah, halka sabirka lagu rajaynayo gargaarkiisa uu yahay qiritaanka inuu yahay Rabbi. Waxkasta oo xidhiidh la leh inuu yahay Allaah, sida sabirka dartiis loo sabro waa cibaado waanay ka saraysaa dhinaca darajada wax kasta oo xidhiidh la leh inuu yahay Rabbi, taasina waxay noqonaysaa doonista gargaarkiisa oo ah inuu Sabir ku siiyo. Cibaadadu waa hadafka ugu mudan uguna muhiimsan, halka doonista gargaarkiisu ay la macno noqonayso dhamaystirka hadafka. Hadafkuna waa in loo baahday ilaahay dartiis, laakiin ujeedadu waa in laga helo waxyaalo kale dartood. Sabirka ilaahay gargaarkiisa lagu doonayo waa ay ka siman yihiin kuwa rumeeyay iyo kuwa aan rumayni, wanaaga iyo xumaanta si siman, halka sabirka ilaahay dartiis uu la mid yahay baadidoonka dariiqii rasuulada, anbiyada iyo rumeeyayaasha dhabta ah. Sabirka dartiis loo sameeyaa iyadoo loola jeedo raali galintiisa, halka sabirka gargaarkiisa lagu dalbayo uu noqon karo xaalado ilaahay raali galiya iyo qaar aan raali galinba.*

*Sabirka iyadoo la adeecayo amarada ilaahay iyo ka fogaanta waxii uu reebay waxuu ka sareeyaa sabirka ah in la aqbalo qadarka ilaahay, sababtuna waxa weeye sabirka adeecida loo sameeyaa waxuu ku yimaadaa doorashada qofka, laakiin sabirka ah iyadoo la aqbalayo qadarkiisu uu yahay mid uu ku qasban yahay qofku.*

### **Darajooyinka kala duwan ee Sabirka**

- 1. Sabirka ilaahay dartiis loo sabro iyo midka lagu sugayo gargaarka ilaahay:** qofkaasi wuxuu leeyahay sabirka ilaahay dartiisa iyo ku sabirka iyadoo la rajaynayo gargaarkiisa, isagoo qofkaasi aqoonsan in aanu awood isagu haba yaraatee lahayn waxkasta oo ay tahay, taasina waa darajada ugu saraysa ee laga gaadho sabirka.
- 2. Sabirka loo sameeyo ilaahay dartiis laakiin aan lagu doonayn gargaarkiisa:** dadka sidaa yeelaa waxay doonayaan in ay sabir yeeshaan ilaahay dartiis loo sabro, laakiin si niyad ah uma dalbayaan gargaarkiisa, markaa waxa liita aaminkooda iyo talasaarashadooda. Dadka noocaasi waxay yeelan doonaan dhamaad fiican, laakiin waa ay liitaan dhinaca talo-saarashada (Tawakkul)

mana karaan in ay gaadhaan inta badan waxay doonayaan. Tanina waa xaalada daacadnimada laakiin ah rumeeye liita.

3. **Sabirka ilaahay gargaarkiisa:** qofka noocaasi waxuu dalbayaa ilaahay gargaarkiisa waxaanu taladiisii u dhiibtay ilaahay, isagoo qiraya inaanu lahayn awood iyo xoog midna wax kasta oo ay tahay, laakiin sabirkiisu ma,aha ilaahay dartiis, maadaama aanu ahayn sabirkiisu mid loo sababtay gudashada cibaado. Tanina way u suurta galisaa gaadhista doonistiisa balse dhamaadkeedu waa midka ugu xun. Tusaale ahaan; dadka sabiraas lihi waa hogaamiyayaasha kufaarta iyo kuwa raacaay shaydaanka, maadaama sabirkoodu ku yimi doonista gargaarka ilaahay oo kaliya laakiin aanu haba yaraatee ahayn mid ilaahay dartiis loo sameeyay.
4. **Markaanu jirin sabirku gabi ahaanba:** kani waa midka ugu hooseeya, qofka noocaas ku sifoobaana waxa uu dhaxalsadaa nooc kasta oo guuldaro ah.

Kuwa leh sabirka ay u sameeyaan ilaahay dartiis iyo doonista gargaarkiisu waa kuwa xoogan wax badana ku guulaysta. Kuwa leh sabirka ilaahay dartiis ah laakiin aan dalbanayn gargaarkiisuna waa haboon yihiin laakiin waa dad xun. Kuwa aan haba yaraatee lahayn sabir loo sameeyay ilaahay dartiis iyo sabir lagu doonayo gargaarkiisa midnaba waxa hafisay guuldaro.

## **TIRKA SHAN iyo TOBNAAD**

### **Mahadnaqa lagu xusay quraanka**

Ilaahay waxuu inoo sheegayaa:

*Ee i xusa aan idin xusee ajarna idin siiyee, iguna mahadiya haygana gaaloobina .(Al-Baqra:152)*

Sidoo kale wuxuu ilaahay inoo sheegay in kaliya kuwa u mahadceliya ay run ahaan u caabudaan

*kuwa xaqa rumeeyow wax ka cuna wanaagaan idinku arsuqnay, kuna mahadiya Eebbe hadaad tihiin kuwo isaga caabudi (Al- Baqra:172)*

Ilaahay waxuu xusay mahadnaqa isagoo barbar dhigay limaan. Waxaanu cadeeyay in aanu waxba ka faa,iidayn inuu ciqaabo dadkiisa hadii ay u mahad celiyaan rumeeyaana.

*Muxuu ku fali Eebbe cadaabkiina hadaad mahadisaan oo rumaysaan Eebbena waa mahadiye waana oge (An-nisa: 147)*

Si kale aan u sheegno: hadii qofku ka soo baxo fulinta waajibaadka loo abuuray, oo noqonaya mahadnaqa iyo iimaanka , maxuu ilaahay ku falayaa ciqaabtiisa?

Ilaahay dadka wuxuu u qaybiyay laba nooc, dadka mahadnaqa (shukr) iyo dadka diiday mahadnaqa oo ah (Kufri). Midka ilaahay subxaanuhuye agtiisa loogu neceb yahayna waa Kufri, midka loogu jecel yahayna agtiisuna waa mahadnaqa iyo dadka mahadnaqa: *Waxaanu tusay dadka dariiqa: haduu ka mahadcelinayo iyo haduu noqonayo mid aan mahadcelin (Suurada Al-insan 76:3)*

Nabi Suleemaan N.K.A wuxuu quraanka ku yidhi; *wuxuu yidhi kay agtiisa ahayd ogaanshaha kitaabka anaa kuu keeni ishada laabideeda horteed(ilbidhiqsi) markuu arkay agtiisa isagoo ku sugan wuxuu yidhi kani waa fadliga Eebbahay inuu imtixaamo inaan ku mahadiyo iyo inaan ka gaaloobo, cidii ku mahadisa wuxuu u mahadiyay naftiisa, cidii gaaloowdana Eebbahay waa ka kaaftoon yahay waana sharaf badanyahay.(An-naml 27:40)*

Sidoo kale Ilaahay subxaanuhuye wuxuu yidhi; *Iyo markuu Eebbiihin ogaysiiyay hadaad shugriidaan waan idiin kordhin, hadaad gaalawdaana caadaabkaygu waa daranyahay.(Ibraahim 14:7)*

*hadaad galoowdaan dadow Eebe waa idinka kaaftoomay ugamana raali aha adoomihiisa Gaalnimo, hadaad ku mahadisaana wuu idinka raali noqon, nafna nafkale danbigeeda maqaado,*



*waxaana laydiin celin Eebbihiin xagiisa, wuxuuna idinka warami waxaad camal fasheen, wuxuuna ogyahay waxa laabta (qalbiga)kusugan.(Az-Zumar 39:7)*

Aayado badan ayaa quraanka ku jira oo ilaahay is barbardhigay kuwa mahadceliya iyo kuwa ka gaalobay nimcadiisa tusaale ahaan;

## **Abaalgudka mahadnaqa**

Abaalgudka in laga mahadceliyo nimcada ilaahay adoomihiisa ku galadaystay malaha xad iyo xuduud midna; *hadaad galoowdaan dadow Eebe waa idinka kaaftoomay ugamana raali aha adoomihiisa Gaalnimo, hadaad ku mahadisaana wuu idinka raali noqon, nafna nafkale danbigeeda maqaado, waxaana laydiin celin Eebbihiin xagiisa, wuxuuna idinka warami waxaad camal fasheen, wuxuuna ogyahay waxa laabta (qalbiga)kusugan( Ibraahim 14:7 )*

Dhinaca kalena, abaalgudada kale iyo bixinta waxyaalo qaaliya ee naftu u baahan tahay waxay ku xidhan yihiin shuruudo ay sees u tahay ilaahay doonistiisa, tusaale ahaan;

- In qof laga kor qaado faqriga

*Kuwa xaqa rumeeyow mushrikiintu ( gaalada ) waa nijaas ee yayna masaajidka xurmaysan u dhawaanin sanadkan kadib, hadaad ka cabsataan saboolnimana wuxuu idinku hodmin Eebe fadligiisa haduu doono ileen waa oge falsane (Tawbah 9:28 )*

- Salaada iyo cibaadooyinka kale oo laga jawaabo ama la guto

*Isaga ayuunbaana baana baryaysaan oo faydi waxaad ka baryaysaan haduu doona waanad halmaamaysaan waxaad la wadaajinaysaan. ( Ancaam 6:41 )*

- Risqiga

*Eebbe waa u naxariis badan yahay adoomihiisa wuxuuna arsuqaa ciduu doono, waana xogbadane adkaade ah ( Ash-Shuuraa 42:19 )*

- Danbi dhaafka

*Ilaahay isaga ayaa mulkiga samooyinka iyo dhulkana leh waxuu u danbi dhaafaa cida uu doono waxaanu cadaabaa cida uu doono Ilaahayna wax kasta waa mid awooda ( Al-Fatax 48:14 )*

- Naxariista wayn

*Markaas Eebbe ka tawbad aqbaloo intaas kadib ciduu doono Eebbana waa danbi dhaafe naxariista ( At-tawbah 9:27 )*

Laakiin ilaahay subxaanuhuye waxuu ka yeelay abaalgudka mahadnaqa mid ka madax banaan xaalad oo dhan; *Nafna ma aha tii dhimata idinka Eebbe la'aantiis waa kitaab mudaysan, ruuxii doona abaalka aduunyo wax baan ka siinaynaa , ruuxii doona abaalka aakhirana waxbaan ka siinaa, waxaana abaalmarinaa kuwa shugriya (Cimraan 3:145 )*

*Nabi Muxamadna ma aha waxan Rasuul ahayn, waxaa tagay Hortiis Rasuulo Ee haduu dhinto ama la dilo mawaxaad u gadoomaysaan cidhibtiinii(dhib) ruuxii ugadooma cidhibtisii (gaalooba) kama dhimo Eebbe waxba, wuuna Abaal marin kuwa ku shugriya.( Cimraan 3:144 )*

### **Iblayska iyo Mahadnaqa**

Markuu cadawga ilaahay oo Iblis iyo waxii la hal maala ah (shaydaan) ay ogaadeen fadliga mahadnaqa, waxay mihnadoodii oo dhan isugu geeyeen in ay dadka kala dagaalamaan;

*Waxaana kaga iman hortood, gadaashooda midigta iyo bidixda mana helaysid badankooda oo shukriya ( Al-Acraaf 7:17 )*

Ilaahay waxuu ku tilmaamay dadka mahadnaqa in ay yihiin tiro yar; *waxay u samayn sulaymaan wuxuu doono oo mixraabyo (fooqaaq) iyo suurooyin, iyo xeedhooyin dar oo kale ah iyo dharyo sugan waxaana ku nidhi Fala ehelka Da'uudoow mahadnaq, waxana yar adoomadayda shugriya yar ( Saba 43:13 )*

### **Mahadnaqa iyo Cibaadada**

Ilaahay waxuu ku qeexay quraanka in dadka kaliya ee sida runta ah u caabudaa ay yihiin kuwa mahadceliya ama mahadnaqa badda, markaas kuwa aan ka midka ahayn dadka mahadnaqa kama mid noqonayaan dadka Cibaadada:

Ilaahay subxaanuhuye waxuu u tilmaamay adoonkiisii Muuse N.K.A inuu ku aqbalo waxii uu dhaxalsiiyay isagoo mahadnaqaya; *wuxuu yidhi Eebbe, muusow waxaan ka doortay dadka ( sebenkan) diridayda iyo lahadalkayga dartiis ee qaado waxaan ku siiyay ahawna kuwa mahadiya.(Al-Acraaf 7:144 )*

Ilaahay subxaanuhuye waxuu inoo sheegay in raalinimadiisa lagu helayo mahadnaqa ama mahadcelinta (shukri);( Az-Zumar 39:7 )

Ilaahay waxuu ku amaanay Nabi Ibraahim N.K.A inuu ahaa mid ku mahadnaqa galadaha ilaahay siiyay: *Nabi ibrahiim wuxuu ahaa umad (khayr fale) Eebbe addeece xaqa u iishe mana ka mid ahayn mushrikiinta. (kuna shugriya nimcada Eebbe wuuna doortay wuxuuna ku hanuuniyasy jidka toosan ( An-Naxal 16:120-121 )*

Ilaahay subxaanuhuye waxuu sheegay in Mahadnaqu ahay ujeedada ka danbaysay abuurta oo dhan; *Eebe waxa uu idinka soo bixiyay caloosha hooyooyinkiin waxba idinkoon ogayn wuxuuna idiin yeelay maqal iyo Arag iyo Quluub inaad kushugridaan Eebbe ( An-Naxal 16:78 )*

*(Dhab ahaanbuu idinku gargaaray Eebbe (maalintii )Badar idinkoo Dulaysan (Tabaryar) ee ka dhaworsada Eebbe waxaana mudantihii inaad ku mahadisaan ( Al-Cimraan 3:123 )*

Maadaama ay mahadcelintu tahay sababta ka danbaysay abuurta, mahad celintu sidoo kale waxay noqonaysaa sababta ka danbaysay soo dirista rasuulka N.N.K.A

*Kuwa ilaahay rumeeyayoow kaalmaysta Sabirka iyo Salaada ilaahay waxa uu la jiraa kuwa sabra (Al- Baqarah 2:15 )*

## **TIIIRKA Lix iyo TOBNAAD**

### **Axadiista lagu xusay Mahadnaqa/Mahadcelinta**

Waxa laga wariyay in nabigu N.N.K.A uu habeenkii oo dhan soo jeedi jiray isagoo u taagan cibaado ilaa ay lugihiisu ay ka bararaan. Markii la waydiiyay, maxaad sidaas u yeelaysaa iyadoo ilaahay subxaanuhuye kaa dhaafay danbigaaga dhamaan mid hor iyo mid danbe? Waxuu ku jawaabay, miyaanan ahayn adoon mahadnaqa waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim.

Nabigu N.N.K.A waxuu u sheegay Mucaad Bin Jabal Ilaahay raali ha ka ahaadee: ilaahay dartiis ayaan kuu jeclahay, markaa ha ilaabin salad kasta dabadeed inaad tidhaahdo, Ilaahayoow, igu caawi inaan ku xusuusnaado iyo inaan kuu mahad celiyo iyo inaan ku caabudo ( Ahmed iyo tarmadi ayaa wariyay)

Hishaam Ibnu Curwa ayaa yidhi: ducada nabiga N.N.K.A waxa ka mid ahaa Allahayoow igu caawi inaan ku xusuusnaado, inaan kuu mahadceliyo iyo inaan si fiican kuu caabudo.

Ibn Cabaas Ilaahay raali haka ahaadee waxa uu ka wariyay nabiga N.N.K.A inuu yidhi waxa jira afar tayyo, qof kasta oo la siiyay waxa hubaashii la siiyay waxii ugu fiicnaa aduunyadan iyo mida ka danbaysa ee aakhiro. Waxaanay yihiin, qalbi mahadnaq badan( oo ah mid ilaahay u mahadnaqa) carab xusuus badan ( kaas oo markasta ilaahay ka hadlaya), jidh joogtayn leh ( jidh marka la imtixaamo joogteeya sabirka ilaahay dartiis), iyo xaas diin iyo cibaado badan ( taas oo aan khiyaamayn ninkeeda jidh ahaan iyo maal ahaan midna). Al-Qasim Ibnu Muxamed waxa uu ka wariyay Caasha Ilaahay raali ha ka ahaadee in nabigu N.N.K.A uu yidhi ; lama siinin nimco ka qiime badan adoonka oo ka wayn marka uu aqoonsan yahay in ay ilaahay uga timi, laakiin abalgudkeedu waxay noqonaysaa mid u qoran. Adoonka kasta oo ka murugooda ama ka xun danbi uu sameeyay, ilaahay wuu u danbi dhaafaa ka hor inta aanu adoonku danbi dhaaf dalbanin. Qofka maro ku iibsada lacagtiisa dabadeed gashada isagoo ilaahay uga mahad celinaya, ilaahay wuxuu uga danbi dhaafaa ficiladiisa xun ka hor inta aanay maradii gaadhin jilbihiisa.

Nabigu N.N.K.A wuxuu yidhi, Ilaahay subxaanuhuye way farxad galisay hadii adoonkiisu marka uu wax cunayo, ilaahay uga mahadnaqo cuntada marka uu wax cabayana uga mahadceliyo (muslim)

Shu'bah ayaa yidhi, al faadil Binu Fudalaa ayaa wariyay in Abu Rajaax Al-Utaridi inuu yidhi, mar waxaanu aragnay Cimraan Ibnu Xusayn oo xidhan maryo qurux badan oo aan waligood hore loo arag. Cimraan ayaa noo sheegay in nabigu N.N.K.A uu yidhi, hadii ilaahay adoonkiisa wax wanaagsan siiyo, ilaahay wuxuu jecel yahay in ay ka muuqato nimcadiisu adoonka dushiisa.

Ibnu Shucayb ayaa ka wariyay aabihiis iyo awoowgiis in nabigu N.N.K.A uu yidhi; cuna, caba oo bixiya sadaqada idinka oon tasaruf samayn ama aan istustusayn dadka sidaas ayaana ilaahay jecelyahay in ay u saamayso adoonkiisu waxii nicmo ah ee uu ku galadaystay.

Shu'bah ayaa ka wariyay Abu- Isxaaq oo ka wariyay Abu-Khawaas kaas oo ka soo wariyay aabahiiis oo yidhi, waxaan u imi nabiga ilaahay N.N.K.A markaas ayuu ii eegay maryo xumadayda iyo uskagayga. Waxaanu igu yidhi, miyaanad waxba haysan wax hanti ah? waxaan ugu jawaabay, waan haystaa. Wuxuu I waydiiyay nooced haysataa? Waxaan ku idhi nooc kasta, ilaahay wuxuu I siiyay geel, fardo adhi iyo adoomo. Nabigu N.N.K.A wuxuu yidhi, hadii ilaahay waxaas oo dhan ku siiyay waa inuu kaa arkaa nimcadiisa dushaada.

Ibnu abid-dunya ayaa wariyay xadiiska Abu- cabdiraxmaan As-Salmi uu ka wariyay Ash-shacbi oo ka wariyay An-nucmaan ibnu bashiir kaas oo yidhi, nabigii N.N.K.A ilaahay ayaa yidhi; ka hadalka nimcooyinka ilaahay waa mahadnaq in la iska ilaabaana waa gaalnimo (Kufr). Qofka aan wax yar oo la siiyay ka mahad celini way adag tahay inuu wax wayna oo la siiyayna ka mahad celiyo, qofka aan dadka u mahadcelin uma mahadceliyo ilaahay, inaad dad la joogtaa waa deeq lagu siiyay inaad kaligaa tahayna waa ciqaab.

Ibnu-Abid -Dunya ayaa ka wariyay Caasha Ilaahay raali ha ka noqdee in ay tidhi, nabiga N.N.K.A ayaa ii soo galay waxaanu arkay in yar oo roodhi ah oo dhulka ku dhacday markaas ayuu soo qaaday oo masaxay waxaanu igu yidhi, Caashaay nimcada ilaahay ku siiyo si fiican u ilaali waxa laga yaabaa in marka ay guri ka tagto aanay dib ugu soo noqone.

Ad-Dardawi ayaa ka wariyay Camaar Ibnu abi Camaar oo ka soo wariyay Saciid Al-Maqbuuri oo ka soo wariyay Abu Hurayra ilaahay dhamantood raali ha ka noqdee inuu ka soo wariyay nabiga ilaahay N.N.K.A inuu yidhi; Ilaahay ayaa subxaanuhuye yidhi, kaalinta qofka rumeeyaha ah marka loo eego agtayda waxa ugu fiican: midka ii mahadceliya marka aan nafta ka saarayo jidhkiisa.

Abu-Hurayra N.N.K.A ayaa ka wariyay nabiga ilaahay N.N.K.A inuu yidhi; hadii mid idinka mid ahi rabo inuu arko nimcada ugu wayn ee ilaahay siiyay, ha eego kuwa isaga ka liita ee ka maqaam hooseeya oo yuusan eegin kuwa ka sareeya dhinaca haynta iyo maqaamka.

## **TIIIRKA Todoba iyo TOBNAAD**

### **Mahadnaqii Saxaabada iyo Taabiciyiinta**

Salmaan Al-Faarisi ilaahay raali ha ka noqdee wuxuu yidhi, waxa jira qof aduunyada guudkeeda lagu siiyay wax kasta oo nimco ah , markaas ayaa dib looga qaaday. Laakiin wuxuu sii waday mahadnaqa ilaahay ilaa dhamaanteed laga wada qaaday xataa sariirtiisii. Markaas ayuu sii waday mahadnaqa ilaahay. Nin kale oo isagana la siiyay nimco tiro badan aduunka guudkiisa ayaa la waydiiyay, maxaad ilaahay uga mahad celin lahayd ee ka mida deeqda uu ku siiyay? Ninkaa aya ku jawaabay, waxaan uga mahad celinayaa nimcadiisa taas oo hadii cidi I waydiisan lahayd in aan siiyo dhamaan waxaan haysto aanay iigu badali kartaan. Maxay noqon kartaa taasi? Waxa waydiiyay ninkii labaad, miyaanad arkayn waxa yidhi ninkii koowaad! Waxaan haystaa laba indhood, carabka, gacmaha iyo lugaha.

Mukhalad Ibn Abnu Al-Xusayn ayaa yidhi, macnaha mahadnaqu waxa weeye in laga fogaado ficilada xun ama danbiga. Abu-Xasim ayaa isna yidhi, Nimco kasta oo aan ilaahay kugu dhowayni waa dhibaato iyo khasaare. Sulaymaan ayaa isna yidhi, Xusuusta qofka ee nimcada ilaahay ku galadaystay waxa sameeya qof ilaahay jecel ilaahay.

Xamaad Ibn Ziyaad ayaa ka wariyay Layta Ibnu Abi Burda inuu yidhi, waxaan tegey Madiina, halkaas oo aan kula kulmay Cabdilaahi Ibnu Salaam oo igu yidhi, ma jeclaan lahayd inaad booqato meel uu nebigii ilaahay N.N.K.A uu booqday oo lagu siin doono Saawiq iyo timir? Dabadeedna waxuu yidhi, marka ilaahay dadka soo kulmiyo maalinta qiyaame, wuxuu xusuusin doonaa nimcadiisa uu ku galadaystay. Mid ka mid ah adoomadiisa ayaa odhan doona; Ilaahayow mid iga xusuusi markaas ayaa ilaahay subxaanuhuye ku yidhaa, xusuuso markay ku soo food saarta taas iyo taas oo dhib ah dabadeedna aad i bariday, dabadeedna aan kaa kor qaaday. Xusuuso mar aad safraysay sidaas iyo halkaas dabadeedna aad i waydiisatay inaan safarkaaga wehel kaaga yeelo, dabadeedna aan kuu sameeyay wehel. Xusuuso markaad i waydiisatay Garab (Xaas), dabadeedna aan ku siiyay si aad u mehersato, kuwii kalena kaa fogeeyay. Adoonku waxuu taagan yahay rabigiisa hortiiisa oo xusuusinaya nimcooyinkii badnaa uu ku galladaystay. Dabadeed ayaa cida sheekadan warinaysaa (Layta) ooyay, waxaanu yidhi; waxaan rajaynayaa in aan qofna sidaas isu hortaagin rabigiis waayo qofka sidaas isu hortaagaa waxuu noqonayaa mid la ciqaabo ( hadii ilaahay nimcooyinkiisa la xusuusan waayo waxa xigaa waa ciqaab)

Bakar Ibnu Cabdullahi AL-Musani ayaa yidhi: marka qof la kulmo dhib waxa uu u tukudaa isaga oo baryaya rabigiis waxaana laga yaabaa in Ilaahay ka kor qaado dhibka. Dabadeed ayaa shaydaan u yimaadaa qofkaas isaga kula faqaya, waxaad samaysay uma xuma sidaad moodayso. Markaas ayaa waxa daciifa mahadnaqii qofku celin lahaa. Sasan waxa uu yidhi: xaqa ilaahay adoonka ku leeyahay kaas oo ku faraxsan nimcooyinka ilaahay ku galadaystay waxa weeye in aanu u isticmaalin nicmooyinkaas ficilo xun iyo denbi. Nin aqoon leh ayaa yidhi: Nimcada ilaahay inagaga ilaaliyay nolosha raaxada leh ayaa ka wayn nimcada kuwa la siiyay qaniimada iyo raaxada. Sidaas awgeed, waxaan door bidayaa in aan ku noolaado nolosha ilaahay u dooray nabigiisa halkii ay noloshaydu ka noqon lahayd mid aan ilaahay jeclaysan.

### **Mahadnaqa xiliyada duruufaha kala duwan**

Nin ayaa ku yidhi Abu Haasim, waa maxay mahadnaqa indhuhu? Wuxuu ugu jawaabay, hadii aad aragto wax wanaagsan oo khayr leh waa in aad ka sheekayso hadiise aad wax xun oo shar ah aad aragto iskaga aamus. Hadana wuxuu waydiiyay, waa maxay mahadnaqa dhegahu? Wuxuu ku jawaabay, hadii aad maqasho wax wanaagsan aqbal hadiise aad maqasho wax xun diid ama nac. Hadana wuxuu waydiiyay, waa maxay mahadnaqa gacantu? Wuxuu ugu jawaabay, ha qaadin wax aanad lahayn dibna ha u haynin (ha lex-jeclaysanin) bixinta Sakada. Dabadeed wuxuu waydiiyay, waa maxay mahadnaqa madaxu? Wuxuu ugu jawaabay, in aqoon lagu hayo ama lagu kaydiyo. Dabadeed ayuu waydiiyay, waa maxay mahadnaqa meelaha xaasxaasiga ah ee qofka? Wuxuu soo qaatay aayadan; *kuwa farjiyadooda xafida, haweenkooda iyo waxay gacantoodu hanatay mooyee, laguma canaanayo taas. Ruuxiise doona waxaas wax ka soo hadhay kuwaasi waa xadgudbeen (Suuratul Muminuun 23:5-7)*

Sida kuwa carabka oo kaliya ka yidhaa mahadnaqa balse aan bixinin mahadnaq si dhab ah noloshooda iyaga oo ogsoon nimcada ilaahay ku galladaystay waxay la mid tahay sida nin garan sita balse aan haba yaraatee xidhanin kaliya dusha ku sita: taasina kama celinayso dhaxanta, kulaylka, roobka ama barafka.

### **In Loo sujuudo mahadnaq**

Marka nabigii Ilaahay N.N.K.A uu helo war fiican, wuxuu la dhici jiray sujuud isaga oo uga mahad celinaya ilaahay. Cabduraxmaan Ibnu Coof N.K.A ayaa wariyay; nabiga N.N.K.A ayaa noogu soo galay masaajidka, dabadeed wuxuu u jeestay qiblada waanu sujuuday mudo dheer ayaanu sujuudsanaa. Markaas ayaan ku idhi; rasuulkii ilaahayow, waxaad sujuudsanayd mudo aad u dheer oo aan u malaynay in ilaahay



naftiiba kaa qaaday. Wuxuu yidhi, Jabriil aya war wanaagsan ii keenay. Waxanu ii sheegay in Allaah yidhi: qof kasta oo ii mahadceliya waxaan u soo celinayaa 60 jeer oo mahadnaqa, qofkasta oo ku salaama, waan soo salaamayaa. Sidaas ayaan u sujuuday uguna mahadcelinayay ilaahay *subxaanuhuye*.

Saciid Ibnu Mansuur ayaa ka wariyay in Abuubakar Ilaahay raali ka ha noqdee uu sujuuday mar uu maqlay war fiican oo ahaa in musaylama la dilay. Sidoo kale, Kacab Binu Maalik ayaa sujuud la dhacay markii nabigu N.N.K.A uu u sheegay in ilaahay u denbi dhaafay.

### **Wax kasta oo khayr ah oo qofku sameeyo ma daboolayso nimco kaliya oo ilaahay ku galadaystay**

Adoon ayaa ilaahay caabudayay 50 sanno, markaas ayaa ilaahay Subxaanuhuye u sheegay inuu u denbi dhaafay. Ninkii ayaa yidhi, ilaahay maxaad ii dhaaftay hadii aanan denbida samayn? Markaas ayaa ilaahay ku saliday xanuun adag qoortiisa markaas ayuu seexan kari waayay ilaahayna caabudi kari waayay. Markii xanuunkii ka ladnaaday awoodna u helay inuu seexdo ayay malaa,iigi u timi, markaas ayuu malaa,iigtii uga cawday xanuunka taabtay. Malaa,iigtii ayaa u sheegtay, ilaahay wuxuu ku yidhi, 50 sanadood ee aad I caabudaysay ayaa qiime ahaan u dhiganta fudaydinta lagaa kor qaaday xanuunka.

Ibnu Cabiid Dunya ayaa ka hadlay in Nebi Daa,uud N.K.A ilaahay waydiiyay, waa maxay nimcada ugu yare e nimcooyinkaaga? Ilaahay ayaa u cadeeyay, Daa,uud neefso, Daa,uud ayaa neefsaday sidaas ayaa ilaahay ugu xaqiijiyay tani waa nimcooyinkayga mida ugu yare ee aan kugu galadaystay.

Halkaas waxaan ka fahmi karaynaa macnaha xadiiska uu wariyay Sayd ibnu Saabit iyo Ibnu Cabaas Ilaahay raali ha ka noqdee: hadii ilaahay uu dadka ciqaabi lahaa circa iyo dhulka dhexdooda, wuu samayn kari lahaa iyadoo aanay ku noqoteen cadaalad darro, haduu u naxariisan lahaana naxariistiisa ayaa ka badan lahayd camalka wanaagsan ee ay samaynayaan.(abu daauud)

Xadiis saxiix ah nabigu wuxuu ku yidhi, qofna ma ku gaadhayo jannada camalkiisa. Dadkii ayaa waydiiyay, rasuulkii ilaahayow ma ilaa adiga? Wuxuu ugu jawaan ilaa aniga, ilaa ilaahay subxaanuhuye uu inagu daboolo naxariistiisa iy nimcadiisa. Ajriga qofku ma bixinayo mid kaliya oo nimcooyinka ilaahay sababtuna waxa weeye inta ugu yare ee deeq ilaahay iyo nimco ah ayaa aad uga miisaan badan camalka qof sameeyo oo dhan. Sidaas awgeed, waa in aan inta badan maskaxda ku hayno xaq ilaahay inagu leeyahay.

## Macnaha Erayada

Wali	Weli, Awliyo ( qof ilaahay gargaarkiisa koobsaday)
Ayat	Aaayad. Mucjisooyin ka Quraanka
Dajjal	Dijaal Cawar, Masiixul-Dajjal.
Dhikr	Dikriga Ilaahay, Xuska Ilaahay
Dhulm	Dulm, xad gudub i
Du'a	Duco, Baryada Ilaahay.
fard	Waajib, faral
Fitnah	Fidmo,
qusl	Wayso, is-daahirin
Xajj	Xaj-ka
Xalal	Xalaal ah in la cuno ama la isticmalo
Xaram	Xaaraan ah, Aan banaanayn in la cuno ama la isticmalo

Xay'a	Xishood, is- dhowris
Hijrah	Ka hijroodid, ka tegid. Sida markii Nebigeenu (NNKH) uu ka tegay Makka ee uu tegay medina
Ihsan	Heerka ugu sareeya ee qofku Ilaahay cibaado ugu adeeco.
Ilah, Allah,	Ilaahay (eebe) Subxanahu watacala.
liman	limaan, ka raali noqosho, aaminid
Jahiliyah	Wakhtigii ka horeeyay Nebigeena intaan lasoo dirin, wakhtigii jaahiliyada
Jihad	U dagaalanka jidka Ilaahay ( Diintaada, naftaada iyo Maalkaaga)
Jinn	Jinka, makhluuq laga abuuray dab kaasoo aan banii-aadamku arag
kaafir	Gaal ka hor yimi waxii Muhamed N.N.K.A lagu soo dejiyay
Makruuh	Camalka aan la jeclaysan ama la karaahiyaysanayo in la sameeyo, kazoo aan mamnuuc ahayn lakiin aan la dhiiri gelin in la sameeyo
Mandub	La jeclaystay in la sameeyo. Wuxuu la mi yahay Mustaxab oo ah camalka la jecelyahay
Mahdhur	Mamnuuc oo ah wax lagaa reebay
Mubax	Banaan in la sameeyo.
mushriken	Kuwa ilaahay cid la wadaajiya Mushrikiin.
Qada wa' qadr	Qadarka Ilaahay iyo Qaddihiisa
Rabb	Allaah, Eebe ama Ilaahay Subxaanuhuye
Sabr	Samir. dulqaad
Saxabah	Saxaabadii Nebiga (NNKH)
Salaf	Jiilkii ugu horeeyay ee Muslimiinta siiba jiilkii saxaabada iyo kuwii taabiciyiinta

Salah	Salaada, Shanta Salaadood
Sawm	Soomka
Shari'ah	Sharciga Islaamka, qawaaniinta iyo xeerarka islaamka
Shukr	Mahadnaq, mahadin, daacad iyo run
Siddiqun	Waa Saaxiib ( Rafiiq dhinaca diinta iyo niyada fiican ah)
Surah	Suurad quraanka ka mid aha (suuradaha quraanka)
Tabi'in	Taabiciyiintii soo gaadhay saxaabada nebiga (NNKH)
Taqwa	Alla Ka cabsi
Tawakul	In Ilaahay la talo saarto oo la tawakulo
Ummah	Ummad
Wajib	Waajib ah. Faral ah
Wali (Pl. Awliya)	Wali Ilaahay. Qofka Ilaahay ugu dhowaada dedaalkiisa. Eraygan laguma macnayn karo erayga luqada ingiriisida ee saint oo kiristan-ka iyo hindu ay isticmaalaan
Zahid	Saahid. Qofka wax ka taga
Zuhd	Wax ka teguda, ka saahidida

**SABIRKA IYO MAHADNAQA:** Waxa turjumaada kitaabkan laga soo dheegay lagana soo turjumay si kooban miida shaqadii qiimaha lahayd ee Ibnu Al-Qayim “ **UDDAT AS-SABIRIN WA DAAKIRAAT ASH-SHAAKIRIIN** oo ah shaqo qiime wayn u leh dadka ku hadla afka carabiga balse aanay suurta gal u ahayn in ay ka faaii,aadaystaan dadkeena luqada afka soomaaliga kaliya yaqaan. Kitaabkan, sheekhu AHUN wuxuu kaga hadlay si balaadhan Sabirka iyo Mahadnaqa kuwaas oo maalin kasta aynu ugu baahanahay nolosheena caadiga ah iyo Dabcan xidhiidhka adoonka iyo rabbigiis. In kasta oo Kitaabkan la qoray muddo hore oo fog, haddana kelmadaha Ibn Qayyim uu u weeleeyay muslimiinta waa qaar dhaxal-gal u ah ilaa maanta oo aynu joogno.

*Ibnu Qayyim Al-Jawziyyah (1292-1350), waxa uu ka mid ahaa aqoon yahanada islaamka u kacay xiligaas aan kor ku soo sheegnay, magaciisa dhamaystirani waxa uu ahaa Maxamed Ibnu Bakr Ibnu Ayuub Ibnu Sacad Assari, kunyadiisuna waxa ay ahayd Abu Abdulaah Shams Al-diin, waxase loogu yeedhi jiray inta badan Ibnu Qayim Al-Jawziyyah. Waxa uu ku dhashay magaalada Dimishiq ee dalka Suuriya, wuxuu ahaa wiilka uu dhalay caawiyihii Iskuulka Jawziyyah. Ibnu Qayim wuxuu qoray kutub fara badan oo ay ka mid yihiin kitaabka caanka ah ee Zaad Al-Ma'aad ( Sahayda Aakhiro) waxaanu ka bartay aqoonyahanka wayn ee Sheekha Ibnu Taymiyyah iyo sidoo kale isaga oo aqoon ahaan ka sii dab-qaatay Ibnu Kathiir iyo qaar kale.*